# WARBIXIN KU SAABSAN XAQA XORRIYADDA HADALKA:

## Halganka Loogu Jiro Ballaarinta Jawiga Dimuqraadi ee Marxaladda Kalaguurka Siyaasadda Soomaaliya

**Soomaaliya**
Agoosto 2016

UNSOM
UNITED NATIONS ASSISTANCE MISSION IN SOMALIA

UNITED NATIONS
HUMAN RIGHTS
OFFICE OF THE HIGH COMMISSIONER

Design and Layout: Jennifer Odallo
Printing: UNON Publishing Services Section – ISO 14001:2004-certified

Job No.: 17-00142/300 Copies/jao

# Contents


WARBIXINTA OO KOOBAN 1

HORDHAC 2

I. HANAAN SHARCIYEEDKA CAALAMIGA AH IYO KUWA QARAN EE LA XIRIIRA XAQA XORRIYADDA ARAGTIDA IYO HADALKA 4

1. Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka 4
2. Sharciga Qaran 6
   - *Sharciga Federaal ee Warbaahinta* *8*
   - *Xeerka Ciqaabta* *9*
   - *Hindise-Sharciyeedka La-dagaallanka Argagixisada* *10*

II. XORRIYADDA HADALKA IYO GEEDI-SOCODKA SIYAASADDA 11

1. Geedi-socodka Dib-u-eegista Dastuurka 11
2. Geedi-socodka Maamul Dhisidda 12
3. Geedi-socodka Doorashada 14
   - *Ka-qaybgalka Haweenka ee Arrimaha Siyaasadda* *16*
   - *Shirarka Siyaasadeed iyo Mudaaharaadyada* *17*

III. XAALADDA AMNIGA IYO XORRIYADDA HADALKA 19

1. Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed 19
2. Booliska 20
3. Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka 21

IV. NIDAAMKA CADAALADDA IYO XORRIYADDA HADALKA 25

V. WARBAAHINTA KA JIRTA SOOMAALIYA 28

1. Warbaahinta ka jirta Gobolka Banaadir, Jubbaland, Koonfur Galbeed iyo Galmudug 30
2. Warbaahinta ka jirta Puntland 31
3. Warbaahinta ka jirta "Somaliland" 34

VI. GUNAANAD IYO TALO SOO JEEDIN 37

**Ku socota Dowladda Federaalka Soomaaliya** **38**
**Ku socota Wariyeyaasha iyo Shaqaalaha Kale ee Warbaahinta** **39**
**Ku socota Beesha Caalamka** **39**

VII. LIFAAQDAYA 41

1. Khariidada Soomaaliya 41
2. Ereyada la soo gaabiyay oo inta badan la adeegsado 42
3. Jawaabihii ka yimid Maamulada 43

# Warbixinta oo Kooban

Warbixintan ay sida wadajirka ah u soo saareen Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM) iyo Xafiiska Ergeyga Sare ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Xuquuqul Insaanka (OHCHR) waxay diiradda saaraysaa xaqa xoriyadda fikirka iyo hadalka ee Soomaaliya marka loo eego marxaladda kala guurka dimuqraadiga. Warbixintu waxay qiimayn ku samaynaysaa horumarka la gaaray tan iyo sannadkii 2012 iyo caqabadaha lala kulmay intii lagu hawlanaa abuurida jawi demuqraadi ah oo ay muwaadiniinta Soomaaliyeed kaga qayb galaan geedi-socodyada ugu muhiimsan, sida dib-u-eegista dastuurka, dhisidda Dowlad Goboleedyada iyo geedi-soocodka doorashada. Sannadka 2016 waa marxalad xasaasi u ah kala guurka siyaasadda Soomaaliya, ka hor doorashooyinka "qof iyo codkiisa" ah ee la filayo inay dhacaan sannadka 2020.

Xorriyadda hadalku waxay kaalin muhiim ah ku leedahay dhismaha dowlado demuqraadi ah iyo xiliyada is-bedellada siyaasadeed. Ku dhaqanka xorriyadda hadalku waxay ogolaaneysaa in geedi-socodyada siyaasadda ay noqdaan kuwo furan, xor ah, cadaalad ah, oo sharciyad ku qotoma, waxayna fududayneysaa xiriir siyaasadeed oo ay dad badan ka qaybgalaan, waxayna xaqiijineysaa in la yeesho wadahadal bulsho iyo mid siyaasadeed oo waxtar leh oo ay dadka wada metela. In fursad la siiyo codadka kala duwan ee siyaasiyiinta, warbaahinta, iyo guud ahaan dadweynaha, waxay caqabad joogta ah iyo fursad muhiim ahba u tahay dimuqraadiyad kasta.

Warbixintu waxay sidoo kale falanqaynaysaa xad-gudubyada la xiriira xoriyadda hadalka ee ay UNSOM diiwaan-gelisay laga soo billaabo sannadkii 2012 ilaa 2016, oo ay ka midyihiin dilalka, garaacidda, kadeedidda ama dhibaateynta, xarigga sharci iyo sabab la'aanta ah iyo xabsiga sharci darrada ah, caddaalad iyo sharci marsiin la'aanta ama damaanadqaad la'aanta maxkamadayn caddaalad ah, iyo xarumaha warbaahinta oo la xir. Inkastoo xadgudubyadaas ay warbaahintu soo tebiso oo si guud iyo si gaar ahba ay cabasho uga soo gudbiyaan wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, ururrada warbaahinta iyo difaacayaasha xuquuqul insaanka, haddana waa dhif iyo naadir in hay'adaha dowladdu ay baaritaan ku sameeyaan kiisaska ama ay dacwad ku soo oogaan kuwa ka dambeeya xad-gudubyada. Isla-xisaabtan dhab ah waxaa la gaari karaa oo keliya marka si nidaamsan oo rasmi ah wax looga qabto isla-xisaabtan la'aanta, iyadoo loo marayo xaqiijinta in si wax ku ool ah loo qaado baaritaan, dacwadna lagu soo oogo, kadibna ciqaabta qofka xadgudubka geysta uu mutaysto si buuxda loogu fuliyo.

Weerarrada, hanjabaadaha weerar iyo noocyada kale ee dhibaataynta iyo faragelinta ah ayaa inta badan aamusiya wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, difaacayaasha xuquuqul insaanka ama hogaamiyeyaasha siyaasadda, taas oo ku khasbaysa inay isku sameeyaan faafreeb oo ay isaga aamusaan ama indhaha ka laabtaan arrimaha ay dhinacyada kale ee arrinta ku hawlan u arkaan inay yihiin kuwo xasaasi ah, oo ay ka midyihiin xaaladda arrimaha xuquuqul insaanka, doorashooyinka, musuq-maasuqa iyo xasaradaha guud ama arrimaha walaaca ku haya dadweynaha, xaaladaha degdegga ah iyo mudaaharaadyada dadweynaha. Hanjabaadahan iyo weerarradani waxay si kastaba uga hor imanayaan sharciga dalka iyo kan caalamiga ah, waxayna caqabad ku yihiin qulqulka xorta ah ee xogta iyo wararka, taas oo saamayn ku yeelanaysa awoodda ay muwaadiniintu u leeyihiin inay wax ku biiriyaan geedi-socodyada demoqoraadiga ah oo ay u maraan go'aan qaadasho xog ku salaysan oo laga qaato arrimo aad u farabadan oo kala duwan, sidaa darteedna, weerarrada iyo caga-juglayntu waxay meel ka dhac ku yihiin xuquuqda asaasiga ah ee xoriyada aragtida iyo hadalka.

Talooyinka ugu waaweyn ee loo soo jeediyay Dowladda Federaalka iyo dowlad goboleedyada Federaalka ee dhismaya waxaa kamid ah xoojinta qaab-samaynta sharciga iyo siyaasadda, taasoo lagu dhiirrigelinayo sidii lagu heli lahaa jawi ku haboon oo u suurtagelinaya dhammaan dadka Soomaaliyeed inay si xor ah u cabiraan aragtidooda, gaar ahaan marxaladdan xasaasiga ah ee siyaasadda Soomaaliya ay ku jirto iyo in la xaqiijiyo isla-xisaabtan ku aaddan xadgudubyada iyo ku takrifalka xuquuqul insaanka.

# Hordhac

1. Sanadkii 2012kii, Soomaaliya waxay meelmarisay Aragtida 2016 taas oo Soomaaliya ay ku dejisatay yoolka lagu dhamaystirayo dib u eegista Dastuurka, dhismaha qaran nabadoon oo demoqraadi ah iyo in la qabto doorashooyin qof-iyo-codkiis ah kahor 2016. Warbixintan ay wadajirka usoo saareen Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM) iyo Xafiiska Ergeyga Sare ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Xuquuqul Insaanka (OHCHR) waxay diiradda saaraysaa xuquuqda xoriyadda aragtida iyo hadalka ee Soomaaliya marka la eego marxaladda kalaguurka demoqoraadiga ah ee dalka. Warbixinta iyadoo diiradda saaraysa xuquuqdaas, ayay hadana waxay qiimayn ku samaynaysaa horumarka la gaaray tan iyo 2012ki iyo caqabadihi ka horyimid diyaarinta jawi demoqoraadi ah oo lagama maarmaan u ah in loo ogolaado dadka Soomaaliyeed inay si xor ah u muujiyaan aragtidooda, aragtiyadaas oo ay kamid yihiin kuwa ku saabsan geedi-socodyada muhiimka ah ee hadda socda ee lagu qaabaynayo mustaqbalka dalka, sida dib u eegista dastuurka, Maamul dhisidda iyo geedi-socodka doorashada.

2. Tan iyo 2012kii, Soomaaliya waxay samaynaysay horumar ku aaddan sidii lagu gaari lahaa Aragtida 2016: Waxaa socda dhismaha dowlad goboleedyada federaalka ah; qodobadii farsamo ee Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka waxaa lagu sameeyay dib u eegis, waxaana socda diyaargarow loogu jiro hirgelinta geedi-socod doorasho oo bedel u ah doorashooyin leh halbeeg caalami ah ee lagu taamayay balse loo arkay in aanay suurto gelaynin sanadkan. Dib u dhiska lagu sameeyay hay'adaha dowladda, oo ay kamid tahay hay'ad sharci-dejin oo shaqeysa, horay ayuu u socdaa, Baarlamaanka Federaalka ah wuxuu meelmariyay Hindise-Sharciyeedka Axsaabta Siyaasadda iyo kan lagu dhisay Guddiga Qaran ee Xuquuqul Insaanka kaas oo la saxiixay lana sharciyeeyay. Intaas waxaa dheer in qorshe hawleed loo sameeyay Khariidadi/ Tubti loo mari lahaa Arrimaha Xuquuqul Insaanka.

3. In la abuuro lana ballaariyo jawi ay dhamaan dadka Soomaaliyeed, ha ahaadeen bulsho weynta guud ahaan, wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, difaacayaasha xuquuqul insaanka ama mucaaradka siyaasadeed, ay aragtiyadooda si xor ah ula wadaagi karaan [dadka intiisa kale] ugana qaybqaataan doodaha qaran waa arrin muhiim u ah horumarka demoqoraadiyadeed iyo weliba kalsoonida lagu qabo geedi-socodka Dowlad dhisidda ee socda.

4. Isagoo hoosta ka xarriiqaya muhiimadda ay leedahay xaqqa xorriyadda aragtida iyo hadalka, ayaa Guddiga Xuquuqul Insaanka ee Qaramada Midoobay wuxuu u arkay inay "udub dhexaad u yihiin dhisidda bulsho demoqoraadi ah iyo xoojinta demoqoraadiyadda."[1] Sidaas darteed, Marxaladdan muhiimka ah ee geedi-socodka dhismaha hay'adaha Dowladda, UNSOM iyo OHCHR waxay u arkaan in la joogo waqtigi dib u eegis lagu samayn lahaa xaaladda xaqqa xorriyadda aragtida iyo hadalka iyadoo diiradda la saarayo dadaallada lagu abuurayo jawi dadka Soomaaliyeed oo dhan wax uga dhihi karaan geedi-socodyadan muhiimka ah iyo caqabadaha ay la kulmaan wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta iyo difaacayaasha xuquuqul insaanka,[2] iyo inay talooyin ka dhiibtaan sida wax looga qaban karo caqabadahaas.

5. Cutubka I wuxuu qeexayaa qaab-samaynta sharciyadeed ee caalamiga ah iyo kuwa qaran ee la xiriira xaqqa xorriyadda aragtida iyo hadalka, waxaa uuna sharraxaad ka bixinayaa sida looga hirgeliyo Soomaaliya, iyadoo iftiiminaysa daldaloolada ka jira dhanka badbaadada (protection) iyadoo loo kuurgelayo qaababka

1. Warbixinta Golaha Xuquuqul Insaanka, A/HRC/23/2, p. 7), 24 Juun 2013 (ka hadlaya kaalinta xorriyadda aragtida iyo hadalka ee awoodsiinta haweenka).
2 Wariye qasab ma aha inuu noqdo difaace xuquuqul insaan, laakiinse wuxuu qaban karaa hawsha difaace marka uu ka soo warramayo xadgudubyada iyo ku takrifalka xuquuqul insaanka.

iyo noocyada xadgudubyada. Caqabadaha gaarka ah ee qaababkaasi ay muujinayaan, gaar ahaan kuwa la xiriira hay'adaha amniga, iyo hay'adihi jaan-goyn lahaa oo aan jirin, waxaa arrimahaas looga hadli doonaa cutubyo kale oo loogu talo galay.

6. Cutubka II ilaa IV waxaa lagu eegayaa xorriyadda aragtida iyo hadalka ee hanaanka iyo hay'adaha siyaasadda, amniga iyo garsoorka, gaar ahaan marxaladaha dib u eegista dastuurka, Dhismaha hay'adaha Dowladda iyo geedi-socodka doorashada. Waxay tixgelinaysaa tallaabooyinka la qaaday tan iyo 2012ki iyo caqabadaha lagala kulmay samaynta jawi dadka Soomaaliyeed dhamaantood ay si xor ah ugu cabbiri karaan geedi-socodyada muhiimka ah ee ka horreeya 2020, waqtigaas oo la filayo inay qabsoomaan doorashooyin dadweyne oo leh halbeeg caalami ah, iyadoo la garowsanyahay in 2016ka ay marxalad muhiim ah u tahay kalaguurka siyaasadda Soomaaliya.

7. Cutubka V wuxuu eegayaa sida wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahintu ay ugu naaloon lahaayeen xorriyadda hadalka.

8. Warbixintu waxay kusoo gabagaboobaysaa talooyin dhowr ah waxqabad oo wax-ku-ool ah oo loo jeedinayo Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS), maamul goboleedyada, warbaahinta iyo beesha caalamka.

9. Xogta ay warbixintani xambaarsantahay waa natiijo ka dhalatay la-socodka xuquuqul insaanka ee UNSOM. Waxyaalaha gaarka u ah xaaladda Soomaaliya, oo ay kamid tahay colaadda socota, ayaa abuuraya in jawi adag ay UNSOM kusoo ururiso, kuna hubiso xogta iyo inay gasho socdaalo xaqiiqa raadin ah. Hadba intii suurtogal ah, ayay UNSOM wareysataa dhibanayaasha waxayna sidoo kale kutiirsantahay ilaha wararka ee shabakadaha ballaaran. Si wax looga qabto caqabadaha ku horgudboon gaarista ama helidda, UNSOM waxay samaysay habab kala duwan, oo uu kamid yahay dhismaha awoodda iyo tayada ilaha xogta si ay ula socdaan ugana warbixiyaan xuquuqul insaanka. Intaas waxaa sii dheer, UNSOM waxay tababarro u fidisay ururada bulshada, tababarradaas oo kusaabsan la-socodka xuquuqul insaanka iyo ka-warbixinta, halbeegyada caalamiga ah ee xaqa xoriyadda aragtida iyo hadalka.

10. Warbixinta waxaa lala wadaagay Dowlada federaalka iyo maamul Goboleedyada Federaalka ka tirsan iyo kuwa samaysmaya. Dowlada Federaalka ee Soomaaliya, Puntland, Jubbaland iyo "Somaliland"[3] waxay qireen qaar ka mid ah walaacyada lagu muujiyay warbixinta, waxayse diideen qaybo kamid ah warbixinta sida lagu muujiyay Lifaaqa VII.3. Qaybahaas badankood waxay ka muuqdaan talooyinka warbixintu xambaarsantahay waxayna ka dhiganyihiin fursado lagu sii wada shaqayn karo, iyo taageero farsamo oo loo fidiyo DFS iyo Dowlad Goboleedyada samaysmaya.

3 Jawaabteeda ayay "Somaliland" kaga soo horjeesatay adeegsiga calaamadaha soo xigashada marka la qorayo magaceeda, iyadoo sheegtay in taasi ay leedahay "macne eexanaya" iyo in magaca "Somaliland uusan ahayn mid muran ka taaganyahay iyo QM aysan su'aal ka keenin magaca iyadoo dhex gelinaysa calaamadaha soo xigashada."

# I. Hanaan Sharciyeedka Caalamiga ah iyo Kuwa Qaran ee la Xiriira Xaqa Xorriyadda Aragtida iyo Hadalk

## 1. SHARCIGA CAALAMIGA AH EE XUQUUQUL INSAANKA

11. Sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka wuxuu qeexayaa xaqqa xorriyadda aragtida iyadoo aan lagu samaynin wax faragelin ah[4] iyo xaqqa xorriyadda hadalka, oo ka kooban xaqqa raadinta, helidda iyo gudbinta xogta iyo fikradaha noocyadooda kaladuwan, oo ay kamid yihiin doodaha siyaasadeed, faallo qof uu ka baxshay arrimihiisa gaarka ah iyo arrimo khuseeya dadweynaha, raadinta codadka, doodaha kusaabsan xuquuqul insaanka, saxaafadda, muujinta dhaqanka iyo farshaxanka, baridda iyo ka doodista arrimo ku saabsan diinta.[5] Sidaas darteed, xattaa hadal loo arki karo inuu yahay mid aad meel-ka-dhac u ah waa la ogolyahay marba haddii uu soo hoos-gelayo qodobka 19(2) ICCPR.[6]

12. Iyadoo inta badan la is-raacsiiyo, ayaa haddana xaqqa xorriyadda aragtida iyo [xorriyadda] hadalku ay yihiin laba shey oo kala duwan. Sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanku wuxuu dhowraa nooc kasta oo ay tahay aragtidu.[7] Kadeed, cabsi-gelin ama faquuqid qof lagu sameeyo, oo ay kamid yihiin xarig, xabsi-gelin, maxkamadayn ama xabsi ku-hayn loo cuskanayo fikir uu qofku aamnisanyahay, waxay noqonayaan xadgudubyo ka-dhan ah sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka. Sidaas darteed, aaminsanaanta fikir lagama dhigi karo fal dembiyeed.[8]

13. Dhinaca kale, sharciga caalamiga ah wuxuu oglyahay in la xaddido xorriyadda hadalka laba sababood oo gaar ah awgood: iyadoo lagu ixtiraamaayo xuquuqda iyo sumcadda dadka kale, iyo in lagu ilaalinayo amniga qaranka ama kala dambaynta dalka ama caafimaadka bulshada ama anshaxa guud.[9] Sidaas oo ay tahay, xayiraadahaas looma fasiran karo qaab "halis" gelinaya xuquuqda [kale] ama abuuraya xaalad wax aan sharci ahayn ka dhigaysa sharci.[10] Sidoo kale, xayiraadahaas waa in "sharcigu ogolyahay" laguna sameeyay "qiimayn adag oo lagu sameeyay baahida loo qabo iyo faa'iidada ku jirta."[11] Intaas waxaa sii dheer, "xayiraadahaas waa in loo adeegsadaa oo kaliya ujeedooyinka loogu talagalay waana in si toos ah ula xiriiraan baahida sida gaarka loogugu asteeyay."[12]

14. Dowladuhu waa inay u hawlgalaan sidii lagu baabi'in lahaa caqabadaha xagga qaab-dhismeedka, sharci iyo fal ahaanta ee ku hor-gudboon in lagu naalloodo xaqa xorriyadda aragtida iyo hadalka. Sidaas darteed, waa in la sii diyaariyaa "tallaabooyin loogaga hortago weerarro lagu aamusinayo dadka adeegsanaya xaqa ay u leeyihiin xoriyadda hadalka", xayiraad kasta ee lagu soo rogo xorriyadda hadalka lama "adeegsan karo iyadoo marmarsiiyo laga dhiganayo aamusinta codadka u doodaya demoqoraadiyadda xisbiyada badan, mabaadi'da demoqoraadiyadda iyo xuquuqul insaanka." Sidaas darteed, weerarro sida xarig aan

---

4 Heshiiska Caalamiga ee Xuquuqda Madaniga iyo Kuwa Siyaasadda (ICCPR), qod. 19(1) oo qoraya in "qof walba wuxuu xaq u leeyahay inuu haysto fikrado faragelin la'aan". Soomaaliya waxay xubin ka noqotay ICCPR sannadkii 1990.

5 ICCPR, qod. 19 (2) iyo qod.9 Heshiiska Afrikaan ee Xuquuqda Insaanka iyo Dadka. Baaqa Mabaadi'da ee Xorriyadda Hadalka ee Afrika ayaa sidoo kale xaqiijinaya in "halka uu gaarsiisanyahay adeegga guud ee idaacadaha/telefishinada dadweynaha waa in si cad loo qeexaa uuna ka mid ahaado waajib lagu xaqiijiyo inay dadweynuhu helaan xog ku filan oo siyaasad ahaana isku dheellitiran, gaar ahaan xilliyada doorashada" (qod. 6).

6 Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaramada Midoobay, Faallo Guud No. 34, faq. 9 iyo 11 (soo xiganaya qod. 19, faq. 2 iyo 3, iyo qod. 20).

7 Isla meesha., faq. 11.

8 Isla meesha., faq. 9.

9 ICCPR, qod. 19(3) oo qeexaya in "adeegsiga xuquuqda ku qoran faqrada 2 ee qodobkan wuxuu xambaarsanyahay waajibaad iyo mas'uuliyado gaar ah. Sidaa darteed, waxaa la saari karaa xaddidaadyo cayiman, laakiin waxay noqon karaan oo keliya sida sharciga ku qeexan oo lagama maarmaan ah: (a) Qadarinta xuquuqda ama sumcadda dadka kale; (b) Ilaalinta amniga qaran ama kala dambeynta guud (ordre public), ama caafimaadka dadweynaha ama anshaxa."

10 Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaramada Midoobay, Faallo Guud No. 34 (2011), faq. 21.

11 Isla meesha., faq. 22.

12 Isla meesha..

sabab lahayn, xabsi-gelin, hanjabaadyo ka dhan ah nolosha, iyo dilka sinnaba u lama jaan-qaadi karaan xaqqan.[13]

15. Sharciga caalamiga wuxuu sidoo kale farayaa in xayiraad kasta oo sharciga waafaqsan ay "noqdaan kuwo si sax ah oo dhamaystiran loo qaabeeyay si qofku u nidaamiyo hab-dhaqankiisa si waafaqsan sharciga, waana in nidaamintaasi ay noqoto mid dadweynuhu gaari karaan."[14] Sidaas darteed, sharciga caalamiga ah wuxuu arkaa inay jiraan afar nooc oo ka mid ah xorriyadda hadalka oo Dowladaha laga doonayo inay mamnuucaan iyagoo u maraya sharciga caalamiga ah: caruurta oo loo adeegsado filimada ama sawirada jinsiga/galmada; hurinta xasuuq, nacayb ku salaysan diin ama isir nacayb taas oo ay ka dhalanayso hurinta takooris, colaad ama rabshad; iyo ku boorrinta argagixisnimo. Dowladaha lagama doonayo inay mamnuucaan noocyada kale ee xogta iyo hadalka ah, inkasta oo ay xayiraado kusoo rogi karaan xoriyadda hadalka ee kor ku xusan, tusaale ahaan haddii qof laga badbaadinayo eedeyn been abuur ah oo laga leeyahay ujeedooyin gurracan, ama marka laga hortegayo argagixisnimo. Sidaas oo ay tahay, xayiraadahaas la oglyahay dowladuhu marmarsiiyo ugama dhiga karaan "xakamayn sabab la'aan ah iyo faafreeb lagula kaco warbaahinta iyo in laga leex-leexdo daah-furnaanta ama la aamusiiyo hadalada dhaliisha ah ee loo jeedinayo siyaasadaha dalka."[15] Haddii ay dhacaan xadgudubyo ka dhan ah xorriyadda hadalka, waa in Dowladuhu diyaariyaan habki looga gar-naqsan lahaa.

16. Sidaas darteed, xadayntu waa inysan noqon mid sidii la rabo laga yeesho waana in si faahfaahsan loo fasiraa iyadoo maanka lagu hayo in xorriyadda hadalku ay shuruudaha looga baahanyahay bullsho demoqoraadi ah oo ka dheregsan mabaadi'da daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka.[16] Marka si gaar ah loogu eego Soomaaliya sanadka 2016, xorriyadda hadalku waxay gacan ka geysanaysaa xaqiijinta daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka ku aaddan maaraynta arrimaha dowladda iyo waxyaabaha kale ee danta guud, si bulshadu ay si buuxda oo toos ah oo macna leh uga qaybqaadato dhammaan dhinacyada bulshada. Sida lagu arkay wadamo badan oo Soomaaliya ay ka mid tahay, dowrka muhiimka ah wuxuu dhaliyaa xadgudubyo ay la kulmaan shakhsiyaadka ay kamid yihiin wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, hogaamiyeyaasha siyaasadda iyo muwaadiniinta kale oo lagu xadgudbo xuquuqdooda beni'aadan ee asaasiga ah, waxaa ka kamid ah xadgudubyadaas dilal, afduub, xabsi-gelin aan sabab lahayn, jirdil, kedeed, ilaalo la dul dhigo, baaris iyo qalabka oo lagala wareego, hanjabaado iyo noocyo kale oo xadgudub ah.[17]

17. Xaqqa xorriyadda aragtida iyo kan hadalka waxay xiriir dhow oo asaasi ah la leeyihiin xaqa ka-qaybgalka arrimaha dadweynaha ee loo marayo doorashooyin xor iyo xalaal ah.[18] Kala-duwanaanta aragtida iyo in si carqalad aan lahayn la isku-dhaafsado aragtiyada is-diiddan waa shardi muhiim ah oo lagu xaqiijinayo in bulshadu si laga baaraan-degay wax u kala doorato/xulato, waxayna udub dhexaad u tahay nidaam kasta oo demoqoraadiyadeed. Maqnaanshaha [hab] lagu ilaaliyo xorriyadda hadalka, soo bandhigidda iyo ka doodista arrimaha siyaasadda, amniga iyo xuquuqul insaanka, habkaas oo la jaan-qaadi kara geedi-socodyada nabadaynta iyo maamul-dhisidda ayaa ah arrin saamayn xun ku yeelanaysa sharciyadda maamul-goboleedyada federaalka ah ee ka samaysmaya Soomaaliya iyo weliba hay'adahooda iyo nidaamkooda siyaasadeed. Sharciga caalamiga ah waxaa kale oo uu tilmaamayaa in Dowladaha looga baahanyahay inay tallaabooyin sax ah qaadaan si loo ilaaliyo loona xoojiyo xorriyadda hadalka iyadoo lagu jaan-goynayo geedi-socodyada siyaasadeed iyo kuwa doorasho si loo xaqiijiyo dhaqan-gelin buuxda ee qodobka 25.[19] Qaraarkii Golaha Guud ee tirsigiisu ahaa 59/201 wuxuu shaaca ka qaaday in xorriyadda

13 Isla meesha., faq. 23. Guddiga Xuquuqul Insaanka iyo Dadyowga ee Afrika u Dhexeeya ayaa bixiyay Tusmayaal la mid ah oo la *socda Mabaadi'da Tusmayaasha Xuquuqul Insaanka ee la dagaalanka Argagaxisada Afrika*, ee la ansaxiyay bishii Maajo 2015.

14 Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaramada Midoobay, Faallo Guud No. 34 (2011), faq. 24 iyo 25.

15 Golaha Guud ee Qaramada Midoobay (A/HRC/20/17), faq. 80.

16 Waxaa sidoo kale la garowsaday in xorriyadda ra'yiga aan la dhimmi/burin karin xilliga xaaladda degdegga ah.

17 A/HRC/24/23, faq. 2.

18 ICCPR, qod. 25. Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaramada Midoobay wuxuu sheegay in "xorriyadda hadalka … [uu shardi asaasi ah] u yahay in si waxtar leh loogu dhaqmo xaqa codeynta waana in si buuxda loo ilaaliyo. Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaramada Midoobay, Faallo Guud No. 25, faq. 12.

19 ICCPR/C/21/Rev.1/Add.7, faq. 8 iyo 12.

ka-mid-noqoshada iyo kulamada nabadgelyada ah ay asaas u yihiin demoqoraadiyadda, waxaa soo raaca xaqqa in aad wax dooratid laguna doorto marka ay jiraan doorashooyin xilliyeed dhab ah oo u dhaca si xorriyad ku dheehantahay, waana in la dhiiri-geliyaa xoojinta nidaamka axsaabta iyo ururada bulshada. Qaramada Midoobay waxay mar kale sii adkeynaysaa dowrka haweenka ay ka qaadanayaan arrimaha dadweynaha iyo muhiimadda ay leedahay in si siman looga wada qaybqaato.[20]

18. Xaaldda Soomaaliya waxaa dib u eegis lagu sameeyay laba jeer waxaana loo maray Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah (Universal Periodic Review), ee la sameeyay bishi Sebtembar 2011 iyo bishi Janaayo 2016. Waxaa lasoo jeediyay talooyin dhowr ah oo ku aaddan xorriyadda hadalka, waxaana lagu boorriyay Soomaaliya inay xaqiijiso ixtiraamka xorriyadda aragtida iyo hadalka, badbaadiso wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta, xaqiijiso in dhamaan muwaadiniintu si loo wada dhanyahay uga qayb-qaataan arrimaha siyaasadda, oo ay ku jiraan haweenka ka qaybqaadanaya [horumarinta] nolosha dadweynaha, iyo ansixinta sharciyada lagu xaqiijinayo xorriyadaha ka-mid-noqoshada iyo kulamada nabadgelyo. Dowladdu waxay ballan-qaadday fulinta talooyinkaas, waxaana Qorshe Hawleedka 2015-2016 ee Khariidadda/Tubta Xuquuqul Insaanka lagusoo daray tallaabooyin muuqda. Waxaa kamid ah tallaabooyinkaas samaynta Guddiga Qaran ee Xuquuqul Insaanka, la-shaqaynta wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta, la-shaqayntaas oo ku aaddan dib u eegista Sharciga, hab kor-joogtayn madaxbanaan Warbaahinta oo leh hindise kor ka ilaalin oo madaxbanaan, iyo tababarro lasiinayo wariyeyaasha loona tababarayo hab-dhaqanka xirfadeed iyo kan anshax, iyo tallaabooyinks is-difaaca. Markii la gudbinayay warbixinta Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah ee 2016, Dowladdu waxay mar kale adkaysay ballan-qaadyadii ay samaysay sanadki 2011.

## 2. SHARCIGA QARAN

19. Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka ee Soomaaliya ee 2012ki ("Dastuurka Federaalka")[21] oo lagu kabay Dastuurrada dowlad-goboleedyada "Somaliland" (2000), Puntland (2009), Maamulka Kumeelgaarka Koonfur Galbeed (2014), Jubbaland (2015)[22] iyo Maamulka Kumeelgaarka Galmudug (2015), ayaa dhamaantood damaanad qaadaya xaqa xorriyadda hadalka. Xaqa ka-qaybgalka nolosha guud, taas oo uu damaanad qaadayo Dastuurka Federaalka ah, si buuxda uma dhaqangelayo haddii aan la xaqiijin xaqa xorriyadda aragtida iyo hadalka qaybeheeda kala duwan.[23] Si kasta ha ahaatee, Dastuurrada dowlad-goboleedyada federaalka ah ee jira iyo kuwa samaysmaya weli lama waafajin Dastuurka Federaalka ah, arrinkaasina waxaa ku socda dib u eegid.

20. Dastuurka Maamul Goboleedka Kumeelgaarka ah ee Koonfur Galbeed (2014), wuxuu caddeynayaa madaxbanaanida iyo xorriyadda aragtida iyo hadalka iyo midda saxaafadda, iyo weliba xorriyaadka kale ee isu-imaatinka[24] iyo ka-mid-noqoshada urur. Si kasta ha ahaatee, Qodobka 24 wuxuu xaddidayaa hawlahaas haddii loo arko inay ka hor imaanayaan diinta Islaamka, bedqabka bulshada, kala-dambaynta iyo xasilloonida guud. Cahdiga 2015 ee Maamulka Kumeelgaarka Galmudug (GIA) wuxuu caddeynayaa dhowr xuquuq iyo xorriyaad la xiriira xorriyadda fikirka, warbaahinta iyo xuquuqda isu-imaatinka iyo banaanbaxyada.[25]

21. Dastuurka Puntland (2009) wuxuu damaanad qaadayaa xorriyadda aragtida iyo hadalka, ha ahaado mid lagu gudbiyo khudbad, warbaahin, qoraal, muuqaal, suugaan ama qaab kasta oo waafaqsan xeerka

---

20 Qaraarka Golaha Amaanka Qaramada Midoobay 1325 iyo weliba Baaqii iyo Madashii Hawlgalka Beijing ayaa ku amraya Dowladaha inay xaqiijiyaan in haweenku si buuxda uga qaybgalaan nidaamyada awoodda iyo go'aan-qaadashada.
21 Dastuurka Federaalka, qod. 18 (dammaanad qaadaya xorriyadda ra'yiga iyo hadalka, oo ay ka midyihiin xorriyatul qowlka iyo warbaahinta).
22 Dastuurka Ku Meelgaarka Jubbaland, qod. 14, 15 iyo 20. Dastuurku wuxuu sidoo kale dammaanad qaadayaa xorriyadaha shirarka, mudaaharaadka iyo ururrada.
23 Dastuurka Federaalka, qod. 22, oo sheegaya in "qof kasta uu xaq u leeyahay inuu ka qaybgalo arrimaha guud".
24 Dastuurka Ku Meelgaarka ee Maamul Goboleedka Ku Meelgaarka Koonfur Galbeed, qod. 12, 22 iyo 24 (ka hadlaya xisbiyada siyaasadda, kooxaha iyo difaacayaasha xuquuqul insaanka).
25 Cahdiga Galmudug, qod. 20, 30 iyo 32.

iyo anshaxa.[26] Sidaas oo ay tahay waxaa ka buuxa xadayn aan qeexnayn ereyadeeduna is-xambaarsan yihiin. Tusaale ahaan, xorriyaadka waxaa shardi u ah in ayna ka hor imanayn shareecada islaamka, xeerarka anshaxa guud, xasiloonida dalka ama xuquuqda qof kale. Sidaas awgeed, "Diinta Islaamku waa tan qura ee Puntland" iyo "qofka muslimka ahi kama noqon karo caqiidadiisa".[27] Xaddidaaddaas ayaan waafaqsanayn sharciga caalamiga ah waxayna xaddidaysaa xorriyadda fikirka.[28] Xaqqa raadinta, gudbinta iyo helidda xogta ayaan ku jirin Dastuurna, Puntlandna malaha Xeerka Xorriyadda Xog-helidda ama wax u dhigma. Dastuurka Puntland wuu ilaaliyaa xorriyadda saxaafadda iyo warbaahinta, wuxuuna tilmaamayaa "saxaafadda iyo warbaahinta xorta ah" inay "ka-madaxbanaanaadaan faragelin dowladeed waxayna ku dhaqmayaan oo kaliya sharciga."[29] Si kastaba ha ahaatee, [Dastuurku] wuxuu qabaa in la soo koobi karo xaqqa xorriyadda hadalka xilliyada ay jiraan dagaallada ama xaaladaha degdega ah.

22. Shuruuc u gaar ah warbaahinta oo heer federaal ah[30] iyo kuwo heer gobol ah, Puntland[31] 2014ki iyo "Somaliland"[32] 2004ki, ayaa dhamaystiraya qaab-samayskan waana isku wada mid xagga baaxadda.[33] Sharciga Saxaafadda ee "Somaliland" wuxuu inta badan nidaamiyaa wargeysyada, mana daboolo [oo ma nidaamiyo] warbaahinta ku dhisan shabakadaha.[34] Wuxuu aqoonsanyahay xorriyadda saxaafadda wuxuuna mamnuucayaa in xayiraad la saaro saxaafadda. Sidoo kale wuxuu xambaarsanyahay xeer anshax oo lagu maamulo habdhaqanka warbaahinta, wuxuuna nidaamiyaa habraacyada diiwaan-gelinta iyo hawl-gallada xarumaha warbaahinta.

23. Inkasta oo sharciga federaalka uu ka dhaqangalo dhamaan Soomaaliya, hadana si iskumid ah looguma dhaqmo, gaar ahaan "Somaliland" iyo Puntland oo iyagu markii ay dhacday dowladdii dhexe sanadkii 1991ki, samaystay qaab-dhismeedkooda dowladeed oo ay kamid yihiin qaab-samaynta hay'ado sharci-dejin oo maanta ah kuwo hirgalay oo lagu guulaystay.

24. Arrinta ku saabsan "Xaqqa Xorriyadda Ka-mid-noqoshada iyo Isu-soobaxyada Nabadeed", Dastuurka Federaalka ah wuxuu qof kasta u damaanad qaadayaa "xaqa abaabulka iyo ka-qaybqaadashada kulamada, iyo in si nabadgelyo ah loo banaan-baxo loona mudaaharaado, iyadoo aan ogolaansho lagu xujaynin."[35] Dastuurka Jubbaland ee 2015ki iyo Dastuurada Puntland iyo Maamulka Koonfur Galbeed waxay damaanad qaadayaan xuquuqdaas. Tusaale ahaan, Dastuurka Puntland wuxuu aqoonsanyahay xaqqa ka-qaybqaadashada axsaabta siyaasadeed iyo xorriyadda ka-mid-noqoshada iyo xaqqa banaanbaxyada.[36] Dastuurka Jubbaland wuxuu aqoonsanyahay xuquuqda xorriyadda isu-soobaxyada, banaanbaxyada iyo xaqa ka-mid-noqoshada.[37]

26 Dastuurka Puntland, qod. 14.

27 Dastuurka Puntland, qod. 9 ee caddeynaya in "Islaamku yahay diinta keliya ee Puntland"; iyo qodobka 13 ee sheegaya in "Muslimku uusan ka bixi karin diintiisa/teeda".

28 ICCPR, qod. 19(1) sheegaya in "qofku uu fikirkiisa/keeda ku sheegi karo hadal, warbaahin, qoraal, muuqaal, bug iyo wixii kale oo waafaqsan sharciga iyo anshaxa".

29 Dastuurka Puntland, qod. 22(1).

30 Sharciga Warbaahinta Federaalka waxaa soo saaray Baarlamaanka 28kii bishii Disembar 2015 waxaana saxiixay Madaxweynaha Dowladda Federaalka Soomaaliya 10kii bishii Janaayo 2016.

31 Sharciga Warbaahinta Puntland waxaa soo saaray Baarlamaanka bishii Luuliyo 2014 waxaana saxiixay Madaxweynaha 29kii bishii Luuliyo 2014.

32 Sharciga Saxaafadda "Somaliland" waxaa soo saaray Baarlamaanka waxaana saxiixay Madaxweynaha sannadkii 2004.

33 Dastuurka "Somaliland" (2000), qod. 32 waxaa ku qoran xorriyadaha mudaaharaadka dadweynaha, cabbiridda fikirka, saxaafadda iyo warbaahinta kale. Dastuurka Puntland, qod. 25 waxaa ku qoran xorriyadaha fikirka iyo hadalka. Dastuurka Ku Meelgaarka Jubbaland, qod. 21 wuxuu ka dhursugayaa shuruuc gaar ah oo loo dejiyo warbaahinta iyo saxaafadda.

34 Sharciga Saxaafadda "Somaliland" qod. 3 ee Xorriyadda Saxaafadda wuxuu qorayaa in "xorriyadda saxaafadda la aqoonsanyahay ayna ku qeexantahay Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland waxaana lagu dhowrayaa laguna qiimeynayaa Somaliland. Xaddidaad lama saari karo Saxaafadda. Fal kasta oo loo fasiri karo inuu yahay faafreeb waa mamnuuc. d. Wariyeyaashu waxay sameysan karaan ururro xirfadeed oo leh dallad midaysa". Sidoo kale qod. 5 wuxuu qorayaa in "muwaadin kasta oo Somaliland u dhashay uu xaq u leeyahay xaq inuu ka qaybgalo ama qabto hawl kasta oo saxaafadda ah, isagoo keligiis ah ama isagoo si wadajir ah ula qabsanaya kuwo kale."

35 Dastuurka Federaalka, qod. 20.

36 Dastuurka Puntland, qod. 41/b ee dhisidda iyo ku biiridda xisbi siyaasadeed; qod. 15 ee xaqa shirarka; iyo qod. 15 ee mudaaharaadka.

37 Dastuurka Jubbaland qod. 15 (qeexaya xaqa xorriyadda shirarka iyo mudaaharaadka, iyo cabashooyinka iyo codsiyada iyo qod. 14 (qeexaya xaqa xorriyadda ururrada).

## Sharciga Federaal ee Warbaahinta

25. Wadahadallo dhawr sano socday kadib, waxaa bishii Janaayo ee 2016 la sharciyeeyay Hindise-sharciyeedki Warbaahinta Soomaaliya. Wuxuu damaanad qaadayaa dhowr xorriyadood, oo ay kamid tahay madaxbanaanida warfaafinta guud, wuxuu ilaalinayaa xaqqa xog-helidda ee wariyeyaasha, wuxuu mamnuucayaa faafreeb ama in si khasab ah lagu tebiyo arrimo ka-hor-imaanaya danta guud.[38] Waxaa kale oo uu is-dabadhigayaa waxyaabaha in la tebiyaahi ay reebbanyihiin, waxaana kamid ah warbixinnada been abuurka ah, kuwa colaadaha abuuraya, kuwa dhiirri-gelinaya qabyaaladda, iyo faafinta dacaayadaha.[39] Si kastaba ha ahaatee, ereyada qaarkood ee kamidka ah sharcigaasi ma aha kuwo kala cad, taas oo albaabka u furaysa in [siyaabo kaladuwan] loo fasirto, kana dhashaan xayiraado aan loo baahnayn ama xadiidaad lagu sameeyo xaqqa xorriyadda hadalka. Ereyadaas waxaa kamid ah "faafinta warar been abuur ah", "colaad hurinaya", "sumcad-dil shakhsi ama hay'ad". Xayiraadahan ku xusan Sharciga Warbaahinta waxaa ka maqan turxaanbixinti lagama maarmaanka ahayd ee muwaadiniinta awood u siinaysay inay nidaamiyaan hab-dhaqankooda si waafaqsan sharciga, taasina ma waafaqsana sharciga caalamiga ah. Intaas waxaa sii dheer, Sharciga Saxaafaddu wuxuu tilmaamayaa ciqaab adag iyo ganaax la dul-dhigayo wariyeyaasha iyo xarumaha warbaahinta haddii ay ku kacaan xadgudubyadaas oo kale.[40] Intaas waxaa dheer, Wasaaradda Warfaafinta oo leh awood ballaaran oo ay ku maamusho/xakamayso diiwaangelinta wariyeyaasha.[41]

26. Sharciga Saxaafaddu wuxuu tilmaamayaa dhismaha Gole Qaran oo Warbaahin oo kor u qaada anshaxa, xalliya oo dhex-dhexaadiya khilaafaadka iyo cabashooyinka, anshaxa mariya wariyeyaasha iyo tifaftirayaasha warbaahinta iyo madaxdooda, kana tala bixiya siinta iyo kala-noqoshada ruqsadda.[42] Goluhu wuxuu ka koobanyahay sagaal xubnood: saddex waxay ka imaanayaan warbaahinta Dowladda, saddex waxay ka imaanayaan warbaahinta gaarka loo leeyahay iyo saddex ka imaanaysa ururada bulshada rayidka ah, waxaa intaas lagu biirinayaa Guddiga Qaran ee Xuquuqul Insaanka.[43] Sharcigu kama hadlin xiriirka ka dhexeeya Golaha iyo dhigooda heer maamul goboleed, iyo weliba xiriirka Golaha kala dhaxayn kara ururada warbaahinta iyo hay'adaha kale ee muhiim u noqon kara arrinka xiriirna wada yeelan karaan. 7dii Febraayo 2016, Wasiirka Warfaafinta ayaa ururada bulshada, wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta usoo jeediyay inay xubno metela usoo magacowdaan Golaha saddex maalmood gudohood, taas oo aan ahayn waqti ku filan oo ay ugasoo arrinsadaan soo magacaabista xubnahooda.

27. Golihii waxaa la ansixiyay 17ki Juun 2016 isagoo ka kooban saddex xubnood oo ka socotay warbaahinta Dowladda, saddex ka socotay warbaahinta madaxabanaan, qof ka socday Ururka Qareenada Soomaaliyeed, qof ka socday Ururada Haweenka Soomaaliyeed, iyo qof ka socday hay'ad xuquuqul insaan, inkasta oo sharcigu sheegay Guddiga Qaran ee Xuquuqul Insaanka, kaas oo aan weli la dhisin. Habka loo maray magacaabista iyo ansixinta Golaha waxaa aad ugasoo horjeestay ururada warbaahinta, oo uu kamid yahay Ururka Qaranka Suxufiyiinta Soomaaliyeed (NUSOJ)[44] iyo Ururka Madaxabanaan ee Xarumaha Warbaahinta Soomaaliyeed (SIMHA), oo iyagu ku doodaya in habka magacaabista aan laga samaynin

---

38 Sharciga Warbaahinta Federaalka, qod. 3(4) wuxuu qeexayaa in warbaahinta gaarka loo leeyahay aan lagu "qasbi karin inay tebiso wararka ka soo horjeeda danaha qaranka, amniga, dhaqaalaha, siyaasadda iyo bulshada."

39 Isla meesha., qod. 4.

40 Isla meesha., qod. 5.

41 Hanaanka lagu bixiyo rukhsadaha si cad uguma qeexna Sharciga Warbaahinta. Qodobka 18, ee ka hadlaya diiwaangelinta wariyeyaasha, ayaa qeexaya in Wasaaradda Warfaafintu ay shahaado siin doonto ciddii wariye noqon karta, laakiin tani qasab ma aha in lagu saleeyo shahaadooyin iyo/ama wareysiyo uu la yeesho Golaha Warbaahinta.

42 Sharciga Warbaahinta Federaalka, qod. 15

43 Dastuurka Federaalka, qod. 41 oo qeexayo in la dhiso Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaranka.

44 Ururka Qaran ee Saxafiyiinta Soomaaliyeed (NUSOJ) waxaa la dhisay bishii Agoosto 2002. Laga soo billaabo bishii Maajo 2011, muran u dhexeeya xubnaha ururka oo ku saabsan hogaanka ayaa kala qaybiyay ururka iyo xubnihiisaba. Maxkamadda Sare ee Federaalka ayaa 7dii Febraayo 2016 go'aamisay in garabka uu hogaamiyo Cumar Faaruuq uu yahay hogaanka sharciga ah ee NUSOJ. Wasaaradda Warfaafinta ayaa 11kii Febraayo 2016 ka codsatay NUSOJ inuu qabto shirmeyne guud oo lagu doorto hogaan cusub oo aan ku lug lahayn muranka. Ka dib markii ay Maxkamadda Sare ay go'aamisay in doorasho cusub loo qabto hogaanka NUSOJ, Ururku wuxuu shirweyne guud ku qabtay magaalada Muqdisho laga billaabo 3dii ilaa 17kii Maajo, waxaana ka dhashay in la doorto Guddoomiye cusub iyo Xoghaye Guud. Hase ahaatee, Cumar Faaruuq iyo taageerayaashiisa ayaa ka soo horjeestay shirweynaha guud iyagoo sabab uga dhigaya inay soo farageliyeen Wasaaradda Warfaafinta iyo milkiileyaasha warbaahinta. Cumar Faaruuq ayaa 3-4 Luuliyo kulan kale ku abaabulay magaalada Gaalkacyo, taasoo ka dhalatay in dib loogu soo doorto Xoghayaha Guud ee NUSOJ. Guddoomiya Maxkamadda Sare/Garsoorka Soomaaliya ayaa 20kii Luuliyo soo saaray warqad ku socota maamullada gobollada, hay'adaha dowladda iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud si ay u ogolaadaan natiijada doorashada hogaanka NUSOJ ee lagu qabtay magaalada Muqdisho laga billaabo 3dii ilaa 17kii Maajo 2016.

wadatashi, mana ahayn mid daah-furan, waxaana loo maray Sharci Saxaafadeed laga weeciyay jihadii. Qof kamid ahaa xubnaha Golaha ayaa iska-casilay xilkii maalin kadib markii la magacaabay (17 Juun 2016), kuna sababeeyay in aan lagala tashan magacaabistiisa uuna ka maqlay oo kaliya warbaahinta.[45] Ugu dambayn, maamulka Puntland ayaa diiday oo cambaareeyay Golaha Warbaahinta ee la ansixiyay, wuxuna ku sababeeyay in Puntland aanay meletaad ku lahayn Golaha aragtideedana aan lagu tixgelin qoraalki Sharciga Warbaahinta.

## Xeerka Ciqaabta

28. Kiisas dacwo oo badan oo ku xusan warbixintan waxay ku salaysanyihiin eedeymo xooggan oo ah faafin "warar been abuur ah," taas oo maamulada dalku joogto u adeegsadaan si ay albaabada iskugu laabaan xarumo warbaahineed ama u xiraan wariyeyaal iyo shaqaale warbaahin.[46] Xeerka Ciqaabta wuxuu ciqaab u yeelayaa faafinta "warar been abuur ah", waxaana ciqaabtaas kamid ah xabsi ilaa lix bilood ah. Maadaama Xeerku aanu qeexeynin inta uu la egyahay wLararka been abuurka ah ee ciqaabta lagu mutaysanayo, waxaan halkaas jirin turxaan bixin dhamaystiran oo u saamaxaysa wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahintu inay nidaamiyaan hab-dhaqankooda, sida uu qabo sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka. Intaas waxaa sii dheer, in aan la muujinin in xayiraad noocaas oo kale ah ay tahay lagama maarmaan ama mid u dhiganta hadba xaddidaadda la ogolyahay ee uu qabo sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka. Mar haddii xaalku sidaas yahay, qodobada ku qoran Xeerka Ciqaabta ee kusaabsan faafinta warar been abuur ah waa xayiraad aan cudurdaar lahayn oo kadhan ah xorriyadda hadalka, Xeerkuna wuxuu u taaganyahay aaladdii ama hubkii lagu beegsanayay wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta ee soo bandhiga aragtiyadooda, maamuladuna doonayaan inay aamusiyaan.[47]

29. Iyadoo tani ay qayb ka tahay kaalinta War-tebiyaha Gaarka ah ee Qaramada Midoobay uu ku hagayo Maamulada sidii ay u dhaqan-gelin lahaayeen xaqqa xorriyadda hadalka, ayuu ka hadlay adeegsiga la adeegsado eedeymaha ku aaddan "faafin warar been abuur ah" wuxuuna si adag ugu boorriyay dowladaha inay xaqiijiyaan in dembiyada ay gasho saxaafadda aan lagu mutaysanin xarig, marka laga reebo kuwo isir nacayb ah iyo faallooyin dad lagu takooraayo amaba baaq colaadeed. Wuxuu sii tilmaamay in "ciqaabta xarigga ah ay tahay mid khaldan oo aan u dhigmin [kana badan] midda dhibanaha uu maray. Sidaas darteed, in xabsi lagu muteystaa hadal iyo aragti si nabadgelyo ah loosoo bandhigay waxay xadgudub ku noqonaysaa xuquuqda aadanaha."[48] Waxaa taa lamid ah, in Guddiga Xuquuqul Insaanka ee Qaramada Midoobay oo kor kala socda sida loo dhaqangeliyo xuquuqda ku xusan Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda, uuna kamid yahay xaqqa xorriyadda hadalka, ayaa ogaaday in meelaha ay dadka caanka ah ee bulshada ka dhexmuuqda ay maslaxad ugu jirto in Dowladuhu/maamuladu ay ka aamusaan oo aany marsiinin ciqaabta ay mutaystaan, iyadoo warka lagusoo koobo "warbixin si khalad ah loo daabacay oo aan ujeedo kale laga lahayn".[49]

30. Iyadoo mar waliba ay wariyeyaashu ku dadaalayaan inay wararka u tebiyaan si run-sheeg ah oo dheeli-tiran, ayay mararka qaar ku adkaan kartaa inay kaligood hubiyaan xog kasta oo ay helaan, gaar ahaan xilliyada ay jiraan colaado iyo amni darro baahsan. Intaas waxaa sii dheer, iyadoo wariyeyaashu waajib ka saaranyahay inay qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu hubinayo saxnimada xogta ay tebinayaan, ayaa haddii ay u hogaansami waayaan waa in, mabda'iyan, aanay ka dhalin ciqaab fal dembi. Xaaladaha laga daba tegay ee maamuladu ku sababeeyaan "warar been abuur ah" waa tusaale khatar ah oo loo adeegsan karo in loogu qiil dayo xarig siyaasadaysan, xabsi-gelin iyo dacwad ku xukumid. Khatarahaasi wey sii kordhi karaan marka ololaha doorashadu si dhab ah u billowdo.

---

45 Maxamed Fiyoore, tifaftiraha Idaacadda Radio Danan ee Muqdisho.

46 Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, qod. 328 oo qeexaya in "ciddii daabacda ama faafisa warar been abuur ah, laga badbadiyay ama dhan u xaglinaya si dhib loogu geysto kala dambeynta guud wuxuu muteysan doonaa ciqaab, haddii falku aan ahayn dembi halis ah (Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, qod. 15) oo ah xabsi gaaraya lix bilood (Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, qod. 96) ama ganaax (Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, qod. 97).

47 Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed waxaa lagu sameynayay dib u eegid labadii sanno ee la soo dhaafay, taasoo hoos imanaysa Wasaaradda Caddaaladda uuna taageero Ururka Caalamiga ah ee Horumarinta Sharciga (IDLO). Lama hayo oo lama soo saarin qodobada oo qabyo ah.

48 Warbixinta Qoraaga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee horumarinta iyo ilaalinta xaqa xorriyadda hadalka (E/CN.4/2000/63), faq. 205.

49 Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaramada Midoobay, Faallo Guud 34, faq. 47.

## Hindise-Sharciyeedka La-dagaallanka Argagixisada

31. Xayiraadaha loo cuskado amni qaran, sida lagusoo qaadaa-dhigay Cutubka III, ayaa ah walaac gaar ah, weyna sii kordhi karaan marka haddii Xeerka La-dagaalanka Argagixisada ee Golaha Wasiiradu ansixiyay bishii Luuliyo 2014, uu dhaqangalo oo la meelmariyo. Sida Sharciga Saxaafadda oo kale, ayaa ereyo kamid ah Hindise-Sharciyeedkan aanay ahayn kuwo qeexan, oo u furan in lasii fasiro, taas oo qiil looga dhigan karo adeegsiga awoodo xad-dhaaf ah oo ay adeegsadaan hay'adaha sharci fulinta, kuwa amniga, iyo hay'ado kale, waxayna taasi saamayn xun ku yeelanaysaa ku-naalooshada xaqa xorriyadda aragtida iyo hadalka. Tusaale ahaan, qodobada 3 iyo 4 waxay mamnuucayaan tebinta "warar ka dhan ah maslaxadda dalka, amnigiisa, dhaqaalihiisa iyo maslaxaddiisa bulsho[50]" ama tebinta "warar been abuur ah".[51] Sida meela kaleba aan kusoo aragnay, saamaynta uu xeerkan ku yeelanayo dadka muhiimka ah iyo kuwa bulshada u adeega ayaa walaac dhalinaya, gaar ahaan marka booliska iyo nabad-sugidda la siiyo awood dheeri ah oo ay ku xayiri karaan xorriyadda hadalka, taas oo markaasi xadgudub ku ah sharciga caalamiga ah.[52]

32. Tixraac toos ah, inkastoo uu gudo weynyahay, jkuna saabsan yahay xaqa xorriyadda hadalka ayaa ka muuqda Qodobka 12 ee Hindise-Sharciyeedka, kaas oo fal-dembiyeed u aqoonsan falalka ku-boorrinta ama gacan u fidinta dhacdo argagixiso, ku-boorrinta ama ku-gacan siinta kamid noqoshada koox argagixiso. Khabiirka Madaxabanaan ee Qaramada Midoobay u qaabilsan ilaalinta xuquuqul insaanka iyo xorriyaadka asaasiga ah marka lala dagaallamayo argagixisada, Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Ka-hortagga Dembiyada iyo Maandooriyaha ayaa ka digay "qeexid guud oo la siiyo ereyga 'argagixiso' waxayna ka digayaan in tani ay horseedi karto in  hawlo sharci ah laga dhigo fal-debmiyeed, sida banaanbaxyo sahrciga waafaqsan iyo hadalo iyo aragtiyo lasoo jeediyo, taasi oo wax la jecleysto aan ahayn hadana aan gaarsiisnayn hurin colaadeed".[53] Waxaa taa lasii jira, Qodobka 15 ee Hindise-Sharciyeedka wuxuu wariyeyaasha kusoo rogayaa inay sheegaan xogta, ciddii sidaa yeeli weysana lagusoo oogo fal-dembiyeed. Qodobkan waa mid guud oo aan la qeexin waana in loo qaabeeyaa qaab ay tallaabooyinka la qaadayo u noqonayaan kuwo lagama maarmaan ah una dhigma [fal-dembiyeedka dartiis ciqaabta lagu muteystay].

33. Awoodo deeri ah oo lagu baaro dembiyada ayaa sidoo kale loo ogolaaday qaybo ka  mid ah shakhsiyaadka, sida Agaasimaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (NISA) iyo Taliyaha Booliska.[54] Muddada u dhaxaysa amarka xariga iyo cusboonaysiinta ku xigta iyadoo aan garsoorku hubin iyo xaqiijin ku samaynin ayaa keentay walaac. Qodobka 23 (2) iyo 30 waxay sheegayaan in qofku xabsi ku jiri karo muddo dhan 60 maalmood iyadoo aan la xukumin, iyadoo Dastuurkuna damaanad qaadayo 48 saacadood. Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaramada Midoobay ayaa arka inay lagama maarmaan tahay "in dowladuhu ay si weyn uga taxadaraan" oo ay hubiyaan in sharciyada la xiriira amniga qaranka aan qiil loogaga dhiganin "awood ku maquuninta ama celinta/daahista wararka iyo xogta ay heli lahaayeen dadweynaha, oo weliba ay ku helo lahaayeen qaab sharci ah oo dadnta guud ku jirto oo aan waxna u dhimaynin amniga qaranka" ama in dacwad lagusoo oogo wariyeyaal ama shaqaale warbaahin, cilmi-baarayaal, dadka u ololeeya [nabadda iyo xuquuqda], ama dad kale oo faafin lahaa warar.[55] Sida hadda xaaladdu tahay, Hindise-Sharciyeedka La-dagaallanka Argagixisadu wuxuu wiiqayaa mas'uuliyadda badbaadinta iyo daryeelka.

50 Sharciga Warbaahinta Federaalka, qod. 3 (4).
51 Isla meesha., qod. 4.1 (B).
52 A/HRC/24/23, faq. 8.
53 Xafiiska Qaramada Midoobay ee Daroogada iyo Dembiga, Su'aalaha inta badan la isweydiiyo: Dhinacyada Sharciga Caalamiga ee Ka Hortagga Argagaxisada 95 (2009); https://www.unodc.org/documents/terrorism/Publications/FAQ/English.pdf; *Sidoo kale eeg* E/CN.4/2006/98, A/63/223.
54 Hindise Sharciyeedka Ka Hortagga Argagaxisada, qod. 21 (4).
55 Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaramada Midoobay, Faallo Guud, 34, faq. 30 (qod. 19).

# II. Xorriyadda hadalka iyo geedi-socodka siyaasadda

34. Xorriyadda hadalku waxay dowr muhiim ah ka cayaartaa xaqiijinta in geedi-socodyada siyaasadeed noqdaan kuwo furan, xor ah, cadaalad ah kuna qotoma sharciyad, sidaas darteed, waa in la damaanad qaadaa demoqoraadiyad shaqaysa oo wax ku ool ah, gaar ahaan waqtiga lagu jiro kalaguurka siyaasadda. Wada-xiriir siyaasadeed xor ah oo furan wuxuu muhiim u yahay xaqiijinta geedi-socodyo demoqoraadiyadeed cadaalad ah iyo ka-hadalka arrimaha siyaasadda iyo arrimaha guud oo looga hadlo si loo wada dhanyahay oo waxtar leh. In fursad lasiiyo lana dhageysto codadka kala duwan ee siyaasiyiinta, warbaahinta, dadka laga tirada badanyahay iyo guud ahaan muwaadiniinta waxay caqabad joogto ah iyo fursad muhiim ahba u tahay demoqoraadiyad kasta.

35. Weeraro, hanjabaado iyo noocyo kale oo kadeed iyo faragelin ah ayaa mar walba lagu aamusiyaa wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta, difaacayaasha xuquuqul insaanka ama hogaamiyeyaasha siyaasadeed, taas oo ku khasabta inay indhaha ka laabtaan arrimo ay dad kale oo hawlwadeenno ah u arkaan arrimo xasaasi ah oo mudan in laga hadlo, waxaana kamid ah arrimahaas xaaladda xuquuqda aadanaha, doorashooyinka, musuqmaasaqa, xasaradaha guud ama arrimo ku saabsan walaac dadweyne, xaalado degdeg ah iyo dibad baxyo dadweyne.[56] Xadgudubkani wuxuu caqabad xooggan ku yahay helid wararka iyo xogta oo si xor ah loo kala qaato, taas oo saamayn ku yeelanaysa awoodda muwaadiniintu u leeyihiin wax kubiirinta geedi-socodyada demoqoraadiyadeed, taas oo lagu gaarayo go'aamo laga baaraan-degay oo laga gaaro arrimaha kaladuwan, sidaas darteed, taasi waxay xadgudub ku tahay xaqqa asaasiga ah ee xorriyadda aragtida iyo hadalka ee bulshada guud ahaan.[57] War-tebiyaha Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan kor u qaadista iyo ilaalinta xaqqa xorriyadda hadalka wuxuu diiwaangeliyay in weerarada loo geysto weriyeyaasha iyo hawlwadeenada kale ee warbaahinta, difaacayaasha xuquuqul insaanka ama hogaamiyeyaasha siyaasadeed, ay yihiin weeraro guud ahaan la geysto oo sharciguna tallaabo ka qaadin, waxaana khatar loogu gelayaa in weeraro kale ay ku xigsadaan maadaama kii horeba aan sharcigu tallaabo ka qaadin.[58]

## 1. GEEDI-SOCODKA DIB-U-EEGISTA DASTUURKA

36 Arrinta mudnaanta koobaad u lahayd Soomaaliya tan iyo 2012ki waxay ahayd horumarinta qaab-samayn sharciyadeed iyo mid siyaasadeed, waxaana kamid ah dib u eegista Dastuurka Federaalka ah. Dib u eegistani waxay udub dhexaad u tahay geedi-socodyada nabadaynta iyo demoqoraadiyadda, waana fursad dhab ah oo looga fekero laguna xoojiyo in naqshadda sharciyadeed ee Soomaaliya ay waafaqsanaato halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, oo ay kamid tahay xaqa xorriyadda hadalka.

37. Bishii Sebtembar 2013, Shirweynihi Qaran ee "Aragtida 2016" waxaa lagasoo saaray in "dib u eegista iyo hirgelinta Dastuurka Kumeelgaarka ah" noqdaan kuwo "loo wada-dhanyahay hadba intii suurtagal

---

56 A/HRC/24/23, faq. 3. *Sidoo kale eeg* qaraarka Golaha Amaanka 2222, faq. 6 (2015) ee ku baaqaya ilaalinta saxafiyiinta, xirfadlayaasha warbaahinta iyo shaqaalaha la xiriira ee ku jira xaaladaha colaadda hubaysan, iyo in la xaqiijiyo la xisaabtanka dembiyada iyaga loo geysto, garowsanayana kaalinta muhimka ah ee ay wariyeyaasha, xirfadlayaasha warbaahinta iyo shaqaalaha la xiriira ka cayaari karaan "ilaalinta dadka rayidka iyo xallinta khilaafaadka iyagoo u hawlgelaya sidii hab digniin hore si loo asteeyo loona soo sheego xaaladaha dhici kara ee ka dhalan karto xasuuq, dembiyo dagaal, isir sifeyn iyo dembiyada ka dhanka ah baniaadanka." *Sidoo kale eeg faq*. 6 ee ka dalbanaya hawlgallada Qaramada Midoobay inay waajibaadkooda xileed ku daraan gudbinta warbixinada xogta la xiriirta falalka gaarka ah ee rabshadaha/tacaddiyada ka dhanka ah wariyeyaasha, xirfadlayaasha warbaahinta iyo shaqaalaha la xiriira ee ku jira xaaladaha colaadda hubaysan.

57 A/HRC/24/23, faq. 4.

58 A/HRC/20/17, faq. 65.

ah".[59] In ay noqoto mid loo wada dhanyahay oo qaranka oo dhan wada leeyahay, dib-u-eegistu waxay u baahantahay wadahadallo iyo wadatashiyo sal-ballaaran oo heerar kala duwan ah, ayna ka-qayb qaataan daneeyeyaasha kala duwan ee arrintu khusayso iyo qeybaha kala duwan ee ururada bulshada, oo ay kamid yihiin haweenka, dhalinyarada iyo dadka laga tirada badanyahay. Ka-qayb qaadashada dib u eegista hadda socota waxay ku koobantahay Guddiga Baarlamaanka ee Dib-u-eegista iyo La-socodka Dastuurka, Guddiga Madaxabanaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, iyo Wasaaradda Arrimah Dastuurka. Inkastoo hay'adahaasi ay muujiyeen sida ay uga go'antahay in hawsha loo wada dhamaado oo laga wada qayb-qaato, kuna dhawaaqeen qorshooyin ay ku abaabulaayaan wadatashiyo heer gobol ah, barnaamijyo wacyigelin iyo in bulshada la baro hawsha socota (civic education), ayaa ilaa iyo hadda waxa qabsoobay ay yihiin wax yar, hal barnaamij oo waxbarashada madaniga ah (civic education) ayaa ilaa iyo hadda laga fuliyay Baydhaba bishii April 2016.[60] Sidaas awgeed, ayaa geedi-socodka dib-u-eegistu aanay u saamixin in la helo wadahadalo iyo doodo wadareed, gaar ahaan kuwa ay qabaan dowlad goboleedyada samaysmaya.

## 2. GEEDI-SOCODKA MAAMUL DHISIDDA

38. 2012ki, guud ahaan [gobolada] koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya waxaa 'maamul ahaan' ay hoos imaanayeen oo laga maamulayay Muqdisho, iyadoo uu koobnaa isu-socodka, maadama qaybo ballaaran oo kamid ah Soomaaliya ay ku jireen gacanta Al Shabaab.[61] Wixii ka dambeeyay marki la dhisay dowladda hadda jirta, waxaa mudnaanta koobaad lasiiyay samaynta Dowlad-goboleedyo Federaal ah iyo siyaasad loo wada dhanyahay, sida ku cad siyaasaddii lixda tiir ee Dowladdu soo bandhigtay sanadki 2012ki waxaana lagu sii adkeeyay heshiiski Hiigsiga Cusub ee la meelmariyay bishii Sebtembar 2013.[62] Ilaa iyo hadda, waxaa la dhisay saddex maamul-goboleed oo federaal ah, waxayna kala yihiin Jubbaland, Koonfur Galbeed iyo Galmudug, iyadoo uu socdo maamul u samaynta Hiiraan iyo Shabeellada Dhexe. Dowlad Goboleedka Puntland horay ayay u jirtay ka-hor 2012ki.

39. Geedi-socodka maamul-dhisidda waxaa loo maray wadatashiyo badan waxaana si buuxda usoo tebiyay warbaahinta iyadoo aan lagu samaynin faafreeb muuqda. In qaab ahaan geedi-socodku noqdo mid furan oo loo wada dhanyahay waxaa loo sababaynayaa dhowr arrimood, waxaana kamid ah amniga oo soo hagaagay marka la barbardhigo sidii uu ahaa wixii ka horreeyay 2012ki, baaqi iyo u-doodista arrinta ay u sameeyeen saaxiibada caalamka, helidda iyo adeegsiga internetka oo sii korortay, iyo wacyiga dadweynaha oo korayay kuna baraarugayeen xaqqa ka-qaybgalka geedi-socodka siyaasadda, gaar ahaan marka loo marayo [is-dhaafsiga iyo] wadaagga aragtiyada iyo fikradaha. Intii uu socday geedi-socodka maamul u samaynta gobolada Galguduud iyo koonfurta Gaalkacyo sanadki 2015, waxaa dadaallo lagu bixiyay sidii fursad loogu abuuri lahaa xorriyadda hadalka, waxaana kamid ah kii loo maray Dadaalka Hogaamiyeyaasha Haweenka Soomaaliyeed, oo ah madal ay isku abaabulaan Haweenka Soomaaliyeed uguna ololeeyaan maslaxadda haweenka.

40. Metelaadda haweenku ku leeyihiin Dowladda iyo hay'adeheeda ayaa guud ahaan hooseysa. Haweenku waxay boqolkiiba 14 ku leeyihiin Baarlamaanka Federaalka [ee hadda jira], matalaadda ay ku leeyihiin

---

59 Madaxweynaha Federaalka ayaa isugu yeeray Shirweynaha Hiigsiga 2016 laga billaabo 2dii ilaa 6dii Sebtembar 2013 kaasoo keenay fursad sare loogu qaado geeddi socodka siyaasadda laguna ururiyo fikradaha laga qabo geeddi socodka sameynta Dastuurka iyo khariidada waddada siyaasadda lagu gaaro hanaanka doorashada 2016.

60 Arrimaha mudnaanta leh iyo waxqabadka Heshiiska Hiigsiga ee ay Qaramada Midoobay iyo DFS ku heshiiyeen Hanaanka Istaraatijiga ah ee Isku-dhafan ee Yoolalka Nabadda iyo Dowlad-dhisidda 1 ee lagu qeexay hanaan ka kooban lix tallaabo oo ay ka midyihiin wacyigelinta dadweynaha iyo la shaqeynta iyo ka qaybgalka dadweynaha.

61 Ereyga "Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya" ayaa mararka qaar loo isticmaalaa si loo tibaaxo dhulka ka kooban dowlad goboleedyada federaalka ah ee hadda jira iyo kuwa sameysmaya, oo ay ka midyihiin Jubbaland, Koonfur Galbeed, Galmudug, iyo labada gobol ee Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe ee aan dhammeystirin geeddi socodka sameynta dowlad goboleedka. Maqaamka gobolka Banaadir, oo ay ka midtahay magaalada Muqdisho, ayaa weli doodi ka taagantahay.

62 Siyaasadda Lixda Tiir waxaa la diyaariyay ka dib dhammaadkii Dowladda Federalka Ku Meelgaarka sannadkii 2012. Waxay qeexaysaa arrimaha waaweyn ee mudnaanta leh waqtiga dhow ee la xiriira amniga, garsoorka, ku dhaqanka sharciga, maamul wanaagga iyo maareynta maaliyadda guud. Heshiiska Hiigsiga Soomaaliyeed (2014-2016) waxaa lagu saleeyay asaaska siyaasaddan iyo "mabaadi'dii Busan" ee asteeyay Yoolalka Nabadda iyo Dowlad-dhisidda (PSGs) ee muddada 2014 ilaa 2016: Siyaasad loo wada dhanyahay; amni; caddaalad; asaas dhaqaale; adeegyo dakhli iyo arrimo intaa wada taabanaya oo ka midyihiin Xuquuqul Insaanka.

maamul goboleedyadana wey ku kala duwanyihiin. Maamulka Koonfur Galbeed oo la dhisay bishii Nofeember sanadki 2014ki wuxuu leeyahay Gole Wasiir oo ka kooban 64 Wasiir, Wasiir Ku-xigeenno iyo Wasiiru Dowlayaal, waxaala Golahaas ka mid ah saddex haween ah. Dastuurka Maamulka Koonfur Galbeed wuxuu farayaa in haweenku ay Golaha Shacabka Koonfur Galbeed ku yeeshaan kooto boqolkiiba 20 ah, hase ahaatee, olole xoggan oo wakiillada haweenku galeen kadib, waxay haweenku boqolkiiba 21.5 ka heleen kuraasta.[63] Sidoo kale, haweenku waxay u dhigmaan boqolkiiba sagaal Golaha Shacabka Galmudug. Si kastaba ha ahaatee, Golaha Shacabka ee Jubbaland ayaa haweenku yihiin afar boqolkiiba, halka Aqalka Wakiillada Puntland ay haweenku ku leeyihiin sadex boqolkiiba.[64] Intaas waxaa sii dheer, Golaha Wasiirrada Jubbaland waxaa kujirta hal wasiir oo kaliya oo dumar ah, waxayna mas'uul ka tahay Arrimaha Dheddig-Labka, Arrimaha Qoyska iyo Xuquuqul Insaanka. Golaha Wasiirada Puntland waxaa iyana ka mid ah afar haween ah oo mid ay tahay Wasiir buuxa halka saddexda kalena ay yihiin Wasiir Ku-xigeenno. Somaliland, haweenku waxay Aqalka Wakiillada ku leeyihiin boqolkiiba hal, Aqalka Sarena waxba kuma laha.

41. Inkastoo geedi-socodyada Maamul dhisidda laga yeeshay doodo furan, hadana dhacdada aan horay loo arag ayaa ahayd kiiskii lagu sheegay khiyaano waddan ee Puntland kaas oo ay qayb ka ahaayeen 14 siyaasiyiin ah. 13kii bishii Janaayo 2015, Maxkamadda Darajada Koobaad ee Garowe ayaa xabsi daa'in ku xukuntay saddex muwaadin oo reer Puntland ah *iyagoo ka maqnaa goobta kuxunku ka dhacay*. 11 kale ayaa iyagana lagu xukumay 10 sano oo xarig ah waxaana xukunnadaas loo cuskaday qodobada khiyaano qaran ee ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Dastuurka Puntland ee ka hadlaya falalka wax u dhimaya "midnimada qaran" ee ay uga qaybgaleen shirka dhacay magaalada Cadaado ee gobolka Galguduud halkaas oo maamul goboleed loogu dhisayay gobolada dhexe. Ciqaabtii ugu cuslayd ayaa la saaray saddexdii qofood ee horay xilalka uga soo qabtay Dowladda Puntland. Tallaab aan caadi ahayn ee uu qaaday Garyaqaanka Guud ayaa racfaan uga qaatay xukunka isagoo ka wakiil ah eedeysanayaasha, marka lagasoo tago in isla xafiiskiisa ay kasoo billaabatay dacwad oogistu. Waxaa la ogsoonyahay in cadaadis ay saareen odayaal dhaqameedka oo markii hore ay arrintan iska arkeen Madaxweynaha. Natiijada ka dhalatay ayaa noqotay in Maxkamadda Racfaanka Garowe ay laashay (baabi'isay) go'aankii maxkamadda hoose ay ka gaartay 11kii qofood iyadoo loo waayay wax caddayn ah. Maxkamaddu waxaa kale oo ay Dowladda ku amartay inay raaligelin siiso sagaalkii qofood ee siyaasiyiinta ahaa ee kasoo muuqday maxkamadda. Bishii Agoosto ee sannadki 2015kii, Madaxweynaha Puntland ayaa amray in laga noqdo xukunnadii lagu riday saddexdii qofood ee kale.

42. Kiiskaasi wuxuu ku saabsanaa shakhsiyaad ka-qaybgalay shir iyagoo fikradohooda iyo aragtiyadooda ka dhiibanayay arrimo iyaga khuseeya maadaama ay yihiin dad Soomaaliyeed. Arrinkaasi wuxuu ahaa walaac weyn maadaama uu tusinayay in dowladdu cabsi-gelin iyo kadeed kula dhaqaaqayso shakhsiyaadka aan ku mowqifka ahayn, taas oo xadgudub ku ah xuquuqda uu damaanad qaaday Dastuurka.[65] Inkastoo aan [mar kale] la arkin dacwado kale oo culesykaas leh, waxaan weli kala caddayn inay sababtu tahay xorriyadda hadalka oo la xoojiyay [dadkana loo saamaxo inay fikradahooda xor u yihiin] iyo in cabsi afka lala xirtay [la aamusay] iyadoo ay jiraan xaalado siyaasadeed oo xasaasiyaddoodu sarreyso.

---

63 Dastuurka ISWA, qod. 37.

64 Dastuurka ku meelgaarka ee dowlad goboleedka Jubbaland ee Somalia, qod. 28(1) wuxuu qeexayaa dhismaha iyo muddo xileedka Golaha Baarlamaanka Dowlad Goboleedka oo ka kooban 75 xubnood. Doorashada baarlamaanka dowlad goboleedka ee la qabtay ka dib dhammaadka xilliga ku meelgaarka, Golaha waa inuu ka koobnaado ugu yaraan boqolkiiba 15 haween ah.

65 Inkastoo Dastuurka Federaalku uu qeexayo xorriyadda ururrada, oo uu ka midyahay ka qaybgalka xisbiyada siyaasadda, Dastuurka Puntland aad buu u xaddidayaa marka la eego "Sameynta iyo Xubnaha Ururrada Bulshada," (qod. 15) oo si qayaxan u mamnuucaya ururro ku saleysan beel ama leh dabeecad mileteri. Xaqa ka qaybgalka siyaasadeed sidoo kale shardi baa ku xiran, waxaana ka mid ah waajibka ah in la ilaaliyo dowladnimada Puntland kaasoo Dowladda Puntland ay ku fasirto inay soo hoos gelayaan ururrada iyo ka qaybgalka siyaasadda ee loo arki karo inay ka horimanayaan sida ay Puntland u fahamsantahay xudduudaheeda. Sidaas iyadoo ay tahay, haddana fikraddaasi waxay ku saleysantahay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ee qeexaya "khiyaamo qaran" in lagu dabaqayo Soomaaliya iyadoo loo eegayo dalalka kale ee ma aha dowlad goboleedyada federaalka ah ee sameysmaya dhexdooda.

# 3. GEEDI-SOCODKA DOORASHADA

43. Doorashooyin dadweyne oo ka dhaca Soomaaliya waxaa ugu dambeeysay 1967ki. Iyadoo la eegayo in boqolkiiba 98 dadka Soomaaliyeed ay da'doodu ka hooseyso 64 sano jir, [sidoo kalena] boqolkiiba 45.6 da'doodu ka hooseyso 15, dadka badankood weligood ma arkin doorashooyin demoqoraadi ah.[66]

44. Dastuurka Federaalka ah wuxuu dhigayaa "xaqqa samaysashada axsaab siyaasadeed iyo ka-qaybgalka hawlaha axsaab siyaasadeed."[67] Si kastaba ha ahaatee, xaaladda kajirta Soomaaliya ma saamixin in la sameeyo ama ay sameysmaan hay'ado siyaasadeed oo noocaas ah [abaabulan]. Mana jiraan axsaab siyaasadeed rasmi ah oo ka dhisan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalka ahina wuxuu meelmariyay oo kaliya Sharciga Axsaabta Siyaasadda bishii Juun 2016, taas oo abuuraysa habka diiwaan-gelinta axsaabta. Dastuurrada iyo sharciyada doorasho ee Puntland iyo "Somaliland" waxay xaddidayaan tirada axsaabta ee sida rasmiga ah loo aqoonsanyahay waxayna ka dhigayaan saddex axsaab, waxayna nidaaminayaan barnaamijyada siyaasadeed ee axsaabta, maaliyaddooda iyo cahdiyadooda.

45. Sannadki 2012kii, Shirweynayaashii Qaran ee Garoowe 1 iyo 2, waxaa iskugu tegay wakiillo ka kala socday gobollada koonfurta iyo bartamaha iyo Puntland, waxay ku kulmeen Puntland waxayna ballan qaadeen inay ka guurayaan nidaamka qabiilka ku dhisan ee loo adeegsanayay hanaan doorasho. Hase ahaatee, horumar laga gaaray geedi-socodyada siyaasadeed ee ku qoran Dastuurka Federaalka ah (dib u eegista iyo dhamaystirka dastuurka iyo dhismaha Dowlad-goboleedyada), iyo hay'adaha loo dhisay inay taageeraan geedi-socodka (Guddiga Federaal ee Hirgelinta Doorashada Dadban) iyo horumarinta qaab-samayn sharciyadeed ayaa ahaa hawlo gaabis ahaa oo aan ku socon sidii markii hore la filayay, taas oo sababtay inay adkaato in la qabto doorashooyin guud sanadka 2016. Xaaladda amni ee dalka kajirta ayaa saamayn ku leh awoodda in doorashooyin kadhacaan dalka oo dhan, iyadoo degmooyin badan ay weli kujiraan gacanta Alshabaab. Bishii Luuliyo ee sanadki 2015, Dowladda Soomaaliya waxay qirtay doorashooyin leh halbeeg caalami ah aanay suurtogeleynin sanadka 2016 laakiin waxaa dhacaya oo keliya doorasho dadban oo lagu soo dooranayo wakiillada taas oo loo qabanayo doorashooyinka baarlamaanka.

46. Madasha Wadatashiga Qaran (MWQ) ayaa la dhisay 19ki Oktoober 2015 si muwaadiniintu ay tala uga dhiibtaan nidaam doorasho kan ugu wanaagsan uguna macquulsan sanadka 2016. Wadatashiyada oo billowday bishii Oktoober 2015, waxaa dalka oo dhan ka dhacay wadatashiyo dadweyne oo looga tashanayay nooca doorasho, iyadoo dadka Soomaaliyeed ay si xor ah u muujiyeen inay doorbidayaan in laga guuro [hanaanka] soo-xulista ee aan daah-furnayn ee odayaal dhaqameedyadu wax kusoo xulaan loona guuro geedi-socod intaas ka ballaaran oo loo wada dhanyahay. Wadatashiyadu waxay isku keeneen kasoo-qaybgalayaal kakala socday qaybaha kaladuwan ee ururada bulshada, oo ay kamid ahaayeen haweenka iyo dhalinyarada. Aragtiyada ayaa si xor ah loo muujiyay, iyadoo aan weliba la dhegeysan qorshaha hogaamiyeyaasha siyaasadda oo isku deyayey in doodda u weeciyaan hal jiho. Madashii waa ay soo afmeerantay waxayna soo saartay baaq ay ku dalbanayso geedi-socod loo wada dhanyahay.[68]

47. Markaas ka dib, Dowladda Federaalka ah ayaa qaadatay mas'uuliyadda horumarinta hanaan la taaban karo oo ka jawaabaya aragtiyada kasoo-qaybgalayaashii MWQ. Hanaanka ay ku dhawaaqday DFS 28ki Febraayo 2016ki ayaa si weyn looga guul gaarayaa ujeedkaas.[69] Waa mid ka gudo weyn geedi socodkii

66 Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Sanduuqa (Hay'adda) Qaramada Midoobay ee Dadweynaha, Sahankii Qiimeynta Dadka 2014 ee 18ka Gobol ee Soomaaliya ee dagaalka ka horeeyay (PESS).

67 Isla meesha.

68 Baaqii Madasha Wadatashiga Qaran ee la soo saaray 16kii Disembar 2015 wuxuu ballanqaaday mabaadi' iyo hawlo muhim ah oo ay ka midtahay in la xaddido muddo xileedka Dastuuriga ah ee laamaha fulinta iyo sharcidejinta, dhisidda Aqalka Hoose iyo Aqalka Sare ee Doorashada 2016, Baarlamaan leh xubno isku dheellitiran deegaanada doorashada iyo beelaha, ergooyin doorasho oo ku codeeya caasimadaha dowlad goboleedyada federaalka ah iyo inay jiraan xubno metela haweenka, dhallinyarada iyo bulshada rayidka iyadoo kuraas loogu qoondeeyo haweenka labada aqal ee baarlamaanka. Khariidad waddo ayaa markii dambena loo dejiyay hanaanka doorashada 2016 iyo muddada 2016-2020.

69 Warmurtiyeedkii Hanaanka Doorashada 2016, ee uu Xafiiska Ra'iisal Wasaaraha Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya soo saaray 28kii Janaayo 2016.

2012ka, kaas oo 135 odayaal dhaqameed oo kaliya ay kasocday dhamaan Soomaaliya ay soo xuleen 275ka xubnood ee Baarlamaanka Federaalka. Hanaanka doorasho ee 2016ka[70], ergo doorasho oo gaaraya 13,750 xubnood ayaa soo dooran doona 275ka xubnood ee Aqalka Hoose, iyadoo weli kuraasta qoondadeedu ay kala aadeyso beelaha laguna salaynayo hanaanka 4.5.[71] Hadda, xubnaha baarlamaanada maamul-goboleedyada ayaa soo xuli doona 56 xubnood oo uu yeelanayo Aqalka Sare.

48. Intaas waxaa sii dheer, hanaanka doorasho wuxuu tilmaamayaa in 30 boqolkiiba labada Aqal ee Baarlamaanka noqonayaan haween, ayna kordhinayaan matalaadda dhalinyarada da'doodu ka hooseyso 35 jir. Si kastaba ha ahaatee, hababkii lagu gaari lahaa yoolalkaas ayaanan weli kala caddayn, iyadoo dhamaan kuraasta Aqalka Hoose la qoondeeyay in lagu qaybsado qaab qabiil, odayaal dhaqameedyaduna soo xuli doonaan xubnaha ergada doorashada. Waa wax laga xumaado in Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya aanu meelmarinin hanaanka, iyadoo markii dambe Madaxweynuhu ku ansixiyay Xeer Madaxweyne 30ki April 2016.[72] Iyadoo taasi aanay hakinaynin geedi-socodka, ayaa haddana maqnaanshaha ansixinta Baarlamaanku ay caqabado ku keentay wadahadaladii siyaasadeed ee loogu jiray geedi-socodka doorashada, oo ay kamid tahay kootada 30 boqolkiiba ee matalaadda haweenka.

49. Hanaanka wuxuu ka reebay gobolka Banaadir – gobolka ugu dadka badan[73] dalka – inuu xubno ku yeesho Aqalka Sare ee lasoo jeediyay, iyadoo lagu doodayo in sabatu tahay maqaamki gobolka Banaadir iyo magaalada Muqdisho oo aan weli la xalin.[74] Qowmiyadda Banaadiriga, oo kamid ah dadka laga tirada badanyahay ee deggan Muqdisho, ayaa ka hortimid qorshahaas waxayna sheegeen in go'aankaasi uu u saameeyay si aan u cuntamaynin, iyadoo qowmiyaddu aanay kuraas metelaad ku lahayn Aqalka Sare.[75] Iyadoo taas laga jawaabayo, ayaa 25kii Juun 2016ki, Madasha Hogaanka Qaranka Soomaaliyyed, oo ah madal kulmisa madaxda Dowladda Federaalka, Baarlamaanka Federaalka iyo dowlad-goboleedyada federaalka ka tirsan, waxay ansixisay laba kuraas oo dheeri ah oo lagu daray Aqalka Sare loona qoondeeyay qowmiyadda Banaadiriga. Inkastoo qayb ka mid ah cabashooyinka qowmiyadda Banaadiriga wax laga qabtay, hadana arrimo badan ayaan weli la xallin, MHQ ayaana isku raacay in la dhiso guddi ka kooban 19 xubnood oo soo darsa arrimahan kana soo talabixiya, waxaana arrimaha ka mid ah matalaadda iyo maqaamka. 9kii Agosto 2016ka, MHQ waxay isku raacday habab kale oo dheeraad ah oo lagu xaqiijinayo matalaadda qowmiyadda Banaadiriga.[76]

50. Si kastaba ha ahaatee, waxaa khilaaf ka dhex-jiraa qowmiyadda Banaadiriga oo isku khilaafsan cidda matalaysa qowmiyadda. Inkastoo ay jiraan shakhsiyaad caan ah oo ka mid ah qowmiyadda Banaadiriga islamarkaana haya xilal sarsare[77] oo heer qaran ah iyo kuwo heer gobo oo Banaadiri ah, qaar kamid ah xubnaha qowmiyadda ayaa su'aal ka keenay in xubnaha xilalka haya ay ka shaqeeyaan danta ugu wanaagsan ee qowmiyadda. Golaha Isbedel-Doonka Siyaasadda Beelweynta Banaadiga, koox u badan shakhsiyaad dhalinyaro ah (oo ay kujiraan qaar kayimid qurbaha), ayaa codkooda ku dhaleeceynayay madaxda xilligan horboodda siyaasadda qowmiyadda Banaadiriga. Iyadoo kala qaybsanaantaas ka dhexjirto qowmiyadda dhexdeeda, ayaa waxaa caqabad noqon doonta cidda ku fariisan doonta labada kuraas ee Aqalka Sare ee loo qoondeeyay qowmiyadda Banaadiriga.

70 Sida uu sheegayo Sahan Tirakoobka PESS ee la qaaday 2013-2014, dadka Soomaaliyeed waxaa lagu qiyaasaa inay yihiin 12.3 million, oo boqolkiiba 46 per ee dadku ay da'doodu ka hooseyso 15.
71 Habka 4.5 waa nidaam qoondo oo isukeenaya afar beelood oo waaweyn oo mid walba ay leedahay 61 xubnood iyo beelo laga tiro badan yahay oo leh 31 xubnood.
72 Ra'iisal Wasaaraha ayaa hanaanka doorasho u gudbiyay Baarlamaanka 30kii Abriil 2016.
73 Sahanka Tirakoobka PESS
74 Dastuurka Federaalka, qod. 9 (magaalo madaxda dalka). Dastuurka Federaalku uma asteynayo magaalada Muqdisho inay tahay magaalo madaxda Soomaaliya laakiin wuxuu sheegayaa in 'maqaamka magaalo madaxda Soomaaliya lagu xaddidi doono geeddi socodka dib u eegidda dastuurka, labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaana xeer gaar ah u dejin doona arrintan." Arrinta weli lama xallinin.
75 www.Garooweonline.com/en/news/somalia/somalia-mogadishu-protests-for-representation-in-upper-house.
76 War-murtiyeedka Madasha Hogaanka Qaran ee doorashada 2016, 9 Agoosto 2016.
77 Guddoomiye Ku Xigeenka koowaad ee Baarlamaanka Federaalka iyo Ku Xigeenka Guddoomiyaha Gobolka Banaadir.

51. Isku soo duub, maadaama geedi-socodka doorashada 2016ka uu awood u siinayo tiro yar oo kamid ah dadka Soomaaliyeed inay ka-qaybqaataan, ayaa hadana waxay tahay marxalad loogu sii tallaabayo doorashooyin dadweyne oo leh halbeegyo caalami ah oo dhaca sanadka 2020.

## Ka-qaybgalka Haweenka ee Arrimaha Siyaasadda

52. Haweenka Soomaaliyeed, iyagoo adeegsanaya ururada bulshada, ayay awood u yeesheen inay si xor ah uga doodaan uguna ololeeyaan tallaabooyinka lagu xaqiijinayo kootada 30 boqolbiiba ee matalaadda haweenka ee hay'adda sharci dejinta iyo hay'adaha hirgelinta doorashada dadban. Ololе badan ayaa loo galay sidii lagu xaqiijin lahaa ballan-qaadki madaxda ugu sarreysa siyaasadda Soomaaliya ay ku ballan qaadeen ka-qaybgalka haweenka ee geedi-socodka doorashada 2016. Natiijadii ugu weyneyd ee laga gaaray ololaha la qabtay waqti hore, ayaa noqotay in bishii Maajo 2016 uu Madaxweynuhu magacaabay Guddiga Danjirayaasha Sama-ka-talinta si ay u taabba-geliyaan kootada boqolkiiba 30 ka ah ee haweenka.

53. Kootada boqolkiiba 30 ee haweenka waxaa loo asaasay geedi-socodkii Baarlamaanka Federaalka ee 2012ki, laakiin boqolkiiba 14 kaliya ayaa haween ka noqotay xildhibaanadii lasoo xulay.[78] "Somaliland", Aqalka Wakiilada oo ka kooban 82 xubnood, labo kaliya ayaa ka ah haween, Aqalka Wakiilada ee Puntland oo isna ka kooban 66 xubnood, labo kaliya ayaa ka ah haween. Inkastoo ballan qaadka siyaasadeed ee ku aaddan kootada boqolkiiba 30 ee geedi-socodka doorashada ay tahay wax weyn, hadana khatar ayaa ku iman karta maadaama meesha ay ka maqanyihiin habraacyadii iyo hanaankii lagu fulin lahaa ballan qaadkaas. Saamaynta xooggan ee odayaal beeleedku ku leeyihiin arrimaha dadweynaha ayaa ah caqabadda ugu weyn ee ku-hor-gudban ka-qaybgalka haweenka, maadaama haweenku aanay matalaad ku dhex lahayn odayaal beeleedka. Sidaas darteed, labadii wareegto[79] ee lasoo saaray sanadka 2016ka ee ku saabsanaa hanaanka doorashada ee ka duulayay ballan-qaadkii MHQ ee ku aaddanaa in 30 boqolkiiba kuraasta labada Aqal ee Baarlamaanka loo qoondeeyo haweenka ayaa ahaa kuwo xusid mudan. War-murtiyeedkii MHQ ee lasoo saaray 9kii Agosto 2016 ayaa iyaduna ahayd tallaabo weyn, waxayna ku boorrisay odayaal dhaqameedka iyo ergada doorashada inay "xaqiijiyaan" in boqolkiiba 30 xubnaha loosoo doorto Aqalka Hoose ay noqdaan haween, waxaa sidoo kale oo ay ku baaqday matalaadda haweenka ee ergada doorashada iyo Aqalk Sare.

54. Maadaama geedi-socodka doorashada 2016 uu yahay mid muhiim ah, taageerada lagu xoojinayo ka-qaybgalka haweenka ee nolosha dadweynaha waa inay iskugu-jirtaa muddada dhow, muddada dhexe iyo muddada fog intaba. Tusaale ahaan, dadaalada muddada dhow waxaa ka mid ah kor u-qaadidda haweenka codeynaya iyo kuwa is-diiwaan-gelinaya ee musharaxiinta ah, aqoonta haweenka codeynaya, badbaadinta, iyo in haweenku helaan jawi ay si xor ah ugu tartamaan, ololeeyaan uguna codeeyaan Maalinta Doorashada. Muddada dhexe, dadaalada lagu caawinayo saamaynta [haweenka] ee doorashooyinka 2020ka waxaa ka mid ah tababar iyo tayo-dhisid loo fidiyo haweenka musharaxiinta ah iyadoo maanka lagu hayo ololaha siyaasadeed iyo u-doodista tirada ugu yar matalaadda haweenka oo ah 30 boqolkiiba inay ku yeeshaan hay'adaha go'aan gaarista leh dhamaan heerarka ay ka koobanyihiin, oo ay kujiraan heerar degmo. Muddada fog, kor u-qaadista dowrka hogaan ee haweenka iyadoo loo marayo dib u habaynta xisbiyo siyaasadeed, wacyigelin laga sameeyo ballan qaadka Dowladda ee ku aaddan sinnaanta arrimaha Dhedig-Labka, dhaqaale ku filan loo qoondeeyo ururada haweenka, waxaa iyana muhiim ah in haweenka laga hor-leexiyo caqabadaha sharci iyo kuwa taakulaynta ah.

55. Matalaadda siyaasadeed ee haweenka waxaa loola jeedaa matalaadda ay ku dhexleeyihiin axsaabta siyaasadda, ka-qaybgalka geedi-socodka doorashada, matalaadda iyo kamid noqoshada ururada bulshada rayidka ah iyo awoodda ay u leeyihiin saamaynta doodaha. Haweenka Soomaaliyeed waxay la kulmaan

78 Ra'iisal Wasaaraha ayaa 24kii Juun 2016 laba wasiir oo haween ah – Wasiirka Waxbarashada iyo Wasiirka Caafimaadka – ku bedelay rag xubno oo ka tirsan Baarlamaanka. Si rasmi ah looma sheegin sababta xilka looga qaaday, laakiin waqtigu wuxuu ahaa mid aan caadi ahayn iyadoo muran weyn uu ka taagnaa xubnaha haweenka metela doorashada 2016.

79 Wareegtada koowaad ee Madaxweynaha waxaa la soo saaray 27kii Janaayo 2016 waxayna soo jeedisay hanaanka doorashada 2016 oo ku saleysan habka 4.5 ee beelaha ku saleysan. Wareegtada labaad, oo la soo saaray 22kii Maajo 2016, waxay soo bandhigtay qaababka hanaanka doorashada 2016.

xaalado aad u sarreeya oo takoorid ah oo ku saabsan dhinac kasta oo nolosha ah, taas oo saamaysay awooddooda ka-qaybgal ee nolosha dadweynaha iyo tan siyaasadda. Matalaadda sida joogtada ah u hooseysa ee haweenku ku leeyihiin madasha iyo fadhiyada go'aanka lagu gaaro ayaa sidoo kale saamayn toos ah ku yeelatay saaxada siyaasadda iyo midda dadweynaha.[80]

56. Hal tusaale oo ka mid ah caqabadaha jira waxaa kamid ah Puntland, halkaas oo tiro kamid ah ururada haweenka, oo ay kamid yihiin Ururka Haweenka ee Talo-wadaag, Ururka Haweenka Puntland, iyo weliba Wasaaradda Haweenka ay halgan ugu jiraan sidii codka haweenka loo maqli lahaa inta loo socdo doorashooyinka 2016. Ururradani waxay shirar farabadan la qaateen hogaamiyeyaasha saamaynta ku dhex leh Puntland, oo ay kamid yihiin Madaxweyne Ku-xigeenka, Afhayeenka Baarlamaanka, hogaamiyeyaasha dhaqanka iyo kuwa diinta waxayna ka dhax arkeen odayaal dhaqameedka "halyeeyo" u taagan arrinta ka-qaybgalka haweenka. Inkasta oo ololohooda aan laga hor-imaanin, hadana waxay walaac ka muujiyeen inay helaan ka-qaybgal dhab ah oo ay ka-qaybgalaan kulamada dadweyne maadaama doodaha iyo jawigaba ay qabsadeen oo saamayn ku leeyihiin raga. Tusaale ahaan, bishii Maajo ee sanadka 2016ka, iyadoo la joogo magaalada Qardho ee Puntland, waxaa odayaaha dhaqanku u diideen ururadii matalayay haweenka inay ka-qaybgalaan shirweyne ay iskugu tageen odayaal dhaqameed Soomaaliyeed oo kor u dhaafaya 100 kana kala yimid dalka daafihiisa, iyadoo aan dheg jalaq loosiin codsiyadii haweenku dirayeen si ay uga qaybgalaan shirweynahaas. Xubnihii ka socday ururada haweenka ee tegay goobta uu kasocday shirweynaha waxaa loo diiday inay galaan shirka, iyadoo dadki qabanqaabinayay shirweynaas ay si cad u sheegeen "halkan ma aha meel loogu talagalay haween".

57. Taariikhdu markay ahayd 30kii Juun 2016, koox ka mid ah culumaa'udiin ka tirsan dalladda Midowga Culumaa'udiinka Soomaaliyeed ayaa cambaareeyay ansixintii Golaha Wasiirrada ay horay u ansixiyeen Siyaasadda Jinsiga (Dheddig-Labka) iyagoo sheegaya in qodobbo badan oo kamid ah ay ka soo horjeedaan Dastuurka Federaalka ah iyo Islaamka intaba, waxayna ku baaqeen in ciqaab lamarsiiyo kuwii ka dambeeyay siyaasaddaas. Culumadu waxay su'aal ka keeneen ballan-qaadka ay siyaasaddaasi ballan-qaadday sinnaanta raga iyo haweenka, awood-siinta haweenka, ka-qaybgalkooda siyaasadda iyo matalaaddooda ee gudaha Soomaaliya. Intaas wixii ka dambeeyay waxaa la arkayay kadeed iyo beegsi la beegsanayo hogaamiyeyaasha haweenka, waxaana arrimahaas ka mid ah hanjabaado dil ah oo ka dhan ah Wasiiradda Haweenka iyo [Horumarinta] Xuquuqul Insaanka (oo iyadu ah halka qof ee dumar ah ee ku jirta golaha wasiirrada ka dib isku-shaandayn badan oo isdabajoog ahayd tan iyo 2012kii).[81] Waxaa sidoo kale baraha bulshada lagu faafiyay nuqul la been abuuray oo Siyaasadda Jinsiga ah (ama Dheddig-Labka) oo aan ahayn nuqulkii asalka ahaa, waxaana lagu soo daray qodobo aan la ogolaanin sida dadka isku jinsiga ah oo isguursada iyo cinjirka galmoodka oo loo qaybiyo hoteelada.[82]

## Shirarka Siyaasadeed iyo Mudaaharaadyada

58. Xaqa qabsashada banaan-baxyo nabadeed iyo mudaaharaadyo aan loo soo qaadanin wax ogolaansho ah ayaa waxaa si joogto ah u diiday Wasiirkii Hore ee Arrimaha Gudaha, iyo Wasiirka hadda xilka haya ee Amniga Gudaha, wasaaraddan oo amraysa qabanqaabiyeyaasha isu-imaatinka dadweyne inay usoo qaataan ogolaanshaha wasaaradda, iyadoo sabab looga dhigayo xaalado amni, oo ay ugu weyntahay in Al Shabaab ku soo dhex dhuuman karto isu-soobaxyada.[83] Banaanbaxyada ka dhaca Muqdisho waxaa intooda badan soo qabanqaabinayay Maamulka Gobolka Banaadir, oo markaasi lagu taageerayo qorshooyinka Dowladda ama looga soo horjeedo weerarada Al Shabaab, waxaa kaloo iyana banaanbaxyo qabanqaabiyay Golaha Isbedel-Doonka Siyaasadda Beelweynta Banaadiga, oo dalbanayay matalaad siyaasadeed oo ballaaran.

80 Isla meesha.

81 Intii u dhexeysay 17kii iyo 29kii Juun 2016, Wasiirka iyo la taliyeyaasheeda ayaa dhowr jeer telefoonka laga soo wacay loona sheegay inay "war ka heli doonaan dad kale", madaxda diinta iyo taageerayaasha ayaa si bareer ah u sheegay inay banaantahay in la dilo Wasiirka iyo shaqaalaheeda, taasoo lagu sheegay meelo ay ka mid tahay salaadda Jumcaha. Al Shabaab ayaa doodda u adeegsaday si ay u sheegtaan in DFS ay tahay mid aan Islaam ahayn.

82 Tusaale ahan, eeg e.g. http://waagacusub.net/articles/2298/Topnews-Akhri-Sir-Culus-Dukumiintigii-lagu-ansixiyay-sharcigga-khaniisinta-Somalia-iyo-sinaanta-Ragga-iyo-dumarka

83 Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Dowladda Maraykanka, *Warbixinada Dalalka ee Dhaqamada Xuquuqul Insaanka*, 2015. www.state.gov/documents/organization/252939.pdf

59. Waxaa meelo kala duwan oo dalka ah ka dhacay dhacdooyin lagu xakamaynayo cadaadisna lagu saarayo dibadbaxyo dadweyne ama meelo lagusoo bandhigayo aragtiyo mucaaradnimo. Maamulka "Somaliland" wuxuu ka mamnuucay axsaabta siyaasadda inay kulamo ku yeeshaan hoteelada ama goobaha dadweynaha, taas oo caburin xooggan ku ah mucaaradka.[84] 13kii Maajo 2013, hay'adaha amniga ee "Somaliland" ayaa rasaas ku furay dibadbaxyo ka dhacay magaalada Burco oo looga dibad baxayey mamnuucid lagu soo rogay gurashada ciidda, waxaana halkaas ku dhintay qof rayid ah oo aan hubaysnayn. 14kii Agosto 2013, Muqdisho gudeheeda, ciidamada amniga Dowladda Soomaaliya ayaa bam-gacmeedyo iyo rasaas noo-nool u adeegsaday si ay u kala eryaan dad dibadbax dhigayay oo kasoo horjeeday amar dowladdu uga saartay dad ku noolaa dhul Dowladdu lahayd. Saddex banaanbaxayaasha ka mid ahaa ayaa ku dhintay, 10 kalena waa ku dhaawacmeen, iyadoo ciidamada amaanku ku andocoodeen inay rasaasta fureen ka dib markii banaanbaxayaashu iska dhegatireen amar lagu joojinayay banaanbaxa. 7dii Juun 2014ki, askar katirsan Ciidanka Xoogga Soomaaliyeed ayaa rasaas ku furay wadayaasha gawaarida taksiga oo banaanbax ka dhigayay magaalada Afgooye ee gobolka Shabeelada Hoose, waxaa halkaas ku dhintay qof kamid ah banaanbaxayaasha. 1dii Janaayo 2015ki, ciidanka amaanka gobolka Galguduud ayaa rasaas ku furay taageerayaasha  Ahlu Sunna Wal Jamaaca ka dib markii banaanbax loogaga soo horjeeday Dowladda Federaalka uu isku bedelay mid rabshada wata, laba qofood ayaa halkaas ku dhimatay. 22kii Febraayo 2016kii, Guddoomiye Kuxigeenka Golaha Isbedel-Doonka Siyaasadda Beelweynta Banaadiga ayaa si aan laga fiirsan waxaa u xiray ciidamada NISA ka dib isu-soobax taageerayaasha qowmiyaddu ka dhigeen Muqdisho iyagoo u doodaya xaqqa Qowmiyadda Banaadiriga.[85] Saddex maalin kadib ayaa lasoo daayay, ka dib markii dadaal ay u gashay UNSOM iyo faragelintii arrinta ku samaysay Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka ee Dowladda Federaalka ah.

60. 26kii Maarso 2016kii, saddex qof ayaa ku dhaawacmay rasaas ay ciidamada boolisku ku fureen banaanbax looga soo horjeeday DFS oo ka dhacay magaalada Beledweyne, ee gobolka Hiiraan, waqtigaas oo Madaxweynaha Federaalka uu booqanayay. Sida kiisas kaleba ku dhacda, ma cadda in baarista kiiskaas ay billaabatay. Bilihii April iyo Maajo ee 2016ka, ciidamada amniga ee Jubbaland ayaa xiray oo xabsiga u taxaabay 11 haween ah, iyadoo qaarkoodna la garaacay. Xariggu wuxuu jawaab u ahaa banaanbax ay haweenkaasi uga soo horjeedeen dhul si sharci darro ah uu ku baxshay maamulka Jubbaland uguna wareejiyay dhinac ama saaxiib caalami ah oo aan lasoo bandhigin. Dhulku wuxuu ahaa dhul dan guud waxaana isticmaalayay haweenka.

61. Iyadoo khilaafsan Dastuurka Federaalka ah, ayaa Wasaaradda Amniga Gudaha 9kii Luuliyo 2016ka mamnuucday kulamada dadweynaha ee lagu qabto hotellada ku yaalla magaalada Muqdisho haddii aan si hordhac ah loogu wargelin Wasaaradda.[86] 14kii iyo 15kii Luuliyo 2016ka, Hay'adda NISA ayaa joojisay laba shir siyaasadeed oo kala duwan oo ay soo abaabuleen laba beelood oo kala duwan kuna qabsanayeen hoteelo ku yaal Muqdisho si ay uga xaajoodaan doorashada soo socota iyo soo magacaabista xubnaha baarlamaanka. Mid ka mid ah labadaas dhacdo, NISA waxay sheegtay inay ahayd in laga guuro hoteelka sababo amaan dartood, iyadoo maamulayaasha hoteelku ay sheegeen in aanay jirin khatar amni. Qaar ka mid ah odayaashii ka qaybgalay mid ka mid ah shirarka waxay sheegeen in saraakiisha NISA ay teleefanka ka soo weceen si ay uga haraan ka-qaybgalka shirka. Dhacdada kale, NISA waxay ku doodday in dadka soo abaabulay shirka aanay haysanin rukhsad ama ogolaansho ay ku qaban karaan shir siyaasadeed. 14kii Luuliyo 2016ka, NISA ayaa gashay hotel kale oo ku yaal Muqdisho, waxayna markii dambe ogaadeen in uu halkaas ay ka jirtay uun xaflad aroos.

---

84 Warbixinta Freedom House 2015 ee Soomaaliya.

85 Maamulka Gobolka Banaadir (MGB) waa dowladda hoose ee gobolka Banaadir oo ka kooban magaalad Muqdisho iyo degaanada ku hareereysan. Golaha Isbedelka Siyaasadda Banaadiriga (BPRC) wuxuu dhalleeceeyaa MGB wuxuuna u ololeeyaa xuquuqda beelaha Banaadiriga guud ahaan iyo xuquuqdooda ee magaalada Muqdisho. Golaha BPRC wuxuu ku doodaa in beelaha Banaadiriga iyo Reer Mataan (oo ah jufo ka tirsan beesha Abgaal) ay yihiin dadka asal ahaan ka soo jeeda gobolka Soomaaliya ka mid ah waana inay metelaad intan ka fiican ku helaan maareynta Gobolka Banaadir.

86 Dastuurka Federaalka, qod. 20 (ee qeexaya in "qof kasta wuu xaq u leeyahay inuu abaabulo kana qaybgalo kulamo, iyo inuu si nabad ah u mudaaharaado, isagoon u baahanin ogolaansho hore.")

# III. Xaaladda Amniga iyo Xorriyadda Hadalka

62. Horumarka xaddidan ee laga gaaray dhismaha hay'ado amni oo dhab ahaan u ah hay'ado qaran oo wax ku ool ah waxa lagu asaasay qaab-samayn sharci iyo mid siyaasad. Soomaaliya weli waa meel in laga hawlgalo ay khatar tahay, iyadoo weli amni la'aanta ama amni daridu ay saamaynayso dhamaan dadka Soomaaliyeed, hadana waxaa si gaar ah ay u saamaysay wariyeyaasha iyo hawlwadeenada warbaahinta, dadka u dahqdhaqaaqa [nabadda] iyo hogaamiyeyaasha siyaasadda. Xadgudubyada la diiwaangeliyay ee dadkaas lala beegsaday waxaa ka mid ah dhimasho, dhaawac, xarig aan laga fiirsan iyo xabsi gelin, cabsi-gelin iyo kadeed, weerar jir ahaan la weeraro, xarumo warbaahin oo albaabada loo laabo la-wareegid wargeysyo xanibaad shabakado, diidmo in xog la helo dalka oo dhan, oo ay kujirto "Somaliland".

63. Laga soo billaabo markii la dhisay Dowladda hadda jirta bishii Agosto 2012 ilaa Juun 2016, 30 wariye iyo hawlwadeeno warbaahin, oo ay ka mid ahaayeen labo dumar ah ayaa ku dhintay weerarada dhinacyada badan ama qorsheysan.[87] Waxaa ka mid ahaa todobo u shaqaynayay warbaahinta Dowladda halka 23ka kalena ay u shaqaynayeen warbaahinta madaxabanaan. Waxaa sii socda xadgudubyada loo geysto hogaamiyeyaasha siyaasadeed, oo ay ku jiraan khaarijin, kadeed iyo cabsi-gelin, inkastoo ay baaxad ahaan ka hooseeyeen sidii ay ahaayeen wixii kahoreeyay 2012ki. Laga soo billaabo 2012ki, 18 xildhibaan, oo ay ku jirtay mid dumar ah, ayaa lagu dilay dhowr kale oo intaa ka badanna lala beegsaday qaraxyada gawaarida lagu xiro ama iskuday dil. Xog yar ayaa laga hayaa in dhacdooyinkaas baaritaano lagu sameeyay, iyadoo dhacdooyinkaas qaarkood ay sheegteen Al Shabaab, iyadoo qaar kalena aan la sheeganin ama ay soo maleegeen maleeshiyo beeleed.[88]

64. Al Shabaab waxay sidoo kale adeegsataa warbaahinta oo ay ka dhigataa aalad ay u adeegsato dacaayad ay kula dagaalanto DFS iyo joogitaanka ajaanibta joogta Soomaaliya, oo uu ku jiro Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM). Al Shabaab waxay ka mamnuucday dhamaan warbaahinta, haddii ay noqon lahayd tan madaxabanaan ama tan dowladda, inay ka hawlgasho meelaha ay gacanta ku hayso. Warbaahinta loo rukhseeyay inay ka hawlgasho waa Idaacadda Maxalliga ah ee Al Shabaab ku leedahay magaalada Jilib ee gobolka Jubbada Dhexe, taas oo sii daysa khudbooyin diini ah oo lagu buun-buuniyo fikirka, caqiidada iyo dacaayadaha Al Shabaab. Tani waxay si saameyn leh u xaddidaysaa xogta ay helayaan dadka ku nool meelaha gacanta ugu jira Al Shabaab. Saamaynta Al Shabaab waxay sidoo kale meelaha aanay maamulin iyagoo adeegsanaya hawl fuliyeyaal beegsada wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta ee dhamaan dalka.

## 1. CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED

65. Laga soo billaabo 2012kii, dib-u-habayn aan badnayn ayaa lagu sameeyay hay'adaha amniga Soomaaliya, ee gaar ahaan Muqdisho, Jubbaland iyo Koonfur Galbeed.[89] Qorshaha Guulwade waa qaab-samaynta lagu xoojinayo Ciidanka Xoogga Dalka (CXD), iyadoo ujeeddadu tahay in muhiimadda amniga ee gudaha Dalka ay la wareegaan booliska rayidka, si loo horumariyo fulinta sharciga guud ahaan.

87 Sida uu sheegay Guddiga Ilaalinta Saxafiyiinta, 17 saxafi ayaa lagu dilay dalkoo dhan tan iyo Janaayo 2014 ilaa Febraayo 2016. https://cpj.org/killed/2015/. Laga soo billaabo 2014 ilaa Febraayo 2016, UNSOM wuxuu diiwaangeliyay sagaal saxafi oo la dilay iyo 12 oo la dhaawacay.

88 Mas'uuliyadda dilka 10 ka mid ah saxafiyiintan waxaa loo aaneynayaa Al Shabaab, maadaama in badan oo ka mid ah lagu dilay weerarro laxaad leh oo isugu jira weerarro isxigxiga oo abaabulan ee ay Al Shabaab soo qaadday kana kooban adeegsiga waxyaabaha qarxa (baabuurta iyo dadka) iyo dagaallamayaal hubaysan. Al Shabaab ma sheeganin mas'uuliyadda dilalka qorsheysan, inkastoo loo aaneeyo, laba eedeysane oo Al Shabaab ka tirsan ayaa loo daldalay mid ka mid ah dilalkaas ka dib markii ay maxkamad mileteri ku xukuntay inay ka dambeeyeen dilka wariye gabar ahayd.

89 Ka hawlgala aagagga 1, 2, 3 5 iyo 6 ee gobollada ay AMISOM maamusho.

66. Iyadoo uu socdo isku-dhafka maleeshiyaadka, ayaa haddana waxaa jira kooxo hubaysan oo barbar socda iyo maleeshiyaad amni[90] oo aan hoos tegin DFS iyo CXD, taas oo wiiqaysa awoodooda xaddidaysana lahaanshahooda iyo maareyntooda amniga qaranka. Meelaha aanay maamulin dowladda/maamulada iyo hay'adaha amniga, waxaa xaddidan kor-joogtada lagu sameeyo sida dadka Soomaaliyeed ugu naaloodaan xuquuqul insaanka guud ahaan.

67. UNSOM waxay diiwaan-gelisay laba xaaladood oo CXD lala xiriiriyay inay xaddideen xorriyadda hadalka.[91] Mid ka mid ah xaaladahaas oo dhacday Disembar 2015 waxaa gacan ku lahaa CXD oo la kaashanaya Ciidanka Difaaca Qaranka Itoobiya (ENDF) ee ka mid ah AMISOM guutadiisa ku sugan Garbahaarey. Wariye madaxbanaan oo ka soo waramayay Gedo, Jubbaland, ayaa la xiray wuxuuna xirnaa 27 maalmood. Waa la jirdilay markii dambena waxaa si xoog ah loogu musaafuriyay Muqdisho. Qiilka loo yeelay xabsi-ku-hayntiisa waxay ahayd inuu daabacay labo maqaal oo uu ugasoo horjeeday falalka ciidamada Itoobiya ay ka geysanayeen deegaanadaas, oo uu ku soo qaatay aragtida dadweynaha ee ku aaddan ciidamada Itoobiya.

## 2. BOOLISKA

68. Booliska oo ka duwan NISA, ilaa waqti dhow, wax kaalin muuqaato ah kama cayaarin faragelin lagu sameeyo xaqa xorriyadda hadalka ee ka dhacay gobolada Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya.[92] Qorshaha Heegan ee 2015ka ayay ku caddahay qaab-samaynta dib u soo noolaynta adeegyada asaasiga ah ee booliska oo laga hirgelinayo guud ahaan Soomaaliya, waxaana qorshahaas lagu kabay oo lagu sii dhamaystiray qaab-shismeedka cusub ee ciidanka booliska (new policing model) ee la isku raacay bishii Maarso 2016ka ayna meelmarisay Madasha Hogaanka Qaran bishii Juun 2016. Qaab-dhismeedka cusub wuxuu ku salaysanyahay nidaam boolis federaal ah, oo ay kaabayaan hay'ado boolis, iyadoo ay yeelanayaan nidaam federaal oo dhexe oo amar iyo kaladambayn ah.

69. Waxaa la filayaa in qaab-dhismeedku sare u qadidoono jawaabcelin horumarsan oo laga bixiyo xadgudubyada kala duwan ee ka dhanka ah xuquuqul insaanka, oo ay ka mid yihiin xayiraadaha la saaro xuquuqda xorriyadda hadalka iyo ka-qaybgalka siyaasadda. Si kastaba ha ahaatee, maadaama aan weli lasoo gabagabeynin hanaanka iyo qaab-dhismeedka, sharci fulinta xilliga doorashada 2016 waxaa si wayn uga qaybqaadan doona ciidamo amni oo kale, gaar ahaan Ciidanka Xoogga Dalka iyo Ciidanka Nabadsugidda. Hawshaasi waxay u baahan doontaa in tayada sharci fulinta ee ciidamadaas amniga aad loo xoojiyo, ciidankaas oo la hawlgelin doono inta uu socdo geedi-socodka doorashada.

70. Booliska "Somaliland" waxay ahaayeen kuwo shacabka ku hayay gacan bir ah marka la eego ixtiraamka xorriyadda hadalka.[93] Bishii Juun 2016, waxay xireen oo xabsiga u taxaabeen afar dhalinyaro ah oo soo qabanqaabiyay doodwadaag ku saabsan walaaca ka jiray magaalada Berbera. Dadka la xiray waxaa kamid ahaa Afhayeenki xisbiga mucaaradka ah ee Wadani garabkiisa dhalinyarada. Doodwadaagga waxaa ka mid ahaa dhaleeceyn loosoo jeediyay heshiiska kireynta 30ka sano ah ee "Soomaaliland" la gashay shirkadda Dubai Port World ee ka dhacay Berbera. Markii dambe waa lasii daayay dadkii la xiray iyadoo aan dembi lagu helin, kadib markii ay Saldhigga Dhexe ee Boolska ee ku yaal Hargeysa ay ku xirnaayeen 14 maalmood.[94]

---

90 Tan iyo 2012, dhowr barnaamij oo caalami ah oo lagu maalgeliyo iskaashi labada dowladood ka dhexeeya ayaa taageerayay maleeshiyaadka amniga gobollada iyo ciidamada gaarka loo leeyahay.
91 Eeg faq. 59 ee cabburinta dibadbaxyada Shabeellaha Hoose.
92 Eeg dhacdooyinka mararka qaar Booliska la keeno si ay u taageeraan weerar ay NISA qaado.
93 Sidoo kale eeg IV. Warbaahinta ka jirta in "Somaliland".
94 Is barbardhig Dastuurka "Somaliland", qod. 22(1) (ee qeexaya in "qof walba uu xaq u leeyahay inuu ka qaybqaato arrimaha siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka si waafaqsan shuruucda iyo dastuurka").

# 3. HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABADSUGIDDA QARANKA

71. Daldaloolada ka jira dhanka sharci samaynta ayaa keenaya caqabado ku aaddan dhaqangelinta xorriyadda hadalka, taasoo u ogolaanaysa ciidamada sirdoonka[95] inay ku xadgudbaan, gaar ahaan ciidamada NISA, oo iyagu aan ku dhaqmin qaab-samaynta sharciyadeed iyagoo ay waajib ku tahay inay u hogaansanaadaan Dastuurka Federaalka ah iyo Xeerka/Habraaca Ciqaabta Dembiyada.

72. Iyadoo DFS ay dhistay Hay'adda NISA bishii Janaayo 2013,[96] hadana Hay'adda NISA laguma aasaasin sharci ama wareegto Madaxweyne, sidaa darteed, awoodeheeda iyo waajibaadkeedu ma qeexna. Sidaas oo ay tahay, maadaama NISA ay ka mid tahay hay'adaha amniga, waa inay u hogaansantaa Dastuurka Federaalka, oo qeexaya in hay'ada amniga laga rabo inay mas'uuliyad muujiyaan una hogaansamaan sarraynta sharciga, waxaana xakamaynaya maamul shacabi ah.[97] Si kastaba ha ahaatee, xarigga iyo xabsigeynta ay sida joogtada ah u fuliyaan ciidamada NISA ayaa iska indha tiraysa arrimahaas badabaadinta ah iyo damaanad-qaadka ku xusan sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka,[98] oo ay kamid yihiin in dadka xiran ay helaan qareeno u dooda iyo inay soo booqan karaan qoysaskooda, iyo xaqqa qofka eedeysanaha ahi u leeyahay in la horgeeyo hay'adaha garsoorka. Walaaca gaarka ah ee jira ayaa ah in dadka hogaamiyeyaasha siyaasadda ah, kuwa nabada u dhaqdhaqaaqa, wariyeyaasha iyo hawlwadeenada warbaahinta ee ay xiraan ciidamada NISA, in dadkaasi lagu xiro xarunta NISA ee *Godka Jilacow*, halkaas oo ah meel lagu xiro eedeysanayaal ka tirsan Al Shabaab, mana aha meel ay ka jirto korjoogista ama la-socodka hay'adaha garsoorka.

73. Kiiska Idaacadda Shabelle ayaa muujinaya caqbadaha kala duwan ee lala kulmo iyo galdaloolada ka jira ilaalinta sharciga, gaar ahaan hawlaha NISA. Idaacadda Shabelle oo la asaasay 2002di ayaa ah xarunta dhexe ee Shabakadda Warbaahinta Shabelle.[99] Hay'adaha dowladda ayaa dhowr jeer albaabada iskugu dhufatay, qalabkeedana waa lala wareegay, qaar ka mid ah hawlwadeenadeeda waa la xiray (waxaa ka mid ahaa milkiilaha islamarkaana ka mid ah hogaankeeda sare), qaarkoodna waxaa lagu riday xukunno xabsi ah waxaana la marsiiyay ciqaab adag. Intii u dhexeysay 2013ki iyo 2015ki, UNSOM waxay diiwaangelisay shan dhacdo oo khatar ah oo kala duwan oo hay'adaha dowladdu ku farageliyeen Idaacadda Shebelle.[100]

74. 23kii Oktoobar 2013, idaacadda ayaa hawada laga saaray iyadoo aan laga bixin wax faahfaahin ah muddo ka badan hal bil. Taasi waxay dhacday kadib markii idaacaddu sheegtay warbixin ku saabsan musuqmaasuq lagu eedeeyay qaar ka mid ah mas'uuliyiinta Dowladda, oo uu ku jiro Wasiirka Arrimaha Gudaha.[101] Isla maalintaas, ayaa ciidamada NISA iyo Booliska waxay idaacadda xoog uga saareen dhismo ay lahayd Dowladdu.

75. Bishii Nofembar 2013, NISA waxay xirtay milkiilaha Shabakadda Warbaahinta Shabelle iyo wariye waraysanayay qof dhibane dumar ah oo lagu sheegay in la kufsaday oo iyadu ku tilmaantay dembiilaha inuu yahay qof caan ah oo meelo badan ku xiran kuna sugan magaalada Muqdisho. 9kii Disembar 2013, maxkamad ku taalla Muqdisho xirtay dhibanihii lagu sheegay kufsiga iyo wariyihiiba waxaana dhibanaha lagu xukumay 6-bilood oo xabsi guri ah, halka wariyihiina lagu xukumay lix bilood oo xabsi ah iyadoo qiil looga dhigay inay soo jeediyeen tuhunno been abuura. Agaasimaha iyo milkiilaha Idaacadda Shabelle ayaa sidoo kale lagu xukumay hal sano oo xabsi ah iyaga oo lagu eedeeyay aflagaadeynta madaxda qaranka.

95 Dowlada gobolledyada sameysmaya waxay leeyihiin hay'adahooda sirdoon, tusaale, Adeegga Sirdoonka Puntland iyo Hay'adda Sirdoonka iyo Amniga Jubbaland.
96 NISA waxay bedeshay Adeegga Amniga Qaran ee la baabi'iyay sannadkii 1990.
97 Dastuurka federaalka ee Ku Meelgaarka, qod. 35 (6).
98 ICCPR, qod. 9 iyo qod. 14.
99 Shabakada Warbaahinta Shabeelle waxay ka koobantahay Idaacadda Shabeelle radio, Idaacadda Sky News FM iyo website-ka (www.shabelle.net).
100 Ogow in kiiskanidhacay iyadoo uu jiro muran dheer ee u dhexeeyay Shabeelle iyo Duqii hore ee magaalada Muqdish (intii u dhexeysay 2010 iyo Febraayo 2014), xilligaasoo ay si joogta ah isu weydaarsadeen eedeymo iyo aflagaaddo http://www.somaliareport.com/index.php/post/3250/Mubaraks_Musings.
101 Wuxuu ka soo shaqeeyay Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga laga soo billaabo 4tii Nofembar 2012 ilaa 17kii Janaayo 2014.

Markii dambe waa la sii daayay waxaana la geeyay goobamaan ah oo ay ku hawlhasho hay'ad aan dowli ahayn, halka wariyihii iyo agaasimihii Idaacadda Shabelle xabsiga loo dhaadhiciyay laakiin markii dambe lagu sii daayay ganaax lacageed.

76. Bishii Agosto 2014, NISA waxay albaabada iskugu dhufatay Xarunta dhexe ee Idaacadda Shabelle ay ku leedahay magaalada Muqdisho, waxay la wareegtay qalabkii, waxayna xirtay 17 ka mid ah hawlwadeenada, oo uu ku jiro milkiilaha iyo labo kamid ah tifaftirayaasha sare. Toban iyo afar ka mid ahaa dadkaas waxaa lasoo daayay laba maalmood kadib iyadoo Xafiiska Garyaqaanka Guud markii dambe uu xukumay saddexdii kale kuna xukumay khiyaano qaran iyo faafinta warar been abuur ah oo khalkhal gelin kara kala dambaynta guud.

77. Maxkamadda Gobolka Banaadir ayaa 1dii bishii Maarso 2015 maxkamad soo taagtay saddexdii qof, waxayna Shabakadda Warbaahinta Shabelle ku amartay inay bixiso USD 10,000 (Toban Kun oo Doolar) iyadoo idaacadda lagu eedeeyay inay hawada kasii deysay warar been ah "oo carqaladayn kara kala dambaynta guud". Agaasimaha Idaacadda Sky FM, oo ka mid ah Shabakadda Warbaahinta Shabelle, ayaa lagu amray inay bixiso USD 2,000 (Laba Kun oo Doolar) , kadib markii Xafiiska Garyaqaanka Guud uu ka noqday eedeyntii ahayd khiyaano qaran ee loosoo jeediyay Agaasimaha Idaacadda Sky FM. Ku xigeenka Tifaftiraha warbaahinta Shabelle ayaa sidoo kale lagu amray inuu bixiyo USD 500 (Shan boqol oo Doolar). Wariyeyaasha iyo hawlwadeenada warbaahintu waxay doorteen in aanay racfaan ka qaadanin waxayna bixiyeen ganaaxi. NISA waxay diidday inay soo celiso qalabkii idaacadda, iyadoo ka-hortimid amarkii maxkamadda. Xafiiska UNSOM ayaa soo farageliyay, taas oo keentay in qalabki la celiyo taariikhdu markii ay ahayd 14ki Maarso. Wax yar ka dibna idaacadihii dib ayay u hawl bilaabeen.

78. NISA ayaa 3dii bishii Abriil 2015 mar kale weerartay Shabakada Warbaahinta Shabelle, waxayna albaabada u xirtay idaacadaha Shabelle iyo SKY FM ee ku yaala Muqdisho, waxay xirtay oo xabsiga u taxaabtay hawlwadeeno sare, oo uu mar kale ku jiro Ku-xigeenka Tifaftiraha, waxayna la wareegtay qalabkii idaacada. Falkaasi NISA waxay uga jawaabeysay cod laga sii daayay idaacadda Shabelle oo ahaa hogaamiyaha Al Shabaab oo ka hadlayay weerarki ka dhacay Jaamacadda Garissa ee waddanka Kenya taariikhdu markii ay ahayd 2di April. Sida faahfaahinta hoose ku qoran, sanadki 2014kii, NISA waxay soo rogtay amar ay uga mamnuucday warbaahinta Soomaaliyeed inay sii daayaan codadka xubnaha Al Shabaab. Si kastaba ha ahaatee, haba yaraatee ma jirin maxkamad uu amarkaasi kasoo baxay ama Wareegto Madaxweyne oo arrinkaas lagasoo saaray. Xaaladdan iyada ah, maxkamadda gobolka Banaadir waxay diidday codsiga NISA ay codsatay in xabsiga lagu hayo wariyeyaal muddo 20 maalmood ah inta baaritaanadoodu socdaan. Iyadoo sidaas tahay, ayaa NISA waxay sii wadday inay xabsiga kusii heyso labadii hawlwadeen ee warbaahinta muddo 14 maalmood ah iyadoo aan loo heysanin fasax maxkamadeed, taas oo ka hor imanaysa Dastuurka Federaalka ah, Xeerka/Habraaca Ciqaabta Dembiyada, iyo go'aanki maxkamadda. Markii dambe waa lasii daayay markii ay arrinta soo faragelisay Wasaaradda Amniga Qaranka. 2dii bishii Maajo 2015, Wasiirka heer Federaal ee Wasaaradda Warfaafinta ayaa qalabkii oo waxyeelo gartay ku wareejiyay Shabakadda Warbaahinta Shabelle, labadii idaacadoodna dib ayay u billaabeen hawlohooda isla maalintiiba.

79. Tallaabooyinka ay qaadayso NISA waa kuwo xadgudub ku ah xayiraadaha la ogolaan karo, iyadoo xorriyadda hadalka aan loo ogolaanin Idaacadda Shabelle. Laga soo billaabo Sebtembar 2014 ilaa Oktober 2015, NISA waxay albaabada iskugu dhufatay saddex idaacadood, waxay xirtay 14 shaqaale warbaahin oo iskugu jira wariyeyaal iyo milkiilayaal, waxayna u yeertay labo agaasime idaacadeed iyo saddex wariye uguna yeertay inay xaadiraan xarunta dhexe ee NISA si su'aalo loo weydiiyo. Tallaabooyinka kale ee intaa sii dheer ee NISA kula kacday warbaahinta waxaa kamid ah la-wareegid qalab idaacadeed, iyo mamnuucid hawlo warbaahin. Kiisaska badankood, ma jirin war-qoraal rasmi ah ama farriin rasmi ah oo lagasoo saaray marka warbaahinta la xannibayay ama laga qaadayay xannibaadda ee waxaa loo marayay oo amarro toos ah. Saraakiisha NISA waxay booqanayeen xarumaha warbaahinta si ay hawlwadeenada ugu wargeliyaan amarka xannibaadda ah uguna hanjabaan wariyeyaasha ama shaqaalaha kale inay xirayaan.

Sidoo kale marka xannibaadda laga dul qaadayo, inta badan waxaa loo maraa amarro hadal ah oo afka laga yiri. 23di Febraayo 2016, isku daygii lagu xiri rabay Guddoomiyaha Golaha Isbedel-Doonka Siyaasadda Beelweynta Banaadiriga isagoo shir saxaafadeed qabanayay, ayaa ciidamada NISA waxay wariyeyaashii iyo shaqaalihii warbaahineed ee goobta ku sugnaa ku amreen inay tirtiraan waxyaabihii ay ku duubeen qalabkooda warbaahineed.

80. NISA waxay u muuqataa inay xirto, xabsigana dhigto shaqaalaha warbaahinta, albaabadana u laabto xarumaha warbaahinta qalabkoodana la wareegto marka warbaahintu tebiso warar mucaaradsan (lagu naqdinayo) Dowladda, sida musuqmaasuqa ama fashilka laga aaminsanyahay Dowladda. Tusaale ahaan, 3dii Janaayo 2015, Idaacadda Risaala ayaa tebisay warbixin ka hadleysay kiis cudurka Ebola oo la tuhmay, Idaacadaha Goobjoog iyo Sky FM waxay ka hadleen xaaladaha amni ee Dowladdu u aragto inay yihiin kuwo xasaasi ah, Telefishinka Universal isna wuxuu qabanqaabiyay dood-wadaag loo qabtay xubno baarlamaan oo ka doodayay musuqmaasuqa iyo saamaynta Itoobiya ku leedahay gudaha Soomaaliya.

81. Bishii Abriil 2015, Xafiiska Garyaqaanka Guud iyo kan Maxkamadda Gobolka Banaadir waxay muujiyeen rabitaankooda ku aaddan inay duraan (ka hor-yimaadaan) ku-tumashada NISA ay ku-tumanayso awoodda xafiiska, iyagoo iska diiday inay xukunno kale oo dheeri ah ku ridaan hawlwadeenada warbaahinta Shabelle ama inay idmaan in xabsiga lagu sii hayo inta kiisaskooda baaritaanku ku socdo. Iyadoo sidaas ay tahay, NISA waxay muujisay xoogaa iska-caabin ah, waxayna iska indha tirtay go'aanada ka soo baxay hay'adaha garsoorka, waxaana iska-caabinta NISA kamid ah inay diidday in qalabki ay ku celiso xarumahi warbaahineed iyo inay maxaabiistii xabsiga kusii heysay ogolaansho la'aan maxkamadeed, taas oo ka hor imaanaysa Xeerka Ciqaabta. 2dii April 2015, Wasiirka Warfaafinta ayaa isagoo qabanayay shir jaraa'id ayuu ugu baaqay NISA in iyagoo aan isaga soo wargelinin, aanay xirxirin wariyeyaasha, ama aanay hakad gelinin hawlaha xarumaha warbaahinta. Taasi waxay tusineysaa inay jiraan dadaallo lagu xakamaynayo ficilada sharci darrada ah ee NISA kula kacdo wariyeyaasha iyo xarumaha warbaahinta – wallow aanay muuqanin xiriiro muuqda oo ka dhexeeya Wasaaradda Warfaafinta iyo Hay'adda NISA, maadaama Hay'adda NISA iyo Xoogga Booliskuba ay hoos tagaan Wasaaradda Amniga Gudaha.

82. NISA ayaa 2dii bishii Sebtembar 2014 xayiraad ku soo rogtay warbaahinta oo ay ka codsatay in aanay baahinin dacaayadaha Al Shabaab iyo, gaar ahan, in wareysiyada xubnaha Al Shabaab codadkoda aanay hawada soo gelinin.[102] Agaasimaha Hay'adda NISA ayaa 3dii bishii Maajo 2015 amartay Warbaahinta Soomaaliyeed inay joojiyaan adeegsiga magaca "Al Shabaab" oo taa bedelkeedana ugu yeeraan "UGUS", oo ah xarfo Soomaali ah oo lasoo gaabiyay una taagan "Ururka Gumaadka Umadda Soomaaliyeed". NISA waxay sheegtay in ciddii amarkaas u hogaansami weyda tallaabo laga qaadayo. 4tii Maajo, Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa soo saartay isla amarkaas oo kale.[103] Falcelinti Al Shabaab waxay noqotay sidan: "Qofna xaq uma laha inuu na af-lagaadeeyo. Ciddii magacyo kale noogu yeerta waxaan siinaynaa jawaabta ay mudanyihiin."[104]

83. Xayiraadaha ay soo rogeyso NISA waxaa ka dhalanaya dhex-dhexaad la'aanta wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta, sidoo kalena waxay abuureysaa khatar soo wajihi karta kuwii u hogaansama maadaama Al Shabaab ka aaminayso inay u janjeeraan dhanka Dowladda. Guddoomiyaha Ururka Madaxabanaan ee Xarumaha Warbaahinta Soomaaliyeed ayaa 2dii bishii Sebtembar 2014 carrabka ku adkeeyay in amarka NISA uu khatar gelinayo nolosha wariyeyaasha iyo hawlwadeenada warbaahinta, wuxuuna ugu baaqay

102 Sarkaal sare oo ka tirsan NISA ee gobolka Banaadir ayaa 2dii Sebtembar 2014 wariyeyaal iyo agaasimeyaasha shirkadaha warbaahinta kula kulmay Hoteelka City Palace Hotel ee magaalada Mogadishu wuxuuna siiyay amar afka ah,in laga billaabo 2da Sebtembar, dhammaan shirkadaha warbaahinta aan loo ogolaan doonin inay tebiyaan wax borobagaandha ah oo Al Shabaab ay leedahay ama codadka xubnaha Al Shabaab. Kuwii kulanka ka qaybgalay waxaa laga mamnuucay inay duuban kulanka. Askarta NISA ayaa dabagal ku sameysay wariyeyaasha goobihii shaqadooda, waxayna ku celiyeen wixii kulanka ka dhacay waxayna caddeeyeen in qofkii amarka jebiya la qaban doono idaacaddana la xiri doono.

103 Mamnuucidda Dowladda Soomaaliya ee magaca Al Shabaab ee warbaahinta laga mamnuucay: http://www.bbc.com/news/world-africa-32580748

104 http://www.aljazeera.com/news/2015/05/somalia-bans-media-al-shabab-150504130216081.html

DFS inay baabi'iso/tuurto amarkaas. Iyadoo aan weli wax ka dhan ah wariyeyaasha iyo hawlwadeenada warbaahinta aan la arkin marka loo eego magacyada loogu yeero Al Shabaab xilliyada wararka la tebinayo, ayaa hadana cabsidu weli taagantahay.

84. Bishii Febraayo 2016, NISA waxay u adeegsatay warbaahinta, oo uu ka mid yahay Telefishinka Qaranka Soomaaliya, inay faafiso filimo dokumentari ah (toos loo duubay) oo ay ka muuqdeen dad lagu tuhunsanyahay inay yihiin Al Shabaab oo qiranaya fal-dembieedyadooda iyagoo ku jira xarunta NISA. Qiraalada lagu soo bandhigay telefishinka ayaa dhaliyay walaac xooggan: saxnimada qiraaladaas oo aan la heynin iyo in meesha ka maqanyihiin tallaabooyinkii lagama maarmaanka aha ee loo marayay hawlahaas, in qiraal uu noqdo cadeynta ugu muhiimsan ee loo cuskanayo eedeymaha loo soo-jeedinayo qofka fal-dembiyeedka loo heysto markii la geeyo maxkamadda, waxaase kasii horeysa in la is-weydiiyo awoodda ay yeelan karaan maxaabiis ku sugan xaalad *go'doon* ah (oo dad kale aanay la xiriiri karin), waxa ku dhici kara haddii ay diidaan inay qiraal sameeyaan iyo suurto-galnimada adeegsi jirdil si loogu khasbo inay sidaas yeelaan. Tusaale ahaan, Xasan Xanafi, wariye lagu eedeeyey inuu xiriir la lahaa Al Shabaab, wuxuu xabsiga NISA ku jiray 15 bilood isagoon maxkamad la soo taagin, ka-hor inta aanu ka soo muuqanin mid kamid ah filimada dokumentariga ah ee ka baxay Telefishinka 5tii Febraayo 2016, isagoo qiranaya inuu ku lug lahaa dilalka ugu yaraan afar wariye sanadihii 2008 iyo 2010.[105]

105 Maxkamadda Mileteriga ee Darajada Koowaad ee Soomaaliya ee magaalada Muqdisho ayaa 3dii Maarso 2016 Xasan Xanafi dil ku xukuntay ka dib markay ku heshay inuu galay dembiga ah inuu si toos ah ama si dadban ugu lug lahaa dilkii ugu yaraan shan wariye.

# IV. Nidaamka Cadaaladda iyo Xorriyadda Hadalka

85. Inkastoo ay jiraan dammaanad-qaadyo sharciyadeed, hadana maamuladu waxay u jeesteen doodo salka ku haya welwel amni ama dowladda oo khatar u gasho in la wiiqo, taasoo sabab looga dhigo in la yareeyo ilaalinta kuwa ugu muhimsan ee arrimaha ku hawlan, gaar ahaan kuwa ku jira Xeerka Habraaca Ciqaabta ee dammaanadaha habraaca caddaaladda. Isagoo waafaqsan sharciga caalamiga ah,[106] ayaa Dastuurka Federaalka ah wuxuu mamnuucayaa xarigga iyo xabsi gelinta aan fasaxa loo heysanin haddii aan qofka lagu qabanin isagoo fal-dembiyeedki faraha kula jira.[107] Sidoo kale, wuxuu mamnuucayaa xabsi gelinta sharci darrada ah, nooc kasta oo xadgudub ah, wuxuuna damaanad qaadayaa xaqqa qofku u leeyahay in dhakhso lagu wargeliyo sababta loo xiray ama xabsiga loo gelshay, xaqqa in qofka maxkamad lasoo istaajiyo 48 saacadood gudohood kadib marka la xiro,[108] iyo xaqqa qofku u leeyahay inuu helo qareen u dooda. Eedeysanayaasha laguma hayn karo goob xabsi oo aan sharci ahayn, waana inay helaan damaana qaadka ah in ay soo booqan karaan qoysaskooda, dhakhaatiirtooda caafimaad, iyo qareenadooda.

86. Nidaamka cadaaladdu waa inuu dowr muhiim ah ka cayaaraa sidii lagu xaqiijin lahaa ilaalinta xaqa xorriyadda, una xoojin lahaa ka-qaybgal si xor ah looga qaybgalo arrimaha dadweynaha, laguna xaqiijin lahaa geedi-socod doorasho oo furan. Iyadoo la ogsoonyahay kaalinta kor-joognimo ee garsoorku ku leeyahay xaqiijinta xaqa xorriyadda hadalka ee geedi-socodka doorashada, ayaa Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan horumarinta iyo ilaalinta xaqa xorriyadda aragtida iyo hadalka wuxuu ku nuuxnuuxsaday inay lagama maarmaan tahay in garsoorku uu ahaado "mid haysta madaxbanaani dhamaystiran haystana dhaqaale ku filan" si uu dowrkan si wax ku ool ah ugu guto.[109]

87. Dib ayaa loo unkay hay'adihii caddaaladda ee gobolka Banaadir , iyadoo maamulada goboladuna, sida Jubbaland iyo Koonfur Galbeed, dhowaan uun ay billaabeen dhismaha maxkamadohooda, Xafiisyada Xeer-ilaaliyeyaasha, iyo inay magacaabaan hawlwadeeno dhanka cadaaladda ah. Iyadoo goboladu ku kala duwanyihiin awoodda iyo tayada – tusaale ahaan, hay'adaha cadaaladda ee "Somaliland" iyo Puntland ay yihiin kuwo aad u dhisan – ayaa haddana waxaa si guud u liita kaabayaasha iyo tayada dadka.[110]

88. Sidoo kale, waxaa walaac xooggani ka jiraa madaxbanaanida nidaamka garsoorka. Qaab-samaynta sharci, heer federaal iyo heer dowlad-goboleedba, ma waafaqsana halbeegyada caalamiga ah; tusaale ahaan, qaabka magacaabista [jagooyinka] hay'adaha garsoorka. Hay'adaha garsoorka waxaa qaabeeyay siyaasadaha qabiilka ku dhisan oo weli ah midda ilaa iyo hadda hagaysa bulshada. Xaaladdan lagu jiro, garsoorayaasha waxaa laga filan karaa inay u eexdaan beelohooda oo go'aamadooda ku saleeyaan tixgelin siyaasadeed halkii ay u hiilin lahaayeen sharciga, taas oo wiiqaysa kalsoonida dadweynuhu ku qabaan hay'adaha cadaaladda. Hanaan kor-joognimo oo liita ama aan jirin darteed, ayaa waxaa baahay musuqmaasuq iyo anshax xumo. Garsoorayaasha cusub ee la magacaabo, ma qaataan tababarro hordhac ah, waxaana xaddidan tababarrada lagu dul qaato shaqada (on-the-job training). Waxaa intaas sii dheer, nidaamka cadaaladda Soomaaliya wuxuu iskugu dhafanyahay sharciga madaniga ah iyo sharciga guud/dhaqan, iyo weliba *xeerarka* u kala yaal beelaha iyo Shareecada. Garsoorayaashu marka ay xaalad go'aan ka gaarayan

106 ICCPR, qod. 9 iyo qod. 14.
107 Dastuurka Federaalka, qod. 25 (2) wuxuu qeexayaa in "Qofna aan la xiri karin, la baari karin, ama xabsi la dhigi karin, marka laga reebo haddii lagu qabto isagoo fal dembiyeed faraha kula jira ama lagu qabto waaran soo qabasho ee uu soo saaray garsoore awood u leh".
108 Dastuurka Federaalka, qod. 35 (2) "qof kasta oo la qabto ama xabsi loo taxaabo wuxuu xaq u leeyahay in si degdeg ah loogu wargeliyo sababta loo soo qabtay ama xabsiga loogu taxaabay looguuna sheego luuqad uu qofku garanayo" wuxuu kaloo caddeynayaa "qof kasta oo la soo qabto wuxuu xaq u leeyahay in la hor keeno maxkamad awood u leh muddo 48 saacadood gudahooda laga soo billaabo marka la soo qabtay."
109 A/HRC/26/30 p. 20.
110 Warbixinta Bangiga Adduunka, Dhaqaalaha Siyaasadda ee Caddaaladda ee Soomaaliya, Abriil 2016.

waxay culays kala kulmaan tixraaca sharci ee tirada badan.[111] Waxaa intaas lasii jirta, in aanay jirin qodobo sharci ah oo si gaar ah loogu badbaadinayo haweenka, taas oo fursad u siinaysa hanaanka dhaqanka inuu wiiqo xuquuqdi ay dumarku lahaayeen. Haweenku metelaad kuma laha hay'adaha garsoorka, mana jiro qaab-samayn sharci oo ku saabsan xadgudubka jinsiga ee Soomaaliya, taas oo haweenka ka hor istaageysa inay cadaalad helaan oo looga garnaqo fal-dembiyeedka noocaas oo kale ah.[112]

89. Kaabayaasha maxkamadaha oo aan dhamaystirnayn iyo maamulki maxkamadaha oo hooseeya ayaa sii adkeynaya in dadka la gaarsiiyo adeegyada cadaaladda. Waxaa socdo dadaallo lagu tababarayo garsoorayaal, laguna taageerayo in la dhiso Guddi Adeeg Garsoor oo u xilsaaran qorista, meel kale u bedelidda, anshax marinta iyo dallacsiinta garsoorayaasha, sidoo kalena xoojiya dib u hagaajinta sharciga. Si kastaba ha ahaatee, in la dhiso nidaam cadaalad oo madaxbanaan, la wada gaari karo, hufan oo lala xisaabtami karo waxay qaadanaysaa waqti, aad ayayna ugu adkaanaysaa garsoorku inuu muddo gaaban ku fuliyo hawsha loo igmaay. Iyadoo maanka lagu hayo doorashooyinka soo socda, ayaa waxaa muhiim ah in diiradda la saaro dhismaha tayada iyo awoodda garsoor ilaalinaya xuquuqda asaasiga ah, oo ay kamid tahay xaqqa xorriyadda hadalka. Sidoo kale, in la sameeyo hab ay ururada bulshada caalamiga ah iyo guddiga qaran ee xuquuqul insaanku kula socdaan hawsha ayaa ah mid horumarin doonta la-xisaabtanka hay'adaha garsoorka waxayna dhiiri-gelinaysaa in si xor ah looga qaybgalo arrimaha dadweynaha.

90. Iyadoo aanay ku koobnayn oo qura kiisaska ku saabsan xorriyadda hadalka, ayaa waxaa yar isla-xisaabtanka laga yeesho xadgudubyada iyo ku-takrifalka ka dhanka ah xuquuqul insaanka. Tusaale ahaan, bishii April 2016, qof waayeel ah oo bulshada sumcad ku dhex lahaa ayaa rag hubaysan ku dileen Muqdisho. Inta aan la dilin maalmo yar kahor ayuu meel fagaare ah ka sheegay sida uu uga walaacsanyahay amni darrada kusoo kordheysay deegaankiisa Dharkenley, taas oo keentay in hay'adihii amniga ee deegaanku ay kordhiyaan amniga deegaanka. Iyadoo aanay jirin cid sheegatay mas'uuliyadda weerarkaas, ayaa waxaa la tuhunsanyahay in Al Shabaab ay beegsatay sababo la xiriira fagaaraha uu ka hadlay. Bishii Juun 2016, qof rayid ah oo u ololeeyn jirtay arrimaha xuquuqda haweenka ayaa dad aan heybtooda la garan ay ku toogteen magalada Gaalkacyo ee gobolka Mudug. Waxaa aad loogu garanayay ololeheedi gobolka Mudug, waxayna aad u dhaleeceyn jirtay Al Shabaab, sidoo kale waxay kaalin muuqata ku lahayd dadaalada nabadda iyo dib-u-heshiisiinta. cid sheegatay majirto mas'uuliyadda dilkaas, eedeysanayaal loosoo xiray kiiskaasna waxaa lasii daayay isla maalintii lasoo xiray.

91. Laga soo billaabo bishii Janaayo 2015, 48 wariye, hawlwadeeno warbaahin, hawlwadeeno sare oo maareeya warbaahin oo laxiray ayaa 10 kaliya lasoo taagay maxkamad. Sagaal waxaa lagu xukumay xabsi iyo ciqaab adag,[113] halka 38 lasii daayay. 10ka maxkamadda lasoo taagay, mid kamid ah oo wariye ahaa ayaa toogasho lagu xukumay waxaana lagusoo oogay inuu Al Shabaab xiriir la lahaa uuna ku lug lahaa dilka wariyeyaal kale sanadihii 2014 iyo 2015. Xukunka toogashada ah ee lagu xukumay oo ay 26di Maarso 2016 xaqiijisay maxkamad sare oo ciidamada qalabka sida ay leeyihiin oo kutaal Muqdisho, ayaa waxaa cadeynta ugu weyn ee loo haayay ay ahayd video la duubay isagoo qiraal samaynaya waxaana video-ga soo sameeyay NISA oo xabsiga kusoo dhex diyaarisay, kadibna uu baahiyay Telefishinka Qaranka Soomaaliyeed. Eedeysanaha lama geynin maxkamad markaasi waxaana la toogtay oo rasaas lagu dilay 11ki April 2016.

111 *Xeer* waxaa qeexay Wasaaradda Caddaaladda inuu yahay: "xallinta khilaafaadka ee dhaqanka ah (TDR) nidaamka caddaaladda soo jireenka ah ee Soomaaliya. *Xeerka* waxaa loo aqoonsanyahay inuu yahay xeer anshax oo lagu xalliyo muranada laguna ilaaliyo nabadda u dhexeysa beelaha iyo jufooyinka. Taariikh ahaan iyo maantaba, *Xeerku* waa haanka ugu horeeya ee loo adeegsado xallinta khilaafaadka; aad baa loogu kalsoonyahay laakiin waxaa la aqoonsanyahay inuu leeyahay dulduleello iyo inuu u baahanyahay in la xoojiyo."

112 Xeerka Ciqaabta 1962 wuxuu dembi ka dhigaya kufsiga laakiin wuxuu u arkaa inuu yahay dembi ka dhan ah anshaxa, ee ma aha dembi ka dhan ah dhibanaha. Wuxuu u baahanyahay in dib u habayn lagu sameeyo si wax looga qabto noocyada kala duwan ee rabshadaha galmada, iyo in la waafajiyo halbeegyada caalamiga ee xuquuqul insaanka.

113 Maxkamadda Gobolka Togdheer ee magaalada Burco ayaa 28kii Maarso 2016 ku xukuntay laba saxafi oo si madaxbanaan u shaqeysta inay bixiyaan ganaax dhan hal million oo "Somaliland" shillin ah (in ku dhow USD 145) midkiiba, waxaana lagu eedeeyay inay "si sharci darra ah u isticmaaleen jirka dad dhintay". Saxafiyiinta waxaa la soo daayay markay ganaaxa bixiyeen ka dib markii ay xabsiga ku jireen 10 maalmood.

92. Waxaa walaac ka jiraa sida Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud u maareeyo kiisaska laxiriira wariyeyaasha iyo hawlwadeenada warbaahinta. Bishii Oktoober 2015, labo wariye ayaa la xiray waxaana lagu xiray amar kasoo baxay Wasiir Kuxigeenka Warfaafinta, kadib markii dood-wadaag a telefishinka toos ugasii daayeen, waxaana la geeyay Xafiiska Xeer-ilaaliyaha oo u fasaxay NISA inay inay xabsiga kusii hayso 21 maalmood arrimo baaritaan awgood, iyagoo aan la horgeynin garsoore sida sharcigu qabo.[114]

93. “Somaliland”, isku-dayga maxkamaduhu isku dayeen inay xakameeyaan ku-takrifalka awoodeed ee ay ku kacayaan madaxda dowladda ayaa la kulma caqabad. Bishii April 2015, Guuleed Jaamac, Guddoomiyaha Xarunta Xuquuqul Insaanka ayaa la xiray waxaana Warbixintii Sanadlaha ahayd sanadki 2014 xaruntiisu soo saartay, warbixintaas oo iftiimisay walaaca ka jira arrimaha xuquuqul ee la xiriira booliska iyo hay’adaha garsoorka, iyo weliba wareysigii uu siiyay idaacadda BBC bishii April 2016 oo uu uga hadlay isla arrimahaas, kuna qaadaa-dhigay ciqaabta dilka iyo arrimo kale oo walaac leh. 19ki April, markii ururada bulshada ah iyo ururo/shakhsiyaad caalami ah ay culeys saareen kadib, ayaa Maxkamadda Gobolka Hargeysa waxay xukuntay in lasii daayo Guuled Jaamac. Xukunnadii dacwad-oogaha ee uu u cuskaday XeerkaNidaamka Ciqaabta Dembiyada waxaa kamid ahaa oo loo sababeeyay dacaayad ka-dhan ah Dowladda, eedeymo aan sal iyo raad lahayn, cabsi-gelin bulsho, iyo daabacaadda ama faafinta warar been ah oo saamayn kara kala-dambaynta guud. Taasi waxay keentay in Maxkamadda Racfaanka ay hakiso damiinkii ay bixisay maxkamadda hoose. Mudane Guuleed waxaa loo diiday inay soo booqdaan qoyskiisa, asaxaabtiisa, xubnaha Xarunta Xuquuqul Insaanka iyo ururada bulshada rayidka ah, Garyaqaanka Guudna wuxuu amar ku bixiyay in lasoo xiro qof kasta oo isku daya inuu soo booqdo. Ugu dambeytii, kiiskaas waxa daaqadda ka tuurtay Maxkamadda Gobolka Hargeysa 26ki Agosto 2015.

94. Mowduuca ama oraahda sida joogtada ah uga muuqda Cutubyada IV iyo V waa in hay’adaha amniga iyo kuwa garsoorkuba ay sabab ka dhigtaan kuna celceliyaan “ilaalinta amniga qaran iyo kala-dambaynta guud.” Inkastoo halista ku wajahan amniga qaran ay tahay mid muuqato, hadana waxyaabihi lagu heshiiyay ee la filanayay ee ku saabsanaa xaqqa xorriyadda hadalka ayaa ah kuwo aad u hooseeya. Waxa aad muhiim u ah in waxyaabahas la filanayay aan loo adeegsanin hab khilaafsan ballan-qaadki Dowladdu ballan-qaadday u-hogaansanaanta wajjibaadka saran ee caalamiga ah, ayna saamaxdo/fududeyso in si xor ah looga wadahadlo afkaaraha. Run ahaanti, warbixintan waxay diiwaan-gelisay isku-dayo soo noq-noqday oo lagu caburinayo khudbooyin/hadal-soo-jeedin siyaasadeed, waxaana caburintooda ay xubnaha Dowladdu qiil uga dhigteen muhiimadda ilaalinta amniga qaranka, taasina waxay caddeyn u tahay xaaladda liidata ee ee uu ku-suganyahay xaqqa xorriyadda hadalka ee Soomaaliya.

95. DFS iyo maamulada kaleba waa in aanay qaadin tallaabooyin si aan loo baahnayn ama aan isu-dheeli-tirnayn loogu faragelinayo xorriyadda hadalka, hadii loo marayo sharci, nidaamyo siyaasadeed, ama dariiq aan sharci ahayn intaba. Intaas waxaa sii dheer, waa in fiiro gaar ah loo yeeshaa xayiraadaha lagu hakinayo/joojinayo soo-bandhigidda aragtiyada wax kusoo biirinaya doodaha dadweynaha iyo kuwa siyaasadda, maadaama ay kusii socoto tubtii doorashooyinka ku qotoma qof-iyo-codkiis sanadka 2020, taas oo u baahnaan doonta wadahadal buuxa oo dhexmara dadweynaha. Qiimaha ay leedahay in si faragelin lahayn loosoo bandhigo aragtiyada waa qiimo gaar ah oo aad u weyn marka la fiiriyo cadaaladda hadda jirta maadaama ay Soomaaliya dadaal ugu jirto inay kasoo kabsato sanado colaado ah, ayna samaysato dowlad demoqoraadi ah oo loo wada-dhanyahay.

114 Waxaa muuqata inuu kala duwanaansho ka jiray Xafiiska Xeer-ilaaliya Guud oo la xiriiray waxa la sameyn lahaa, go’aankana waxaa la qaatay mar Xeer-ilaaliyaha Guud uu dalka ka maqanyahay.

# V. Warbaahinta ka jirta Soomaaliya

96. Soomaaliya waxaa ka jira dhaqan warbaahin oo firfircoon, oo leh in ka badan 90 hay'ad warbaahineed – idaacado, telefishino, iyo wargeysyada la daabaco – oo si firfircoon dalka uga hawlgala, iyo tiro aan la soo koobi karin oo ah bogagga internetka, tiro sii kordheysa oo ah dad ku qora bogagga internetka iyo warbaahinta bulshada oo kaalin muhiim ah ka cayaara in xogta la wadaago iyo in ra'yiga la dhiibto.[115] Hadda waxaa dalka oo dhan ka jira 58 idaacado, 28 wargeys iyo 12 telefishin oo Af Soomaali ku hadla, oo ay ka midyihiin shan ka dhisan Boqortooyada Midowday ee Ingiriiska. Idaacaduhu waa warbaahinta sida ugu baaxadda badan loo helo oo ah habka koowaad ee xogta la isku dhaafsado. Hase ahaatee, kala duwanaansho muuqda ayaa ka jira sida juqraafi ahaan gobollada ugu tebiyaan, oo laba idaacadood oo keliya ayaa dalkoo dhan u tebiya (BBC iyo VOA). Gobolka Banaadir, Jubbaland, Koonfur Galbeed, Galmudug iyo Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe waxaa ka jira 42 idaacadood, toddoba telefishin, toddoba wargeys, iyo tiro badan oo bogag internetka wararka ku qora; halka Puntland ay leedahay 15 idaacadood, laba telefishin, iyo shan shirkado wargeys, "Somaliland"na waxay leedahay hal idaacad oo ay dowladdu leedahay, shan telefishin, iyo 16 shirkado wargeys. Khariidadda tebinta warbaahinta waxaa ugu badan idaacadaha. Idaacadaha 58da ah, waxaa ka mid ah 53 oo madaxbanaan, afar ay dowladdu leedahay, halna waxaa maamula Al-Shabaab.[116] Dowladdu waxay leedahay afar ka mid ah 12ka telefishin iyo mid ka mid ah 28ka shirkadaha wargeys. Inta ugu badan warbaahintu waxay ku hawlgashaa Af Soomaali, iyagoo qaar ka mid ah barnaamijyadu ay ku baxaan Af Ingiriis, Carabi iyo Sawaaxili.

97. Tan iyo sannadkii 2002, ururrada wariyeyaasha, shaqaalaha warbaahinta iyo madbacadaha ayaa laga dhisay Soomaaliya iyo "Somaliland" oo dhan. Waxay si firfircooni ah ugu ololeynayeen xuquuqda iyo xoriyada warbaahinta, waxayna caddeynayeen weerarrada iyo xadgudubyada ka dhanka ah wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta. Waxay sidoo kale u ololeynayeen sare u qaadidda xirfadda saxaafadda.[117] Kuwa ugu waaweyn waxaa ka mid ah NUSOJ, oo la asaasay bishii Agoosto 2002, oo leh in ka badan 500 oo xubnood; Ururka Warbaahinta Puntland (MAP); Ururka Saxafiyiinta Jubbaland ee Madaxabanaan, oo la asaasay sannadkii 2004 lehna 45 xubnood; Ururka Saxafiyiinta Somaliland (SOLJA), oo la asaasay sannadkii 2003 kana kooban 283 xubnood.[118] Inkastoo ururrada warbaahintu ay kaalin muhim ah cayaareen, haddana isqabqabsi joogta ah iyo kala qaybsanaan ka dhex jirta mid ka mid ah ururrada ugu waaweyn ayaa weli caqabad weyn ku ah inay si wadajir ah ugu hawlgalaan xuquuqdooda iyo xorriyadahooda.[119]

98. Ma jiro hab sugan oo lagu cabiro mushaarka ay qaataan shaqaalaha warbaahinta gaarka loo leeyahay, oo guud ahaan mushaarku wuxuu ku xiranyahay sannadaha waayo aragnimada.[120] Hase ahaatee, inta badan wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahintu waxay helaan mushaar aad u yar ama waxba ma helaan gebi ahaanba. Kuwo badan oo ka mid ah wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta ayaa adeegsada

115 Warbixinta AU/UN IST (2014).
116 Al Shabaab waxay leeyihiin hal idaacad oo ka hawlgasha goobaha gacantooda ku jirta, Radio Andalus, iyo weliba saddex websiteyo www.radioiyoalus24.com, www.radioalfurqan.com www.somalimemo.com,
117 Ururrada warbaahinta ka jira Soomaaliya ma laha diiwaan lagu qoro shahaadooyinka jaamacadeed ee xubnahooda. Jaamacadda Muqdisho, Jaamacadda Plasma iyo Jaamacadda Geeska Afrika ayaa bixiya shahaadooyin saxaafadda ah oo lagu dhigto waqti buuxa. Jaamacadaha qaar, sida qaar ku yalla "Somaliland", ayaa bixiya koorsooyin gaagaaban ee saxaafadda ah.
118 Ururro dheeraad ah oo muhim ah waxaa ka mid ah Ururka Jamciyadda Qoraayaasha Saxafiyiinta Somaliland (SSWJ), oo leh 30 xubnood, Ururka Haweenka Saxaafadda (WIJA), ee la asaasay sannadkii 2006 iyo Ururka Saxafiyiinta Koonfur Galbeed ee sannadkii 2014 lagu dhisay magaalada Baydhabo oo ay ku bahoobeen 108 saxafi.
119 Eeg sharaxa haamishka 42 (ka doodaya kala qaybsanaanta ka dhex jirta bahda warbaahinta).
120 Celceliska mushaarka bishii uu qaato saxafiga cusub ee u shaqeeya telefishin ama idaacad waa u dhowdahay USD 50, midka heerka dhexe ee xirfadda joogana wuxuu qaataa USD 150/300, saxafiga weyn iyo soo saaraya waxaa laga yaabaa inay qaataan ilaa iyo USD 500. Mishaarkuna si joogta ah laguma bixiyo. Haddii la isbarbardhigo, mishaarka askari boolis ah waa USD 100, macallinka dugsiga hoose wuxuu qaataa USD 70, waaxda ururrada aan dowliga ahayn ama NGO, shaqaalaha yaryar waxay qaataan USD 350 USD shaqaalaha waaweyna USD 800.

dhaqanka qaadashada lacag khidmad ah (oo loo yaqaano *Qabax* am*a Sharuur)* si ay dakhligooda ugu kabaan, dhacdooyinka ama munaasabadaha sidaas baa lagu tebiyaa. Siyaasiyiintu waxay lacagta khidmadda sharuurka u bixiyaan si ay u xaqiijiyaan in shirkooda jaraa'id ay tebiyaan tiro aad u badan oo ka socota hay'adaha warbaahinta. Waxaan shaki ku jirin in arrintan ay saameynayso dhexdhexaadnimada wariyeyaasha marka la eego waxa iyo sida ay u tebiyaan.

99. Sannadkii 2015kii, Soomaaliya waxay kaalinta dalka ugu xun ka gashay liiska La Xisaabtan La'aanta Adduunka, oo ah liis uu soo ururiyo Guddiga Ilaalinta Saxafiyiinta laguna qoro xogta isla xisaabtan la'aanta ku aaddan dembiyada ka dhanka ah wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta.[121] Liiskan wuxuu waafaqsanyahay waxa ay UNSOM ka ogaatay dalka gudihiisa. Laga soo billaabo bishii Janaayo 2014 iyo Luuliyo 2016, UNSOM waxay diiwaangelisay 120 kiis dacwad oo ah xabsi iyo xarig aan loo meeldayin oo la iska xiro saxafiyiinta iyo shaqaalaha warbaahinta, milkiileyaasha hay'adaha warbaahinta iyo madbacadaha: 60 waxay ka dhaceen "Somaliland" 60na waxay ka dhaceen Soomaaliya. Muddada xabsigu waxay u dhexeysay 24 saacadood ilaa dhowr bilood, iyagoon wax eedo ah lagu soo oogin. Inta badan, boolisku waxay furaan galka dacwadda waxaana dhacaysa gorgortan u dhexeeya saxafiyiinta iyo shaqaalaha warbaahinta iyo mas'uuliyiinta; markaa ka dibna inta badan dacwadahaas si rasmi ah ayaa loo xirayaa, waxaana la sii deynayaa saxafiyiinta iyo shaqaalaha warbaahinta.[122] Dhacdooyinka kale waxaa ka mid ah weerarrada lagu qaado iyo xayiraadyada la saaro idaacado iyo telefishino, laalidda wwararka bogagga internetka ku saleysan, iyo la wareegidda wargeysyada.

100. Tirada dhacdooyinka intaa leeg waxay saxafiyiinta iyo shaqaalaha warbaahinta u sawirayaan jawi colaadeed, taasoo wax u dhimaysa in lagu naalloodo xorriyadda hadalka. Marka la eego tirakoobyada, kuwa geysta dhammaan noocyada xadgudubyada inta badan waa ciidamada amniga ka tirsan DFS iyo Dowlad Goboleedyada dhismaya, sida Ciidamada Amniga Puntland, Booliska Puntland iyo Ilaalada Madaxtooyada, Wasaaradda Amniga Puntland, iyo weliba sidoo kale kuwo ka socda sirdoonka iyo/ama hay'adaha amniga sida NISA, Amniga Sirdoonka Puntland, iyo Ciidanka Booliska "Somaliland". Waxaa sidoo kale la soo sheegay ku takrifal awood ay sameeyaan xafiisyada fulinta, tusaale ahaan, Xafiisyada Madaxweynaha, Wasaaradda Warfaafinta, iyo Xeer-ilaaliyaha Guud ee Puntland iyo "Somaliland". Kuwo kale oo dheeraad ah oo iyana tacaddiyada geysta waxaa ka mid ah Al-Shabaab iyo kooxaha iyo shakhsiyaadka kale ee hubaysan.

101. Inkastoo xadgudubyada sida dilalka, garaacidda, kadeedidda, xabsida aan loo aaboyeelin iyo xarigga sharci darrada ah, caddaalad marin la'aanta ama maxkamadeyn caadil ah la'aanta iyo damaanad la'aanta iyo xiridda hay'adaha warbaahinta ay guud ahaan helaan tebin ballaaran ee warbaahinta ayna si guud iyo si gaar ahba u soo sheegaan wariyeyaasha, shaqaalaha warbaahinta, ururrada warbaahinta iyo difaacayaasha xuquuqul insaanka, haddana hay'adaha dowladdu wax fiican kama qabtaan si ay baaritaan ugu sameeyaan kiisaska una maxkamadeeyaan kuwa tacaddiyada geysta. Balse, sida caadada ah dadka la soo qabto waa la sii daayaa ka dib marka ay dood adag dhexmarto mas'uuliyiinta Dowladda, odeyaasha beelaha, ama beesha caalamka. Isla xisaabtan dhab ah waxaa la gaari karaa oo keliya haddii ay jirto in si nidaamsan oo rasmi ah loola tacaalo la xisaabtan la'aanta oo la xaqiijiyo in baaritaan waxtar leh iyo maxkamadayn ay dhacaan, ciqaabta si buuxda loogu fuliyo.

121 https://cpj.org/reports/2015/10/impunity-index-getting-away-with-murder.php#index.

122 Iyadoo ku saleysan diiwaanada uu hayo, UNSOM wuxuu hay'adaha la soo qaadaa kiisaska shakhsiyaadka ama kiisadka taxanaha ah, inta badana waxaa diiradda la saaray welwelka laga qabo habraaca caddaaladda. Haddii wax dhaqaaqa la waayo, warsaxaafadeed ayaa la soo saaraa. Tusaale ahaan, UNSOM wuxuu 4tii Oktoobar 2015 soo saaray warsaxaafadeed ka dib markii qasab lagu xiray xafiisyada Telefishinka Universal TV, 2dii Oktoobar 2015, xabsigana la dhigay laba ka mid ah wariyeyaashiisa. Kani iyo olole heer sare ah waxaa ka dhashay in labada wariye la sii daayo Stuudiyowga Telefishinka Universal TV ee magaalada Muqdishona hawlihiisa dib u billowdo sagaal maalmood ka dib markii ay NISA xirtay. UNSOM sidoo kale wuxuu soo saaray warsaxaafadeed 24kii Nofembar 2014, ka dib markii la xiray wariye ka hawlgala magaalada Garoowe oo sabab la'aan loo soo qabtay xabsigana loogu taxaabay. Wuxuu la shaqeynayay Telefishinka Somali Channel TV, oo Wasaaradda Warfaafintu sabab la'aan u hakisay. Ka dib olole xoog badan oo ay qaadeen UNSOM iyo kuwo kale, waxaa la soo saaray Amar Madaxweyne oo wariyaha lagu soo daayay 29kii Nofembar 2015. Ergeyga Garka ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan Soomaaliya ayaa sidoo kale si joogta ah walaaca la xiriira tacaddiyada xorriyadda hadalka ugala hadlay madaxda heerka sare ee Soomaaliya, Puntland iyo "Somaliland".

102. Weerarro cusub oo isdaba socda oo lagu qaaday wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta ayaa soo baxay dabayaaqadii sannadkii 2015 iyadoo kooxo wax weerara oo aan haybtooda la garanayn ay jir ahaan u weerareen wariyeyaasha, gaar ahaan kuwa joogay "Somaliland" iyo Puntland. Weerarrada caynkan ah oo ka dhacay "Somaliland" waxaa ka mid ahaa so qabashada iyo xarigga aan loo aaboyeelin ee lagu sameeyo wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, sida caadada ahna waxay taasi jawaab u tahay warbixino ama arrimo ay iyagu tebiyeen. Nooca cusub ee xadgudubyada sii kordhaya ee la soo sheegay waxay u muuqdaan inay la xiriiraan xaaladda siyaasadeed ee hadda jirta ee ku aaddan diyaargarowga loogu jiro doorashooyinka Baarlamaanka iyo kuwa Madaxweynaha ee "Somaliland" oo dhici doona sannadka 2017.

## 1. WARBAAHINTA KA JIRTA GOBOLKA BANAADIR, JUBBALAND, KOONFUR GALBEED IYO GALMUDUG

103. Kow iyo toban idaacado madaxbanaan oo ka jiray Gobolka Banaadir, Jubbaland, iyo Galmudug ayaa si ku meelgaar ah loo xiray, sannadihii 2014 (afar), 2015 (shan), iyo 2016 (labo). Lix jeer ayaa la xiray shan idaacadood oo ka shaqeeynanyay Muqdisho (mid ayaa laba jeer la xiray) iyadoo sedex ka mid ahi (Shabeelle, Risala, iyo Sky) ay  xirtay NISA amar maxkamadeed la'aantii.

104. DFS ayaa 2dii Oktoobar 2015 magaalada Muqdisho ku hakisay Telefishinka Universal TV ee saldhigiisu yahay dalka Ingiriiska.[123] Wasaaradda Warfaafinta ee Maamulka Jubbaland ayaa 23kii Agoosto 2015 soo saaray warqad mamnuuceysa hawlgalka Telefishinka Universal TV ee Jubbaland markaa ka dibna ku amartay wariyaha Telefishinka Universal TV ee magaalada Kismaayo inuu joojiyo inuu ka soo warramo sababo aan la shaacin awgood. Waxaa markii dambe la ogaaday in mamnuucidda sabab looga dhigay in telefishinku uu hore u tebiyay xog aan sax ahayn muddo laba sanno ah iyo inuusan raacin halbeegyada anshaxa saxafinimo.[124] Tan iyo sannadkii 2013kii, xaaladda amaanka ka jirta magaalada Kismaayo ayaa si tartiib tartiib ah u soo hagaagtay taasoo u saamaxday warbaahinta inay hawlgalaan, inkastoo ku dhowaad boqolkiiba 40 ka mid ah Jubbaland ay gacanta ku hayso kooxda Al Shabaab.

105. Muddada warbixintu eegayso gudaheeda, saddex wariye iyo laba qof oo ka mid ah ehellada mid ka mid ah wariyeyaasha ayaa lagu dilay Maamulka Ku Meelgaarka ah ee Koonfur Galbeed (ISWA), saddex kalena waxaa soo gaaray dhaawacyo markii weerar lala beegsaday, oo ay ka mid ahaayeen weerarro ay soo qaadeen ismiidaamiyeyaal. Intaa ka sokow, waxaa la soo sheegay xarig, garaacid halis ah iyo cagajugleyn.

106. Maamulka Ku Meelgaarka ah ee Galmudug (GIA) wuxuu gacanta ku hayaa oo keliya qayb ka mid ah dhulkiisa, iyadoo degaanada qaar ay gacanta ku hayaan kooxo ay ishayaan, oo ay ka midyihiin Al Shabaab iyo Ahlu Sunna Wal Jamaaca (ASWJ). Sannadkii 2015, ASWJ olole qabqabasho iyo xirxirid kula kacday warbaahinta degmooyinka Dhuesamareeb iyo Guriceel, oo lagu xiray laba idaacadood oo FM ahaa (markii dambe dib loo furay wadaxaajood ka dib), waxaa si u aabayeelid la'aan ah xabsiga loogu taxaabay wariyeyaal, waxaana la saaray faafreeb. ASWJ waxay ku doodday in idaacadahan la xiray, shan wariyena la qabtay oo saddex maalmood xabsiga lagu hayay, waayo waxay raaci waayeen amarkooda oo ahaa inaan la tebin warar iyo barnaamijyo ku saabsan DFS iyo shirka Cadaado ee maamul u sameynta GIA ee bartamaha Soomaaliya.

107. Wasiirrada Federaalka ee Amniga, Warfaafinta iyo Boostada iyo Isgaarsiinta iyo Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa bishii Febraayo 2016 magaalada Muqdisho saddex kula yeeshay Shirkadaha Bixiya Adeegga Internetka (ISPs). Tani waxay ka dambeysay amarkii Xeer-ilaaliyaha Guud 8dii bishii Nofembar 2015 ee uu ku faray Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta inay xannibto 35 bog internet oo Dowladda dhalleeceeyay, isagoo ku andacooday inay khatar ku yihiin amniga qaranka markay daabaceen "borobagaandha" lid ku ah Dowladda

123 *eeg* faq. 128 (ee la xiriirta xiriddiisa ee "Somaliland").
124 23kii Agoosto 2015.

ama uma hogaansamin “anshaxa saxaafadda”. Xeer-ilaaliye ka tirsan Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa 9kii bishii Nofembar 2015 warbaahinta u sheegay in Garyaqaanka Guud uusan asaas sharci ama awood u lahayn inuu soo saaro amarkaas oo kale.

108. Shirkadaha Bixiya Adeegga Internetka (ISPs) ayaa billowgii iska diiday amarka Xeer-ilaaliyaha Guud laakiin way u hogaansameen ka dib markuu uga digay haddii ay u hogaansami waayaan loo arki doono inay galeen khiyaano qaran. Waxaa la xiray qaar ka mid ah mas’uuliyiinta shirkadaha ISPs waxaana la soo daayay 24 saacadood ka dib markay ballanqaadeen inay amarka u hogaansamayaan. Bishii Febraayo 2016 shirkadaha ISPs waxay xannibeen 29 ka mid ah 35ka bog internet laakiin waxay diideen inay xannibaan lix bog internet oo xiriir la leh Al-Shabaab, waayo hay’aduhu ma dammaanad qaadi karin amnigooda haddii ay la kulmaan tallaabooyin aargoosi ah.

109. Inta ugu badan 29ka bog internet ee la xiray waxaa leh xubno ka tirsan Soomaalida qurbajoogta ah ee ku nool dalka Holand waxayna ka soo horjeedeen madaxda qaranka iyo tallaabooyinka DFS. Xiridda bogagga internetka waa xaddidaad halis ah oo lagu sameeyay xorriyadda hadalka, oo sharciga caalamiga ee xuquuqul insaanku ogolaanayo oo keliya haddii uu sharci faro ama lagu ilaalinayo mid ka mid ah sababaha la ogolyahay, oo ayna tahay ka dib marka ay maxkamadi sameyso falanqeyn la xiriirta lagama maarmaanimo iyo isku dheellitirnaan. Marka la eego xogta la hayo, shuruudahan lagama soo bixin, sidaa darteed, xannibaadda bogagga internetka waa xadgudub lagu sameeyay xorriyadda hadalka.

## 2. WARBAAHINTA KA JIRTA PUNTLAND

110. Puntland waxaa ka shaqeeya shan iyo toban idaacadood oo maxalli ah, laba telefishin, iyo afar wargeys oo ka hawlgala gobolka oo dhan. Ururka Warbaahinta Puntland waa ururka ugu weyn ee si firfircoon ugu hawlan ilaalinta iyo horumarinta xorriyadda hadalka iyo xorriyadda wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta.

111. Sharciga Warbaahinta ee 2014 ayaa la ansaxiyay inkastoo uu welwel ka muujiyay Ururka Warbaahinta Puntland, gaar ahaan marka la eego awoodaha faafreebka ee la siiyay hay’ado Dowladeed oo aan la cayimin oo “khuseeya” oo aan la siinin maxkamad, kala caddeyn la’aan la xiriirta xogta qarsoodiga ah, iyo ogolaanshaha saxafiyiinta ee ay bixiso Wasaaradda Warfaafinta.

112. Sharciga Warbaahintu wuxuu qorayaa in la dhiso Guddiga Sare ee Warbaahinta si uu u maareeyo hawlaha warbaahinta una “dammaanad qaado xorriyadda warbaahinta”, waana la dhisay. Wakiillada Guddigu waa inay ka kala socdaan Wasaaradda Warfaafinta, warbaahinta iyo bulshada rayidka, waxayna awood uu yeelanayaan in loo soo gudbiyo cabashooyinka dadweynaha ee ka dhanka ah warbaahinta iyo inay khilaafaadka ku xalliyaan dhexdhexaadin. Sharcigu wuxuu qorayaa in go’aanada uu Guddiga Warbaahintu gaaro rafcaan looga qaadan karo “maxkamad awood sharciyeed u leh”, isagoon kala caddeynin maxkamadda ay tahay. Hanaanka maaliyadeed iyo soo xulidda xubnaha ayaa sidoo kale gacanta ugu jira Wasaaradda Warfaafinta.[125]

113. Puntland ayaa sannadkii 2014 dhistay hanaanka kormeerka xuquuqul insaanka ee dastuurka lagu dammaanad qaaday, Xafiiska Puntland ee Ilaalinta iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka Puntland oo uu madax ka yahay Difaacaha Xuquuqul Insaanka (OHRD).[126] Xafiiska OHRD wuu madaxbanaan yahay, wuxuuna leeyahay kormeer Baarlamaan, wuxuuna leeyahay waajib xileed oo ballaaran oo uu kaga hortago, ilaaliyo, kuna horumariyo xuquuqul insaanka Puntland, oo ay ka midyihiin in loo soo gudbiyo

125 Sharciga Warbaahinta Puntland, qod. 22, wuxuu qeexayaa in loo baahanyahay in Guddiga Warbaahinta dhaqaale looga qoondeeyo miisaaniyadda Wasaaradda Warfaafinta.

126 Dastuurka Puntland, qod. 116; qod. 118, ee la xiriira awoodaha iyo mas’uuliyadaja xafiiska OHRD ay ku qoranyihiin qod. 13 iyo 14 ee Xeerka Difaacayaasha Xuquuqul Insaanka ee 2011. Xafiiska OHRD waxaa si rasmi ah loo daahfuray bishii Maarso 2015.

cabashooyin, sameeyo baaritaan iyo wacyigelin, soona saaro warbixin sannadle ah, oo ay ka midtahay xorriyadda hadalka. Xafiiska OHRD wuxuu bishii Abriil 2015 soo saaray Warbixinta Sannadlaha ah ee Xuquuqul Insaanka.

114. Laga soo billaabo bishii Oktoobar 2014 ilaa bishii Luuliyo 2016, UNSOM wuxuu diiwaangeliyay tiro xadgudubyo halis ah oo ka dhan ah xorriyadda hadalka eek a dhacday Puntland, oo ay ka mid yihiin xabsi iyo xirid aan loo aabayeelin, kadeedid iyo cagajugleyn lagula kaco wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta, weerarrada ay boolisku ku qaadaan idaacadaha, mamnuucidda idaacadaha, bogagga internetka iyo telefishinnada, iyo la wareegidda wargeysyada. Waxaa la xiray wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta iyada oo aan la haynin waaran soo xirid ah mar dambena la sii daayay iyagoon dacwad lagu soo oogin. Tallaabooyinkan waxay sida caadiga ah daba socdeen warbixinno ay warbaahintu ka tebisay arrrimaha dalka, oo ay ka midyihiin dhacdooyinka dhaqaalaha, amniga iyo siyaasadda, iyo weliba doodaha ku saabsan dadka barakacayaasha ah, kuwa soo noqday, ururinta canshuuraha, ama tebinta barnaamijyada qaranka Soomaaliyeed.

115. UNSOM waxay diiwaangelisay shan kiis oo ah weerarro jirka ah oo lagu qaaday wariyeyaal jooga Puntland, oo uu ka mid yahay mid la dilay. Wariye u shaqeeya Idaacadda Radio Daljir ee dalka gudihiisa ku saleysan iyo Telefishinka Horncable TV ee Ingiriiska ka dhisan ayaa 18kii bishii Nofembar 2014 kooxo aan haybtooda la garanayn ku dileen Waqooyiga magaalada Gaalkacyo. Afar dhacdo ayaa dhacay billowgii sannadkii 2015; bamba gacmeed ayaa 16kii bishii Janaayo lagu soo tuuray dhismaha Idaacadda Radio Gaalkacyo; 17kii bishii Febraayo ayaa nin hubaysan toogtay oo dhaawac u geystay wariye iskiis u shaqeysta; 15kii bishii Maajo, gaari sida laba wariye oo ka socda Telefishinka Puntland TV ee ay Dowladu leedahay ayaa lagu rasaaseeyay magaalada Garoowe; 20kii bishii Luuliyona, saddex wariye iyo shaqaale warbaahin ayaa la sheegay inay weerareen si xuna ula dhaqmeen ilaalada Madaxtooyada Puntland oo u diidan inay tebiyaan ambabaxidda Ra'iisal Wasaaraha Federaalka Cumar Cabdirashiid Cali Sharmaarke. Dadkii lagu tuhmay laba ka mid ah dhacdooyinkaas ayaa loo soo qabtay, isagoo hal eedeysane la sii daayay ka hor intaan maxkamad la hor geynin.

116. Muddada ay warbixintu ka hadlayso, saraakiisha Puntland qaarkood ayaa adeegsaday habraaca sharciga si ay u cabburiyaan xorriyadda hadalka. Xubnaha dowladda, oo ay ka midyihiin Wasiir Ku-Xigeenka Arrimaha Gudaha iyo Wasiirka Warfaafinta, ayaa amar ku bixiyay in la xiro shirkado warbaahin ama ka codsaday Xafiiska Garyaqaanka Guud inuu cabasho ka gudbiyo warbaahintaas. Wasiir Ku-Xigeenka Arrimaha Gudaha ayaa 19kii bishii Maajo 2015 soo saaray amar qoraal ah oo lagu xirayo Telefishinka Qaranka Soomaaliyeed (SNTV) ee Puntland, isagoo SNTV ku eedeynaya inuu xog been abuur ah ka faafiyay sida ay dowladdu uga jawaabtay xaaladda qaxootiga soo laabtay.

117. Sidoo kale, Wasiirka Warfaafinta ayaa dhowr jeer soo farageliyay si uu u xayiro warbaahinta. Wuxuu 5tii bishii Agoosto 2015 Garyaqaanka Guud ka codsaday inuu gudbiyo cabasho ka dhan ah Idaacadda Sahan ee Garoowe, waxaana haystay inay faafisay "maqaal aflagaaddo ku ah hay'adaha Puntland", sida muuqatana waxaa lagu haystay inay tebin weysay sannad guuradii 17aad ee Dowlad Goboleedka Puntland. Taariikhdu markay ahayd 17kii bishii Sebtembar 2015, wuxuu warqad u diray dhammaan idaacadaha FM-ka ee sida gaarka loo leeyahay ee Puntland, kuna amray inay joojiyaan barnaamijyada Idaacadda Raadio Muqdisho ee ay Dowladdu leedahay.[127] Warqadda waxaa la ogeysiiyay oo nuqullo ka mid ah loo diray dhammaan Taliyeyaasha Gobolka ee Ciidanka Booliiska Puntland iyo saraakiisha kale, si degdeg loogu meelmariyo. Wasiirku wuxuu 29kii bishii Oktoobar 2015 amar ku bixiyay in Idaacadda VOA-Qaybta Af Soomaaliga laga mamnuuco inay wax barnaamij ah ka tebiso Puntland, wuxuuna ku handaday in tallaabo ciqaab ah laga qaadi doono haddii ay u hogaansami weydo.

127 Warqadda waxaa ku taariikheysnayd 14 Sebtembar 2015. Waxaa aad loogu arkay inay tahay tallaabo aargoosi ah oo ka dhalatay muran siyaasadeed ee ka jira DFS dhexdeeda.

118. Taariikhdu markay ahayd 11kii bishii Nofembar ayaa haddana mar kale Wasiirka Warfaafinta Puntland soo saaray warqad kale oo ka mamnuucaysa wariye inuu saxafinimo ku shaqeysto Puntland. Warqadda, oo ku socotay Md. Jaamac Deperani, oo ah wariye u soo warrama Telefishinka Soomaali Channel TV, ee London ku yalla, ayaa wariyaha ku amartay inuu joojiyo hawshiisa oo ahayd wariye ka hawlgala Puntland ilaa iyo inta wargelin dheeraad ah laga helayo, iyadoo sabab la'aan ah. "Barnaamidka Deperani" ee sida aadka loo daawado, ayaa horey u martigeliyay Wasiirka Warfaafinta oo ka wareystay arrimo muhim ah, sida la xisaabtanka dowladda Puntland iyo mowqifka Wasiirka ee ku aaddan Khaatumo. Waxaa Deperani mar dambe xiray booliska, Maxkamadda Garoowe ee Darajada Koowaadna waxay xaqiijisay waaran soo xirid ah oo 15 maalmood ah waxayna u diidday in damiin lagu sii daayo. Deperani waxaa lagu hayay Xabsiga Dhexe ee Garoowe, waxaana la soo daayay 10 beri ka dib isagoon wax dacwad ah lagu soo oogin, ka dib markii la soo saaray Wareegto Madaxweyne.

119. Dowladaha hoose ayaa sidoo kale ku lug lahaa. Tusaale ahaan, bishii Maajo 2015 dowladda hoose ee Gobolka Nugaal ayaa ku amartay booliska inay la wareegaan nuqulladii wargeysyada iyadoo ku eedeynaysa inay faafiyeen wareysiyo lala yeeshay dad canshuur bixiyeyaal ah oo dhalleeceeyay habka ay dowladdu canshuuraha u ururiso. Taliyaha Booliska Puntland ayaa 23kii bishii Juun 2016 amar ku bixiyay in la xiro Idaacadda Radio Daljir ee Puntland.[128] Xiriddu waxay timid hal maalin ka dib markii Wasiirka Warfaafinta Puntland uu soo saaray warsaxaafadeed oo uu kaga mamnuucayo dhammaan hay'adaha warfaafinta ka jira Puntland inay tebiyaan wixii maqal-muuqaal ah, qoraal ah, sawirro ah, warar ah ama maqaallo ah oo ka yimid "fallaagada" iyo inay wareystaan shakhsiyaadka xiriirka la leh kooxaha argagaxisada sida *Daacish* (ISIS), iyo burcad badeedda. Xiriddu waxay timid hal maalin ka dib markii wariyeyaashooda iyo shaqaalahooda warbaahinta ay wareysteen Guddoomiyii hore ee Gobolka Bari, oo hadda hogaamiya maleeshiyaadka beeshiisa oo halgan hubaysan kula jira Puntland. Wasiirku wuxuu warbaahinta ku eedeeyay inay la'dahay anshax xirfadeed iyo inaysan lahayn aqoontii xirfadda, wuxuuna xiridda sabab uga dhigay inay buunbuuniyeen aragtida guddoomiyihii hore, inkasta oo marar badan amar lagu siiyay inaysan tebinin aragtidiisa. Markii shirka jaraa'id lagu weydiiyay waxa asaaska sharci u ah xayiraadaha, Wasiirku wuxuu ku jawaabay: "Sharciga ma eegi doono. Waxaan adeegsan doonaa rasaas iyo garaacid" wuxuuna sii raaciyay "ma aqoonsani Dastuurka, ma aqoonsani sharciga. Waxaan idin ku xukumi doonaa awood iyo takrifal, waayo idinkaa sharciga jabiyay."[129]

120. Ururka Warbaahinta Puntland ayaa si degdeg ah uga jawaabay weerarrada badankooda. Tusaale ahaan, wuxuu soo saaray warsaxaafadeedyo cambaareynaya u cagajugleynta wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta, mamnuucidda iyo faafreebka ka dhanka ah xorriyadda hadalka iyo warbaahinta gobolka.[130] Wasiirka Warfaafinta ayaa 9kii bishii Luuliyo 2016 ku amray hay'adaha warbaahinta inay diiwaangeliyaan wariyeyaashooda oo magacyadooda Wasaaradda u soo diraan ugu dambeyn 25ka bisha Luuliyo. Warqaddu waxay sheegtay in haddii awaamirtan loo hogaansami waayo ay keeni doonto in wariyeyaasha aan lagu diiwaangelin inay ku shaqeeyaan Puntland iyadoo hay'adaha warbaahinta oo liiska shaqaalahooda Wasaaradda u gudbin waaya waxaa laga mamnuuci doonaa inay ka soo tebiyaan kuna hawlgalaan degaanada ay dowlad goboleedku ka taliso. Ururka Warbaahinta Puntland ayaa arrintan ka horyimid markii la magacaabay guddiga wasiiradda ee faragelinta diiwaangelinta iyo qoridda wariyeyaasha iyo 17kii bishii Luuliyo oo la magacaabay Guddiga Baarlamaanka si ay u dhexdhexaadiyaan khilaafaadka u dhexeeya Ururka iyo Wasiirka.

128 Juun 27, 2016 Somalia: idaacadda wararka ugu horeysa Puntland oo la xiray, https://rsf.org/en/news/somalia-Puntlands-leading-news-radio-closed.
129 https://www.youtube.com/watch?v=DXrKPwhrQ8Y
130 30/10/ 2015, http://mediaPuntland.org/Puntland-administration-lifts-the-ban-on-the-voa-somali-broadcast-in-Puntland/

## 3. WARBAAHINTA KA JIRTA "SOMALILAND"

121. "Somaliland" waxay leedahay in ka badan 16 wargeys oo madaxbanaan, shan telefishin, hal idaacad, iyo weliba tiro bogag internet oo wararka tebiya. Waxaa jira ururro warbaahineed oo firfircoon, sida Ururka Saxafiyiinta Somaliland (SOLJA), Jamciyadda Somaliland ee Qorayaasha iyo Saxafiyiinta (SSWJ), iyo Ururka Haweenka ee Saxaafadda (WIJA), shaqadoodana waxaa kaabaya bulshada rayidka, oo ay ka midyihiin difaacayaasha xuquuqul insaanka.

122. Dowladda "Somaliland" ayaa sannadkii 2002 soo saartay wareegto Wasaaradeed oo mamnuucaya hawlgalka idaacadaha sida gaarka loo leeyahay.[131] Inkastoo ay jirto in la ansaxiyay Sharciga Saxaafadda iyo olole ay wadeen ururrada warbaahinta iyo xuquuqul insaanka, haddana wareegrada weli lagama noqonin. Wasiirka Warfaafinta "Somaliland" ayaa 19kii bishii Nofembar 2014 soo saaray wareegto kuna dhawaaqay Xeerka Anshaxa Warbaahinta iyo sameynta "Guddiga Anshax Marinta" si loo kormeero aflagaaddada dib-u-eegidna loogu sameeyo rukhsadaha warbaahineed ee wariyeyaasha. Wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta "Somaliland" ayaa ka soo horjeestay wareegtada, iyagoo sheegay inay xadgudub ku tahay Dastuurka "Somaliland" iyo halbeegyada caalamiga ah ee khuseeya. Ururka SOLJA ayaa bishii Juun 2015 ku baaqay in dib-u-habayn lagu sameeyo shuruucda warbaahinta si wax looga qabto xadgudubyada ka dhanka ah shaqaalaha warbaahinta sarena loogu qaado xiriirka ka dhexeeya Dowladda iyo warbaahinta.

123. Wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta iyo ururrada warbaahinta "Somaliland" waxay wadaan olole la doonayo in la tirtiro dacwadaha ku lug leh warbaahinta iyo inla hirgeliyo Sharciga Saxaafadda ee 2004, isagoo uu garsoorku ku andacoodo inaan jirin meel looga baxo Xeerka Ciqaabta. Guddoomiyaha Garssorka "Somaliland" ayaa u muuqda inay ka go'antahay inuu wax ka qabto dulduleellada ku jira sharciga. Wuxuu bishii Sebtembar 2015 qabtay shir jaraa'id, isagoo garowsanaya baahida loo qabo in dib-u-habeen lagu sameeyo shuruucda lagu dhaqo dacwadaha ku lug leh wariyeyaasha, shaqaalaha warbaahinta iyo hay'adaha warbaahinta. Wuxuu sidoo kale mar kale ku celiyay in wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta aan mar dambe loo xirin hawlahooda maalinle ee ay qabtaan. Wuxuu bishii Oktoobar 2015 soo saaray wareegto aan dhaqangal ahayn ee lagu dhisayo hanaan lagaga hortagayo xariga iyo xabsiga sharci darrada ah ee wariyeyaasha, shaqaalaha warbaahinta. Hase ahaatee, maxkamaduhu waxay sii wadi doonaan inay u noqdaan Xeerka Ciqaabta, maadaama Sharciga Saxaafadda ee 2004, oo ah mid inta badan xeer-nidaamiye ah, uusan qoraynin in loo noqon karo wax hanaan garsoor ah. Sidaa darteed, dhinacyada sharci fulinta waxay sii wadaan inay adeegsadaan tallaabooyin cabburis ah oo lagu horjoogsanayo xorriyadda hadalka ka jirta "Somaliland".

124. Muddada ay warbixintan ka hadlayso, UNSOM waxay dabagashay oo diiwaangeliyay xadgudubyo isugu jira cagajugleyn, kadeedid, xarig iyo xabsi, weerar jirka ah, iyo mamnuucidda warbaahinta. Dhacdooyinka badankooda waxaa lagu eedeeyaa Waaxda Booliska ee Falcelinta Degdegga ah, ee loo dhisay in argagaxisada lagula dagaallamo, Waaxda Dembi Baarista, Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud, iyo weliba saraakiil sarsare ee Dowladda. UNSOM waxay hay'adaha dowladda olole kula samaysay tiro dacwado ah, wuxuuna garowday inay sii kordhayso in hay'adahaas ay diyaar u yihiin inay tixgeliyaan waxna ka qabtaan welwelka UNSOM.

125. Laga soo billaabo bishii Janaayo 2014 ilaa bishii Luuliyo 2016, ugu yaraan 60 ka mid ah wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta ayaa la xiray oo xabsiga la dhigay, badanaana waa la soo daayay iyagoon dacwad lagu soo oogin. Dacwaddii wariyaha Telefishinka Kalsan TV ee Ingiriiska ka dhisan ee ka dhacday gobolka Sanaag (tifaftiraha guud ee bogga internetka warbaahinta Sanaag) waxay tusaale u tahay silsiladdan taxanaha ah. Booliska ayaa 12kii bishii Febraayo 2015 wariyahaas ku xiray saldhigga dhexe ee booliska Ceerigaabo iyagoo ku eedeynaya inuu dhalleeceeyay xaaladda Isbitaalka Guud ee Ceerigaabo. Isla maalintii ayaa damiin lagu soo daayay, maxkamadduna markii dambe ayay dacwaddii meesha ka saartay. Markaa

131 Wareegto Wasiir oo mamnuucaysa soo dejinta iyo hawlgelinta idaacadaha gaarka loo leeyahay, 4 Juun 2002.

ka dib Telefishinka Kalsan TV ayaa shaqadii ka eryay, inkastoo milkiiluhu inkiray in tani ay ka dhalatay cadaadis kaga yimid maamulka gobolka Sanaag. Dacwad kale ayaa 27kii bishii Sebtembar 2015 boolisku soo qabteen afar heesaa oo ka tirsan kooxda aadka loo yaqaano ee Xidigaha Geeska, waxayna u taxaabeen saldhigga dhexe ee booliska Hargeysa iyagoo ku eedeeyay khiyaamo qaran. Kooxda heesaaga ah waxay ka soo laabanayeen magaalada Muqdisho, halkaasoo ay heeso ku soo bandhigeen munaasabaddii tamashlaha Ciidda, iyagoo qaaday heeso Soomaalida ku dhiirigelinaya inay isjeclaadaan ayna mid ahaadaan , taasoo ay Dowladda “Somaliland” u fasirtay inay tahay inay ka soo horjeedaan qaranimada ay ku dooddo. Muuqaallo video ah oo internetka la soo geliyay ayaa muujinaya in kooxdu soo bandhigtay heeso jaceyl oo keliya, laakiin ma cadda in wax muuqaallo ah laga saaray. Maxkamadda Gobolka Hargeysa ayaa ugu dambeyntii go’aamisay in eedeymuhu ay yihiin kuwo aan sal lahayn.

126. Cagajugleynta iyo kadeedidda shaqaalaha warbaahinta ee magaalada Berbera ayaa labalaabantay ka dib markii ay warbaahintu wax ka qortay qorshaha dowladda “Somaliland” ee dad gaar ah looga iibinayo haamaha shidaalka, oo ah arrin dadweynaha welwel gelisay. Ugu yaraan saddex wariye iyo hal odey dhaqameed ayaa la xiray oo xabsida la dhiga muddo 48 saacadood ah. Odey dhaqameedyada iyo ururrada warbaahinta “Somaliland” ayaa soo farageliyay oo ka shaqeeyay sii deyntooda.[132]

127. Hay’adaha “Somaliland” ayaa xiray hal telefishin iyo afar wargeys oo/ama joojiyay muddada ay warbixintan ka hadlayso. Laba wariye oo ka tirsan wargeyska Hubsad ayaa la xiray 30kii bishii Nofembar 2015, iyagoo lagu eedeeyay inay wargeys daabaceen rukhsad la’aan. Waxaa lagu sii daayay dammaanad 3dii Disembar, Waxana rasmi ahaan dacwad lagu soo oogay 10kii Janaayo iyada oo loo cuskanayo Xeerka Ciqaabta. Dacwaddooda oo markii dambe la keenay Maxkamadda Gobolka Hargeysa oo dib u dhigaysa dhegeysiga dacwadda sababo muuqda la’aan. Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa sidoo kale joojiyay wargeyska oo tan iyo markaas sidaa u xanniban.

128. Saddexda kiis ee haray ayaa kiciyay ra’yiga dadweynaha, waxaana inta badan ka soo warramay warbaahinta: Kiisaska Telefishinka Universal TV, Hubaal, iyo Haatuf. Wasiirka Warfaafinta ayaa 3dii bishii Febraayo 2014 soo saaray wareegto uu Telefishinka Universal TV ee London saldhigiisu yahay kaga joojiyay inuu ka hawlgalo “Somaliland”. Xannibaaddan waxaa laga qaaday bishii Nofember 2014. Shirkadaha warbaahinta Hubaal iyo Haatuf ayaa iyana la xiray taariikhaha kala ah Disembar 2013 iyo Abriil 2014. Milkiilaha Haatuf iyo tifaftiraha oo la qabtay bishii Abril 2014 ayaa Maxkamadda Gobolka Hargeysa isla markiiba ku xukuntay ilaa iyo afar sanno oo xabsi ah, laakiinse waxaa hal bilk a dib lagu soo daayay wareegto Madaxweyne. Hase ahaatee, wargeysku wuu xirnaa ilaa iyo bishii Febraayo 2016, boggiisa internetkana si kooban oo keliya ayaa loo heli karaa. Mas’uuliyiinta “Somaliland” ayaa bishii Maajo 2015 go’aamiyay inay xannibaadda ka qaadaan shirkadda warbaahinta Hubaal ka dib markii wadahadallo ay dhexmareen milkiileyaasha iyo saraakiisga Dowladda. Eedeymihii ayaa laga tuuray wargeyskuna daabacad ayuu dib u billaabay. Go’aanku wuxuu u muuqdaa inuu yahay tallaabo siyaasadeed ay Dowladdu warbaahinta ku soo dhoweysaneyso ka dib markii uu Baarlamaanku kordhiyay muddo xileedka Dowladda.

129. Lixdii bilood ee la soo dhaafay, weerarro cusub oo taxane ah oo lagu qaaday wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta ayaa soo shaacbaxay, gaar ahaan waxaa a ka dhacay “Somaliland” halkaasoo laga soo warramay dhowr dhacdo oo weerar afka iyo jirkaba ah oo ay wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta ku soo qaadeen dad aan la garanayn. Tusaale ahaan, 10kii bishii Janaayo 2016, koox rag ah oo aan haybtooda la garanayn ayaa gobolka Togdheer weerar afka iyo jirka ah ku qaaday wariye isagoo ku sii jeeda gurigiisa, waxayna u jeediyeen hanjabaad toos ah oo qayaxan oo la xiriirta wararka uu soo diro. 21kii bishii Oktoobar 2015 ayaa koox rag ah oo aan haybtooda la garanayn magaalada Burco ku weerareen wariye ah guddoomiyaha wargeyska *Codka Shacabka*, dhaawac halis ahna way u geysteen. Kooxda weerarka geysatay ayaa sidoo qaadatay kameradiisa iyo qalab kale ee warbaahin. Booliska ayaa

132 SECJA wuxuu jiray tan iyo bishii Maarso 2015 laakiin hay’aduhu waxay diideen inay diiwaangeliyaan.

soo qabtay kooxdii weerarka geysatay waxaana maxkamad la soo taagay 4tii bishii Maarso iyadoo la raacayo Xeerka Ciqaabta.

130. Dhacdooyin kale oo dhowaan dhacay ayaa keenaya su'aasha sharcinimada xarigga iyo xabsi ku haynta wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta. Hay'adda Sirdoonka "Somaliland" ayaa 28kii bishii Maajo magaalad Hargeysa ku qabatay laba ka mid ah shaqaalaha warbaahinta ee ka kala socda Telefishinka Bulsho TV iyo Wargeyska Foore taasoo la xiriirta wararka ay ka soo tebiyeen heshiiska dekedda Berbera. Nimanka waxaa loo qaaday meel aan la garanayn oo ah guri sharci darro dadka loogu xiro, ehelladoodana laguma wargelin halka lagu hayo. Inkastoo wariyaha Telefishinka Bulsho TV la soo daayay 29kii bishii Maajo isagoon dacwad lagu soo oogin, Guddoomiyaha Wargeyska Foore waxaa lagu hayay xabsiga isagoon maxkamad la soo taagin ilaa dammaanad lagaga soo daayay 4tii bishii Juun. Markaa ka dib ayaa lagu soo eedeeyay inuu faafiyay maqaallo dadka kiciya iyo inuu dhalleeceeyay heshiiska kireynta dekedda Berbera ee dhexmaray dowladda "Somaliland" iyo shirkadda Dekedda Caalamiga ee Dubay (Dubai Ports World company), inuu aflagaaddeeyay qoyska Madaxweynaha iyo inuu ku shaqeynayay rukhsad ganacsi ee ogolaansho la'aan ah. Maxkamaddu weli dacwadda xukun kama soo saarin.

131. Ururrada xuquuqul insaanka maxalliga ah ayaa cambaareeyay xiridda iyo weerarrada ka dhanka ah wariyeyaasha iyo shaqaalaha warbaahinta, waxayna ku taageereen qareenno u dooda. Waxay sidoo kale si qayaxan ugula doodeen hay'adaha ay khuseyso iyo beesha caalamka uguba ololeeyeen in si wanaagsan loo ilaaliyo wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta.

132. Dhacyooyinka taxan ee xiridda iyo xabsi ku haynta wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, gaar ahaan xarigga muddada gaaban, waxay u muuqdaan inay muujinayaan in loola jeedo in loogu cagajugleeyo ama lagu kadeedo wariyeyaasha iyo milkiilayaasha warbaahinta, taasoo shaki la'aan keenaysa is-faafreebid ama in shaqaalaha warbaahintu ay ugu dambeyntii isaga tagaan xirfaddooda.[133]

133 *eeg* Hay'adda Human Rights Watch, "Sidii Kalluun ku jira Biyo Sun ah": Weerarrada Lagu Qaado Xorriyadda Warbaahinta Soomaaliya (2016), Cut. IV.

# VI. GUNAANAD IYO TALO SOO JEEDIN

133. Xorriyadda hadalku waxay shardi u tahay xaqiijinta mabaadi'da daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka, oo muhim u ah horumarinta iyo ilaalinta xuquuqul insaanka. In dadka Soomaaliyeed la siiyo fursad ay si xorah ugu soo bandhigaan fikirkooda, uga doodaan ugana qaybgalaan geeddi socodyada siyaasadda ee muhimka ah ee go'aamin doona mustaqbalka dalkooda waxay sare u qaadaysaa sharciyadda Dowladda Soomaaliyeed ee federaalka iyo dimuqraadiga ah ee sameysmaya waxayna ka qaybqaadanaysaa dib u soo celinta nabad waarta iyo dimuqraadiyad.

134. Inta ay meesha ka maqantahay ilaalin lagu xaqiijiyo xorriyad lagu hadlo, isgaarsiin la isku weydaarsado, wax lagu daabaco, dood laga yeesho arrimaha siyaasadda iyo doorashada, waxaa khatar ku jira oo aan la gaari karin ka qaybgal siyaasadeed ee dhab ah oo wax ku ool ah. Tallaabo kasta oo lagu xaddidayo xorriyadda xogta iyo hadalka waxaa qasab ah inay culeys weyn saareyso laamaha dowladda inay caddeeyaan sababta ka dambeysa. Sidaa darteed, Dowladdu waa inay isbedel ku sameyso lana noqoto shuruucda iyo dhaqamada hadda xaddidaya khatarna geliya xaqa xorriyadda hadalka, tallaabadii kasta oo lagu xaddidayo xorriyadda hadalkana waa in lagu saleeyo sharci si sax ah loo xeereeyay, ay korjooto ka yihiin hay'ado banaanka ka ah oo madaxbanaan, ayna ahaato mid lagama maarmaan ah una dhiganta gaaridda ujeeddooyinka amniga. Ansaxinta Madaxweynaha ee uu ku saxiixay sharciga Guddiga Xuquuqul Insaanka bishii Agoosto 2016 waxay abuureysaa fursad muhim ah ee lagu sii xoojiyo hanaan korjooto ah. Sharciga, oo inta badan waafaqsan halbeegyada caalamiga ah ee xukuma hay'adaha xuquuqul insaanka qaran, wuxuu waddada u xaari doonaa in Guddi Xuquuqul Insaan oo madaxbanaan loo sameeyo Soomaaliya. Guddi dhaqaale dhab ah haysta oo madaxbaan wuxuu kaalin muhim ah ka cayaari doonaa horumarinta iyo ilaalinta xuquuqul insaanka dadka dhammaantood, oo uu ka midyahay xaqa xorriyadda hadalka.

135. Sidaa darteed, waxaa loogu baaqayaa DFS iyo dowlad goboleedyada federaalka ee sameysmaya inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo abuuro jawi suurtagelinaya in si buuxda loogu naalloodo xaqa xorriyadda fikirka iyo hadalka, oo ay ka midtahay in la ballaariyo fursad ay dadweynuhu u helaan inay dood furan, nabad ah, xorna ah ka yeeshaan arrimaha muhimka ah ee ay dadku daneeyaan, sida sameynta dowlad goboleedyada, dib u eegidda dastuurka iyo geeddi socodka doorashada. Waxaa sidoo kale muhim ah in dadweynaha la siiyo fursad ay uga hadlaan talana ugu yeeshaan sida wax looga qaban lahaa dhibaatooyinka amniga ee hadda ka socda Soomaaliya.

136. Horumarka muuqda ee laga gaaray xaaladda amniga ee ka jirta magaalooyinka iyo goobaha hadda ku jira gacanta Dowladda ayaa abuuray jawi ay dadku si isa soo taraysa u dareemayaan xorriyad ay kula hadlaan ayna kula xiriiraan Dowladda Federaalka iyo maamullada dowlad goboleedyada intaba, iyagoon ka cabsanaynin in cidi dhib u geysato, gaar ahaan Al-Shabaab. Inkastoo xorriyadda ka jirta gobollada ay kala duwantahay, caqabadaha ugu waaweyn ee ka jira dalka oo dhan waxaa ka mid ah dareen amni xumo joogta ah, xoogagga Al-Shabaab awgood, iyo weliba cadaadis iyo kadeedid qarsoon oo ay geystaan maamullada, iyo iyadoo aanay jirin in si dhab ah ay madaxdu siyaasad ahaan uga go'antahay inay dhaqangeliyaan hanaanka caddaaladda ama ay si gaar ah u dammaanad qaadaan xorriyadda hadalka.

137. Maadaama ay jiraan geeddi socodka doorashada 2016 ee soo socota, ayna hadda socoto hirgelinta hanaanka doorashada iyo doorasho dadweyne oo la filayo inay dhacdo sannadka 2020ka, waxaa aad muhim u ah inaan la horjoogsan hawlaha siyaasadda iyo in dadka Soomaaliyeed ay si xor ah uga qaybgalaan, xorriyadda hadalka iyo in warbaahin firfircoon oo amaan hela, si xor ahna u shaqeeya. Iyagoo ka ambaqaadaya waxyaabaha ay warbixintan sheegay, Xafiiska Ergeyga Sare ee Xuquuqul Insaanka (OHCHR) iyo Hawlgalka Kaalmaynta Qarama Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM) waxay soo jeedinayaan

talooyinka soo socda si sare loogu qaado ilaalinta xorriyadda hadalka ee Soomaaliya oo dhan. Kuwo badan oo ka mid ah talooyinkan waa in sida ugu dhaqsiyaha badan loo hirgeliyaa si loo damaanad qaado jawi ku haboon doorashooyinka sannadka 2020.

## Ku socota Dowladda Federaalka Soomaaliya

- In mudnaanta la siiyo hirgelinta talooyinkii laga soo jeediyay Dib-u-eegidda Caalamiga ee Xilliyaysan ee la xiriira xorriyadda hadalka iyo warbaahinta, ilaalinta wariyeyaasha, maxkamadaynta kuwa geysta xadgudubyada ka dhanka ah shaqaalaha warbaahinta iyo dadka siyaasadda ku hawlan. Qaar ka mid ah talooyinkan waxaa lagu tixgeliyay qorshe hawleedka khariidada Xuquuqul Insaanka 2015-2016.
- Ka dib markii bishii Juun 2016 la ansaxiyay Hindise Sharciyeedka Xisbiyada Siyaasadda, waa in la dejiyo hanaan sharci oo suurtagelin doona sameynta ururro siyaasadeed.
- In la dhowro lana damaanad qaado madaxbanaanida warbaahinta, gaar ahaan in sharciga warbaahinta la waafajiyo Dastuurka Federaalka Ku Meelgaarka, iyo weliba xeerar iyo halbeegyo goboleedyada iyo kuwa caalamiga. Tani waa inay ka mid noqotaa baabi'inta shuruucda dembi ka dhigaya "faafinta wararka beenta ah" iyo dib-u-eegidda Hindise Sharciyeedka La Dagaallanka Argagaxisada si loo xaqiijiyo in xaddidaadaha la soo rogo ay ahaadaan kuwa uu ogolyahay sharciga caalamiga ee xuquuqul insaanka.
- In la xaqiijiyo taabbagelinta xaqa haweenku u leeyihiin ka qaybgalka geeddi socodka siyaasadda, gaar ahaan hanaanka doorashada sannadka 2016 iyo doorashooyinka la filayo inay dhacaan sannadka 2020. Waa in la qadariyaa lana xoojiyaa sida madaxda Dowladda Federaalka iyo maamullada dowlad goboleedyada ugu ballan qaadeen qoondada hawenka ee boqolkiiba 30, taasoo ay ka mid noqonayso in talaabo laga qaado ciddii fulin wayda.
- Dib-u-habaynta lagu sameeyo Dowladda dhexdeeda iyo ururrada siyaasadda waa in lagu xaqiijiyo inay haweenku xubno ku leeyihiin, loo wada dhanyahay si wax ku ool ahna looga wada qaybgalo. Tani waa inay ka mid noqdaan in hay'adaha ay khuseyso ay dejiyaan hanaan ilaalin, oo ay ka midtahay in la sameeyo qabanqaabo amni oo ku haboon iyo hanaan isla xisaabtan.
- Maadaama bishii Agoosto 2016 la ansaxiyay Sharciga Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaran, waa in si degdeg ah loo sameeyo Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaran, si ay ugu suurtowdo inuu kaalinta ku haboon ka cayaaro ilaalinta iyo horumarinta xuquuqda dadka Soomaaliyeed, oo ay ka midyihiin dadka siyaasadda ku hawlan, weriyeyaasha iyo difaacayaasha xuquuqda aadanaha.
- In la xaqiijiyo in kaalinta Hay'adda Sirdoonka iyo Amniga Qaran lagu nidaamiyo hanaan korjooga ah oo waxtar leh, in looga hortago in saraakiisheedu ay xadgudubyo geystaan, lana xaqiijiyo la xisaabtan, oo ay ka midyihiin falalka lagu bartilmaameedsado dadka siyaasadda ku hawlan, weriyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, iyo difaacayaasha xuquuqda aadanaha.
- In la qabto tababaro ku saabsan xuquuqul insaanka, taageerana looga dalbado saaxiibada caalamka, lana xoojiyo la xisaabtanka hay'adaha iyo saraakiisha amniga, gaar ahaan kuwa ka hawlgeli doona hanaanka doorashada.
- In la xaqiijiyo in Golaha Warbaahintu uu ahaado mid madaxbanaan, oo u hawlgeli kara si waafaqsan xeerarka iyo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqul insaanka.
- In sannadka 2017 wadatashiyo loo wada dhanyahay dadka Soomaaliyeed lagala yeesho dib-u-eegidda Dastuurka Federaalka.
- In dadweynaha iyo ururrada bulshada rayidka lagu dhiirigeliyo inay soo bandhigaan aragtidooda ku aaddan kana doodaan sida ugu wanaagsan ee looga adkaan karo Al-Shabaab, looga hortagikaro xagjirnimada colaadda wadata, amni waarana dalka looga sameeyo, oo ay ka mid tahay in la sameeyo hay'ado amni oo lagu kalsoonaan karo.

## Ku socota Puntland

- In la xaqiijiyo in Dastuurka la waafajiyo heshiisyada xuquuqul insaanka ee gobolka iyo kuwa caalamkaba, oo uu ka midyahay xorriyadda hadalka iyadoo la ballaarinayo baaxadda xuquuqda lagu ilaaliyo Dastuurka.
- In la muujiyo ballanqaad guud oo ku aaddan in saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahintu ay ku

hawlgalaan jawi xor ah oo furan.

- In la dhiso Guddiga Sare ee Warbaahinta ee uu qorayo Sharciga Warbaahinta ee 2014, sharcigana dib u eegid lagu sameeyo si looga dhigo mid waafaqsan halbeegyada xuquuqul insaanka caalamiga iyo kuwa qaran.
- In la xoojiyo jawi ay warbaahintu ugu shaqeyso si amaan ah, xor ah oo madaxbaan, oo ay ka midtahay in la joojiyo wixii faragelin ah oo lagu sameeyo warbaahinta lagana hortago xabsiga aan loo aabayeelin ee loo geysto saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta.
- In la dejiyo hanaan ilaalin ah si looga hortago weerarrada iyo dilalka qorsheysan ee loo geysto dadka siyaasadda u dhaqdhaqaaqa, wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, lana xaqiijiyo isla xisaabtan inuu ka jiro meesha ay falalkaas ka dhacaan.
- In la xoojiyo Xafiiska Puntland ee Difaacaha Xuquuqul Insaanka iyadoo loo fidinayo dhaqaale ku filan si ay ugu suurowdo inuu u shaqeeyo si waxtar leh oo madaxbaan, oo ay ka midtahay inuu sameeyo kormeer xuquuqul insaan.

## Ku socota Maamulka Jubbaland, Maamulka Ku Meelgaarka Koonfur Galbeed, Maamulka Ku Meelgaarka Galmudug

- In la xaqiijiyo dejinta sharci cusub oo la tacaalaya xorriyadda hadalka iyadoo lala tashanayo difaacayaasha xuquuqul insaanka, wariyeyaasha iyo hawlwadeenada kale ee warbaahinta, bulshada rayidka iyo in sharcigaas uu ahaado mid waafaqsan Dastuurka federaalka, dastuurada maamul gobolladaas iyo xeerarka iyo halbeegyada caalamiga ah.
- In la taageero waajibaadka Guddiga Xuquuqul Insaanka madaxabanaan ee soo socda (la sameyn doono), lana xaqiijiyo in hawshiisa loogu fududeeyo degaanada ay ka taliyaan.

## Ku socota "Somaliland"

- In di-u-eegid lagu sameeyo shuruucda arrintan khuseeya lana dejiyo sharci cusub si loo xoojiyo ilaalinta xuquuqda xorriyadda hadalka iyo xorriyadda warbaahinta.
- In la xaqiijiyo baaritaanka iyo maxkamadeynta shakhsiyaadka ka mas'uulka ah weerarrada ka dhanka ah warbaahinta iyo shaqaalaha warbaahinta, oo ay ka midyihiin saraakiisha hay'adaha sharci fulinta oo ay tahay in xeer anshax wanaagoodu ay ku jirto in si sax ah loola dhaqmo xirfadlayaasha warbaahinta.
- In dib-u-eegid lagu sameeyo awoodaha Xeer-ilaaliyaha Guud ee "Somaliland" ee warbaahinta ku aaddan si loo xaqiijiyo in hay'addu ay kaalin mug leh ka cayaarto ilaalinta xorriyadda hadalka.

## Ku socota Wariyeyaasha iyo Shaqaalaha Kale ee Warbaahinta

- In la qaato xeer anshax wanaag oo rasmi ah si loo dhiirigeliyo is-nidaamin loona hogaansamo halbeegyada ugu sarreeya ee anshaxa wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta.
- Wariyeyaashu waa inay si sharci ah oo xirfad ahaan la aqbali karo ku helaan, kuna tebiyaan wararka iyo dhammaan xogta kale, oo ay ka midtahay in lagu tebiyo habka elektarooniga.
- Wariyeyaashu waa inay adeegsadaan luqad aan laab-lakac ku jirin oo dhexdhexaada ah si ay u tebiyaan wararka la xiriira hanaanka doorashada iskana ilaaliyaan ereyada kicin kara colaad ama noqon kara hadal nacayb ku dhisan, waana inay iska ilaaliyaan faquuq markay tebinayaan kaasoo ka dhan ah xisbi siyaasadeed ama musharax u tartamaya xil doorasho.

## Ku socota Beesha Caalamka

- In la sii wado dhiirigelinta iyo kaalmada la siiyo madaxda Soomaaliya si loo ballaariyo fursadaha ay dadka Soomaaliyeed, oo ay ka midyihiin haweenka iyo dhallinyarada, ra'yigooda uga dhiibtaan dhismaha dowlad goboleedyada, dib-u-eegidda dastuurka iyo hanaanka doorashada, iyo weliba siyaabaha lagu gaari karo amni waara iyo ka hortagga xagjirnimada colaadda ku saleysan.

- In horumarinta iyo ilaalinta xorriyadda hadalka lagu hayo ajendaha beesha caalamka markay la shaqeynayso hay'adaha federaalka Soomaaliyeed iyo kuwa gobolladaba iyo munaasabadaha iyo madallada heerka sare ee muhimka ah, oo ay ka midyihiin Golaha Xuquuqul Insaanka, Golaha Loo Dhanyahaya iyo Golaha Amaanka.
- In la taageero tababarka iyo ololeyaasha wacyigelinta saraakiisha sharci fulinta iyo garsoorka lana siiyo kaalmo farsamo si loo xaqiijiyo dembi baaris waxtar leh, oo ay ka midtahay in baaritaan lagu sameeyo weerarrada lagu qaado wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta.
- In marka la taageerayo tallaabooyinka dib u eegidda shuruucda la xaqiijiyo in dooddu ka shidaal qaadato halbeegyada caalamiga ee xuquuqul insaanka, oo ay ka midtahay dib u eegidda shuruucda ku xadgudba xorriyadda hadalka.
- In wariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta taageero dheeraad ah lagu siiyo tallaabooyinka sare loogu qaadayo is-ilaalinta.
- In la taageero dhisidda Guddiga Qaran ee Xuquuqul Insaanka iyo xoojinta Xafiiska Difaacaha Xuquuqul Insaanka Puntland iyo Guddiga Xuquuqul Insaanka Somaliland si ay si waxtar leh ugu hawlgalaan xaqa xorriyadda hadalka.

# VII. Lifaaqdaya

## KHARIIDADA SOOMAALIYA




Map No. 3690 Rev. 10 UNITED NATIONS
December 2011

Department of Field Support
Cartographic Section

## 2. EREYADA LA SOO GAABIYAY OO INTA BADAN LA ADEEGSADO

| | |
|---|---|
| AMISOM: | Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya |
| FGS: | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| GIA: | Maamulka Ku Meelgaarka ee Galmudug |
| ICCPR: | Heshiiska Caalamiga ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda |
| ISWA: | Maamulka Ku Meelgaarka ee Koonfur Galbeed |
| MAP: | Ururka Warbaahinta Puntland |
| NGOs: | Ururrada aan dowliga ahayn |
| NISA: | Hay'adda Sirdoonka iyo Amniga Qaran |
| NUSOJ: | Ururka Qaran ee Saxafiyiinta Soomaaliyeed |
| SECJA: | Ururka Saxafiyiinta Gobollada Bariga iyo Bartamaha Somaliland |
| SNTV: | Telefishinka Qaranka Soomaaliyeed |
| SOLJA: | Ururka Saxafiyiinta Somaliland |
| SRSG: | Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud |
| UNICEF: | Hay'adda Qaramada Midoobay ee Carruurta |
| UNSOM: | Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya |
| UPR: | Dib-u-eegidda Caalamiga ah ee Xilliyaysan |
| WIJA: | Ururka Haweenka ee Saxaafadda |

**Jawaabihii ka yimid Maamulada**
**(waxa si rasmi ah soomaali ugu turjumay UNSOM)**

جمهورية الصومال الفدرالية
وزارة المرأة و تنمية حقوق الانسان
مكتب الوزير

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka**
**Xafiiska Wasiirka**

24 Agoosto 2016

Mudane/Marwo,

**Ujeeddo: Soomaaliya – Warbixin ku saabsan xaqa xorriyadda hadalka**

Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka (WHHXI) waxay qabyada warbixintan la wadaagtay Wasaarado kale oo muhim ah oo ay ka midyihiin Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka, Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, Wasaaradda Gaashaandhiga iyo Wasaaradda Amniga Qaranka.

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska ayaa codsatay waqti dheeraad ah ay dib u eegid ugu sameyso warbixinta waxayna afka ka sheegtay walaacyada soo socda:

- Guud ahaan, waxay la tahay in qaar ka mid ah xogta warbixintan ku jirta (gaar ahaan wixii la xiriira magacaabidda Golaha Warbaahinta Qaran) ay ku saleysanyihiin ku tiri ku teen oo aan xaqiiqa dhab ah ku saleysnayn.
- Marka la eego faqrada 24aad, waxay sheegeen in Sharciga Warbaahinta Federaalka uu ku saleysan yahay dhaqanka caalamiga marka la eego mudda dheerayd ee ay geeddi socodyada la isbarbardhigay ay mareen markii la qorayay sharcigan si loo xaqiijiyo inuu yahay mid waafaqsan sharciga caalamiga. Sidoo kale, la taliyaal badan oo caalami ah ayaa ka shaqeeyay sharcigan. Warbixintu waxay ku guuldarreysatay inay soo qaadato wadatashiyadii dhaadheeraa ee sharcigan uu soo maray muddo aad u dheer. Intii lagu jiray marxaladihii ugu dambeeyay waxaa jiray guddi ka kooban 21 qof oo 16 ka mid ah ay ka socdeen warbaahinta gaarka loo leeyahay. Wareysiyo ayaa gacan ka geystay wadatashiyadii dadweynaha ee lala yeeshay kumanaan dad ah oo ay ka midyihiin kuwo jooga gobollada iyo xitaa kuwo jooga meelo kale sida Nairobi iyo London. Dad badan baa ku lug lahaa geeddi socodka lagu dejiyay sharcigan, Wasaaraddu waxay keliya qabanaysay inay isku duwdo ayna xiriiriso dadaallada. Micnaha ereyadu ma aha ku 'aan caddeyn', waxay u taalla maxkamadda inay go'aamiso waxa loola jeedo 'faafinta war been abuur ah'. Waxay rabeen inay ku nuuxnuuxsadaan in faafinta war been abuur ah ay mushkilo tahay.
- Marka la eego faqrada 25 & 26 – waxay ku heshiin waayeen sida la soo jeediyay ee lagu sameeyay magacaabidda Golaha Warbaahinta Qaranka, gaar ahaan bulshada rayidka oo la siiyay 3 maalmood oo keliya inay ku soo magacaabaan wakiilladooda ugu jira Golaha. NUSOJ kama horjeesan, SIMHA oo keliya ayaa ka soo horjeesatay. Iyagu (SIMHA) wakiil baa ugu jiray Golaha laakiin qofkii wuu iscasilay.

Waxaa intaa dheer, Wasaaradda Amniga Gudaha ayaa codsatay in muddada la kordhiyo ilaa maalintii Sabtida 27kii bishii Agoosto 2016 si ay u hubiso dhammaan xogta warbixinta ku jirta.

Haddii aad qabtaan su'aalo dheeraad ah, fadlan ha ka shakinina inaad nala soo xiriirtaan.

Mahadsanidiin
Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند الصومالية
الرئاسة
مكتب الرئيس

OFFICE OF THE PRESIDENT
PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Tix: AGM/DPS/152/2016** **Garoowe** **19 Agoosto 2016**

**Ku: Md. Howard Bell – Madaxa, Xafiiska Degaanka Puntland, UNSOM**

**Og: Mudane Madaxweyne Cabdiweli Maxamed Cali**

Waxaan warqaddan u soo qorayaa si aan kuu la wadaago jawaabteena rasmiga ah ee ku aaddan warbixinta UNSOM/OHCHR "Xaqa Xorriyadda Hadalka", ee uu UNSOM u soo gudbiyay Mudane Madaxweyne Cabdiweli Maxamed Cali. Jawaabtu waxay si gaar ah u taabanaysaa warbaahinta iyo waaxda caddaaladda. Warbixinta oo xasaasiyadeeda leh awgeed, waxaan jecelaan lahayn inaan halkan ku qeexno sida ay muhim u tahay in si aan eexasho lahayn oo dhabta ku qotoma looga haldo mawaadiicda lagu muransanyahay ee halkaa ku qoran.

Haddaan ka hadlo arrinta warbaahinta Puntland ka jirta, Puntland waa dowlad dimuqraadi ah oo ku faanta xorriyadda warbaahinta iyo hadalka iyo anshaxa. Sida carrabka lagu adkeeyay qaybta 2aad ee warbixinta 'Sharciga Warbaahinta Puntland,' waxaan ka murugoonay oo aan cambaareynaynaa wixii weerar jir ahaan loogu geysto wariyeyaasha. Markaan akhrinay qaar ka mid ah arrimaha ugu waaweyn ee warbixinta lagu soo bandhigay, waxaa muuqata in xogta laga soo bandhigay hal dhinac oo keliya. Qaar ka mid ah eedeymaha warbixinta lagu soo bandhigay waxay u baahanyihiin in si taxadir leh loo eego. Maadaama dhacdooyinka iyo colaadaha la soo bandhigay ay ka muuqato inaanay lahayn ilo laga soo xigtay, waxaa dhici karta in xogta la sheegay si xor ah loo fasiro, sidaa darteed waxaan ku talin lahayn in warbixintan dib loo eego.

Qodobada ugu waaweyn:

- Inkastoo ay ilaaliso xeerka anshaxa xorriyadda hadalka, xukuumaddu weli waxay xaq u leedahay inay xanibto wixii tebin warbaahin ah oo wax u dhimmi kara ama waxyeello u geysan kara nabadgelyada dowladda. Sharcigan caalamkoo dhan baa laga aqoonsanyahay, nabadgelyada dowladda ayaana ah oo welina ahaan doona mudnaanteena koowaad.
- Waxaan dareemeynaa murugo ku aaddan in UNSOM aan iskaashi la lahayn wasaaradda ay khuseyso, waayo waxaan rumeysanahay in qaar ka mid ah ilaha ay warbixintani soo xigatay ay yihiin kuwo aan lagu kalsoonaan karin marar badana ay yihiin kuwo sheekooyin been abuur ah si ay u qanciyaan ajendahooda, oo la macna ah 117 marka la eego Md. Deperani oo aan la xirin loona xanibin dhacdooyinka ku xusan warbixintan, laakiin waa kiis kale oo gebi ahaanba ka duwan ee uu ka qaybqaatay kicinta colaad beeleed iyo olole siyaasadeed. Waxaa lagula taliyay inuusan shaqeynin ilaa laga gaaro waqtiga maxkamadda la soo taagayo; hase ahaatee, wuxuu doortay inuu jebiyo xanibaaddiisa taasoo keentay in la soo qabto.
- Haddaan ka hadlo Idaacadda Radio Daljir, kulan baa lagula yeeshay Wasaaradda Warfaafinta, waxaana si cad loogula taliyay inayna wareysi qaadin ama aanay faafinin borobagaandho ay leeyihiin kooxaha argagaxisada ahi sida Daacish (ISIS). Hase yeeshee, way iska indhatireen amarka tooska ah taasoo keentay in si ku meelgaar ah loo xiro idaacadda.
- Wareysiga 'lagu andacooday' inay Idaacadda Radio Daljir (118) la yeelatay Wasaaradda Warfaafinta waa kiis kaloo been abuur ah. Wasiirku kama warhayn in laga duubayay, tani ogolaansho la'aan baa la sii daayay waxaana loo tifaftiray si iyaga dadtooda ku jirto. Tani waxay si cad u muujinaysaa anshax la'aan iyo in Idaacadda Radio Daljir ay si cad u jebisay xeerka anshaxa warbaahinta.
- Sidaan dhammaanteena wada ognahay Baarlamaanku wuxuu ansaxiyay Hindise Sharciyeedka Warbaahinta. Qodobka 4aad, qaybta 5aad ee Sharciga Warbaahinta Puntland wuxuu qeexayaa inay qasab

tahay in wariyaha Puntland jooga la diiwaangeliyo lana siiyo Kaar Aqoonsi oo rasmi ah si uu u shaqeeyo. Marar badan baan Ururka MAP ka codsanay inuu na siiyo liiska wariyeyaasha 'diiwaangashan', hasee ahaatee, way diideen inay iskaashi nala yeeshaan. In la bixiyo Kaarka Aqoonsiga iyo diiwaangelintu waxay kordhinaysaa amniga dowladda; hase ahaatee, waxaan dareemaynaa in Ururka MAP uusan fikirkan nala wadaagin.

- Sidoo kale waxaan dhowr jeer ka codsanay telefishinada iyo idaacadaha wax tebiya inay si buuxda dowladda isku diiwaangeliyaan. Hase ahaatee, Ururka MAP ayaa haddana mar kale kaalin joogta ka cayaaray faragelinta fulinta middan, taasoo keentay inaan rumeyno in Ururka MAP uusan u hogaansamin Sharciga Warbaahinta Puntland.

Gunaanadkii, waxaan ku faraxsanahay in Wasaaradda Warfaafinta iyo Ururka MAP ay ku guuleysteen inay isku afgartaan arrinta la xiriirta ansaxinta Sharciga Warbaahinta. Ururka MAP wuxuu markii hore ka walaacsanaa Warbaahinta.

Waaxda garsoorka marka la eego, boga 30, faqrada 86 ee warbixinta waxaa ku qoran in "hay'adaha garsoorka Somaliland iyo Puntland waa kuwo aad u habaysan. Waxaa gaabis guud ka jiraa kaabayaasha iyo tayada shaqaalaha".

**Jawaabta Puntland:** Arrintan waa run haddii si loo eego, si looga gudbana Puntland waxay u qoondeysay dhul lagu dhiso maxkamado cusub ee magaalada Boosaaso, laakiin ballanqaadkii UNDP ee lagu fuliyo dhismaha weligii lama fulinin dhibaato xagga dhaqaalaha ah awgeed. Dowladdu waxay magacawday gudoomiye cusub ee garsoorka iyo xubno cusub ee Golaha Sare ee Garsoorka oo lagu bedelayo kuwii hore taasoo qayb ka ah dadaalka ay dowladdu ugu jirto inay dardargeliso nidaamka garsoorka, waxaana la filayaa dib-u-habayn dhab ah oo lagu sameeyo garsoorka Puntland bilaha soo socda.

Isla boggaas, faqrada 87aad ee warbixinta, ayaa sii sheeganaysa in "walaac halis ah uu ka jiro madaxbanaanida garsoorka. Hanaanka sharci ee heerka federaalka iyo heerka dowlad goboleedkaba si buuxda uguma hogaansana halbeegga caalamiga. Tusaale ahaan, marka la eego qaabka magacaabidda garsoorka, garsoorka waxaa qaabeysay siyaasad ku saleysan beelaha oo weli sii qeexaysa bulshada. Duruufahan sidan oo kale ah waxaa garsooreyaasha laga filayaa inay u eexdaan beelahooda, oo ay go'aanadooda ku saleeyaan danaha siyaasadda ee aan ku saleynin sharciga, taasoo dhaawacaysa kalsoonida dadweynaha ay ku qabaan hay'adaha garsoorka maadaama ay liitaan ama ayna jirin hanaan lagu kormeero laguna xakameeyo musuqmaasuqa iyo anshax xumada garsoorka oo baaxday".

**Jawaabta Puntland:** Dastuurka Puntland wuxuu si cad u qeexayaa madaxbanaanida buuxda ee garsoorka, taas oo loo marayo halbeegyada caalamiga ah ee lagu hubiyo ilaalinta iyo isu-dheelitirka awoodaha (check and balance) ama aragtida kala-soocidda awoodaha. Hab dhaqan ahaan, ma hayno warbixinno sheegaya garsoorayaal Puntland ah oo lagu eedeeyay eex qabiil, marka in warbixinta si aan kala sooc lahayn oo qaabkaan ah loosoo saaro waa ijaafayn loo maray tub khaldan. Waa sax in garsoorayaasha Puntland ay iskugu jiraan qabaa'il kala duwan laakiin taas mecneheedu ma aha mid kasta u eexdo qabiilkiisa. Waxaa jiray xaalado garsoorayaasha qaar la cabsi geliyay oo ay cabsi geliyeen dad ku qabiil ah sababo la xiriira xukunno aanay ku qancin oo ay soo saareen garsoorayaal ku qabiil ah.

Eedeynta musuq-maasuqa, garsoorka sare ee Puntland wuxuu leeyahay waax loo xilsaaray ogaanshaha jiritaanka eedeymaha musuqmaasuq, waxaana taageero ay ka heshaa hay'adda UNDP. Sanadkii 2014, Madaxweynaha Puntland ayaa magacaabay guddiga dib u habaynta garsoorka. Guddigu wuxuu soo gudbiyay qiimayn dhamaystiran oo ku saabsan garsoorka. Iyadoo laga duulayo tala-soojeedintii guddigaas ayaa waxaa shaqada laga fariisiyay dhowr garsoorayaal oo lagu eedeeyay musuqmaasuq iyo tayo la'aan. Tani waxay tusaale cad u tahay sida golaha garsoorka ee Puntland uu muhiimad gaar ah u siinayo arrimaha la xiriira musuqmaasuqa iyo tayo xumida garsoorayaasha.

Isla boggaas iyo isla faqraddaas, waxaa lagu sheegay “Garsoorayaasha cusub ee la magacaabo, ma qaataan tababarro hordhac ah, waxaana xaddidan tababarrada lagu dul qaato shaqada (on-the-job training). Waxaa intaas sii dheer, nidaamka cadaaladda Soomaaliya wuxuu iskugu dhafanyahay sharciyo farabadan. Garsoorayaashu marka ay xaalad go’aan ka gaarayan waxay culays kala kulmaan tixraaca sharci ee tirada badan”

**Jawaabta Puntland:** weli wax waa ka jiraan tiro badnida sharciyada, taas oo caqabad ku ah sarraynta iyo ku dhaqanka sharciga. Si kastaba ha ahaatee, Puntland waxay hormuud u noqotay dadaallada la isku waafajinayo sharciyada, iyadoo arrintaas kala shaqaynaysa hay’adda UNDP. Waxaa dadaalladaas kamid ah hirgelinta 4 Xarumood oo Dadban oo Xallinta Khilaafaadka loogu talagalay (Alternative Dispute Resolution Centres) halkaas oo odayaal dhaqamedyada iyo qudaadda [shareecada] ay ku xalliyaan dacwadaha aan ahayn fal dembiyeedyo culus sida kufsiga iyo dilka, waxayna kiisaskooda ka diiwaan-geliyaan maxkamadda darajada koowaad. Qorshahani wuxuu ahaa mid guulaystay waxaana socdo dadaallo lagu kordhinayo [tirada] xarumaha Dadban ee Xallinta Khilaafaadka oo laga hirgeliyo dhamaan deegaanada Puntland si loo xoojiyo ku dhaqanka iyo sarraynta sharciga, isla markaasina loo wada helo cadaalad.

Waxaa Puntland ka jira siyaasad loogu talo galah Xarumaha Dadban taas oo hagaysa dhamaan hawlaha Xarumaha Dadban, taas oo caddayn u ah sida Puntland ay uga go’antahay inay ka gudubto sharciyada kala duwan ee tirada badan.

Marka aan ka hadalno tababar la’aanta garsoorayaasha, taasi ma xeer uma aha Puntland. Garsoorayaasha magaalooyinka waawayn badankood waxay haystaan shahaaddo jaamacadeed oo culuumta sharciga ah. Warbixintii ugu dambeeysay ee ay soo saareen golaha garsoorka Puntland iyo Wasaaradda Cadaaladda waxay horumar ka muujiyeen xirfadda garsoorka. Garsoorayaal farabadan ayaa tababar ku qaatay shaqada oo iyagoo shaqaynayana ay tababar ka heleen garsoorayaal sare, jaamacado/kuliyado culuumta sharciga ah bixiya iyo hay’adda UNDP.

Isla boggaas, iyo isla faqraddaas, waxaa kaloo lagu sheegay “Waxaa intaas lasii jirta, in aanay jirin qodobo sharci ah oo u degsan hay’adaha garsoorka oo si gaar ah loogu badbaadinayo haweenka, mana jiro qaab-samayn sharci oo ku saabsan xadgudubka jinsiga ee Soomaaliya, taas oo hawenka ka hor istaageysa inay cadaalad helaan oo looga garnaqo fal-dembiyeedka noocaas oo kale ah”

**Jawaabta Puntland:** Tani waa tusaale kale oo camimid ah (kala sooc la’aan) iyo ijaafayn. Golaha Wasiirada ee Puntland wuxuu dhowaan ansixiyay hindise-sharciyeedka xadgudubyada jinsiga, wuxuuna hadda horyaalaa oo ka wadahadlaya baarlamaanka si ay u meel mariyaan. Taas oo kaliya ma aha, ee sidoo kale la horkeenay golaha wasiirada sharciga da’yarta (juvenile law) si loo ansixiyo. Sidoo kale, wasaaradda cadaaladdu waxay ku hawlantahay hindise-sharciyeedka Gudniinka Fircooniga ah (FGM Bill). Waxaa jiro qodobo kamid ah Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ee 1963, kuwaas oo fal dembiyeed ka dhigaya xadgudubka jinsiga eek a dhanka ah hawenka, xeerkaas oo weliba la sameeyay muddo fog ka hor (gaboobay).

Sidaas dartead, ma dhihi karno waxaa meesha ka maqan sharciyadii difaacayay oo ilaalinayay haweenka, laakiin waxaan dhihi karnaa kuma filna.

Bogga 31aad, faqraddiisa 89 ee warbixinta, waxaa lagu sheegay “in bishii Juun ee sanadka 2016 dablay aan heybtooda la garan ay magaalada Gaalkacyo ku toogteen oo ay dileen qof ka tirsanaa shaqaalaha dowladda una ololeeynayay xuquuqda haweenka ee gobolka Mudug. Waxay ahayd qof caan ah oo u ololeeysa arrimaha haweenka isla markaasina aad u dhaleeceyn jirtay Alshabab, waxayna tiir u ahayd dadaallada nabadaynta iyo dib-u-heshiisiinta, mana jirto cid sheegatay mas’uuliyadda dilkeeda, dadki lagu tuhmay arrinkaasina waxaa lasii daayay isla maalintaas”.

**Jawaabta Puntland:** Qaybtan kamidka ah warbixinta waa eedeyn mala-awaal ah oo aan sal iyo raad lahayn. Booliska Puntland waxay sameeyeen baaritaano, welina sooma qabanin la-tuhmayaashii dhabta ahaa. Kuwii lagusoo qabtay

hawl-gallada boolisku sameeyay waa lasii daayay markii lagu waayay wax caddayn ah oo lagu dacwayn karo, taasina waxay ka turjumaysaa sida uu qabo sharciga Puntland iyo kan Soomaaliya ee sheegaya in ruux la tuhunsanyahay aan xabsi lagu hayn karin 48 saacadood ka badan haddii aanay jirin tilmaamooyin/daliil xooggan oo fasaxaya in muddada xabsi-ku-haynta la dheereeyo sababo la xiriira baaritaano dheeraad ah. Puntland waxay caan ku tahay dagaalka ay kula jirto argagixisada, weligeedna ma dhicin inay sii daysay argagixiso. Waxaa intaas sii dheer, baaritaanada ay sii kordhiyeen ciidamada nabad-sugidda Puntland darteed, ayna horkacayaan Ciidamada Amaanka Puntland oo la shaqaynayo ciidamada Dana bee ka tirsan Ciidanka Xoogga Soomaliyeed ee Federaalka ah, waxaa lagu guuleystay in lasoo qabto xubro sar-sare oo katirsan Alshabaab. Tani waxay si aad u wanaagsan uga turjumaysaa sida dhabta ah ee Dowladdani uga go’antahay inay xiddada ugu siibto una burburiso argagixisada xagjirka ah.

Salaan Diirran,

Deeq S. Yuusuf
Agaasimaha, Xafiiska Madaxweynaha
Dowlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya

DOWLAD GOBALEEDKA JUBBALAND
EE SOOMAALIYA

دولة إقليم جوبالاند الصومالية
وزارة العدل والشؤون الدينية

**DOWLAD GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA**

**Wasaaradda Cadaaladda, Dastuurka iyo Arrimaha Diinta**

**Tixraac Lr: 11/W/C/D/ARD** **22/08/2016**

Mudanayaal,

Annagoo daba soconna shirkii aan 18[ki] Agoosto 2016 idinkula qaadannay xafiisyada aad ku leedihiin Gegida Dayuuradaha ee Kismaayo, ayaa Wasaaradda Cadaaladda, Dastuurka iyo Arrimaha Diintu waxay dooneysaa inay caddayso Faqradda 14[aad] ee Warbixintiini Guud ee Koobnayd ee Xuquuqdaq Xorriyadda Hadalka. Waxaad Warbixinta ku soo qaadateen 2 dhacdo oo 17 haween ah loo xiray oo xabsiga ay u taxaabeen Ciidamada Amniga ee Dowlad Goboleedka Jubbaland, iyadoo xarigaasi uu ka dhashay muran dhul/hanti oo ka dhacay Kismaayo.

Fadlan waxaad ogaataan in dhacdada Kismaayo ay la xiriirtay goobo iyo dhul ay Dowladdu u qoondaysay in lagu sameeyo horumarin. Waxaa dhacdadaas ku lug lahaa oo kaliya 10 haween ah ee ma ahayn 17. Dowladdu waxay qandaraas ku siisay shirkad gaar loo leeyahay si ay u fuliso mashaariicda horumarineed oo ay kamid tahay in laga dhiso goob caafimaad, laba iskuul/dugsi dadweyne iyo saldhig boolis. Markaa kadib, waxaa goobta tegay koox haween ah oo ka dhigay banaanbax rabshada wata, iyagoo dhagxaan ku tuuray ciidamadii amniga ee loogu yeeray inay xaaladda dejiyaan. Haweenkii banaanbaxayay waxay qaan ku sheegteen goobaha iyo dhulka aan soo sheegnay, iyadoo sida haweenkaasi ula dhaqmeen saraakiisha booliska iyo shaqaalihii dhismaha ay ahayd mid aan la aqbali karin, iyagoo jebiyay nabadda, sharciga iyo kala-dambaynta. Ciidanka Adeegga Amniga ee Dowlad Goboleedka Jubbaland ayaa arrinta soo farageliyay, waxayna xireen oo xabsiga u taxaabeen haweenkii iyagoo xabsiga ku hayay saacado kooban oo kaliya, waxaana lagu xiray saldhigga ugu weyn ee booliska ee Kismaayo, waxaana xabsiga lagasii daayay isla maalintii la xiray. Haweenkaasi waxaa lagula taliyay loogana digay inay ka fogaadaan banaanbaxyada noocaas oo kale ah ee rabshadaha wata.

Dhacdada Buurdhuubo ee aad ka dhawaajisay, waxaan sameynay baaritaanno dheeraad ah oo aan ku dabageleyno sidi aan u ogaan lahayn xaqiiqada arrintaas. Maadaama aan baaritaan buuxa ku samaynay arrintan, waxaan hadda xaqiijinaynaa in dhacdadaasi aya ahayd natiijo ka dhalatay muran u dhexeeyay laba kooxood oo haween ah oo ka jira magaalada kuwaa oo isku heystay maamulidda iskuul ku yaala deegaanka. Hay'adaha dowladda ee deegaanka wax lug ah kuma lahayn dhacdadaas la xiriirtay maamulidda iskuulka. Markii labadii kooxood ee haweenka ahaa ay dagaallameen, waxaa arrinta soo farageliyay booliska deegaanka, sida lasoo wariyayna waxaa intii hawshu socotay la xiray hal qof oo dumar ah oo kaliya, waxaana lasii daayay isla maalintaas iyadoo aan wax dacwad ah lagusoo oogin.

Maadaama aan xog faah-faahsan ka bixinnay labadaas dhacdo, waxaan ku talinaynaa in arrinta lagu sameeyo is-barbardhig haddii xogta aad hesheen ay ka turjumayso sidi wax u dheceen iyo haddii kaleba. Haddii aan sidaas la samaynin, warbixintiinnu ma noqonayso mid dhexdhexaad ah oo lagu kalsoonaan karo maadaama “cadaalad waa la sameeyay oo kaliya aan lagu kaaftoomin, balse la doonayo in la arko caddaaladdii la sameeyay”

Mahadsanidiin

Salaan Qiimo badan

Dr. Aadan Inshar Omar

Wasiir Ku-xigeenka Cadaaladda, Dastuurka iyo Arrimaha Diinta

Kismaayo, Dowlad Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## Xafiiska Wasiirka

28 Agoosto 2016

Raisedon Zenenga
Ku-xigeenka Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha-Guud
UNSOM

Mudane Zenenga,

Waxaa sharaf ii ah in aan tixraaco warqaddaadii 16kii Juun 2016, ee ku saabsanayd warbixinadii kamidka ahaa waajibaadka xuquuqul insaan ee Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM). Waxaan kaaga mahad celinayaa in aad ilasoo socodsiisay eedeymaha ku aaddan xadgudubka xorriyadda hadalka ee ku xusan warqaddaada waxaana kuu xaqiijinayaa in Jamhuuriyadda Somaliland ay ka go'antahay fulinta waajibaadka iyadoo la raacayo nidaamka dhowrista sharciga sida uu damaanad qaadayo Dastuurka qaranka iyo sida waafaqsan sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka.

Marka la eego wixii laga dhaxlay taariikhda, gaar ahaan wixii lagala kulmay taliskii arxanka darnaa ee Siyaad Barre, dadkayga iyo Dowladdayduba waxay xorriyadda warbaahinta u arkaan tiirka demoqoraadiyadda, bulshada demoqoraadiga ah ee aan dhisnay lagasoo billaabo xorriyaddii 1991 waa wax aan ku faanno waxaana naga go'an in aan ilaalino. Sidaas awgeed, waxaa sharaf ii ah in aan tixraaco qodobka 19 ee Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka, kaas oo dhowraya xuquuqda qof kasta uu u leeyahay xoriyadda aragtida iyo hadalka oo ay kamid tahay xuquuqda haysashada fikrado faragelin la'aan iyo in [qofku] raadsado, helo uuna gudbiyo xog iyo aragtiyo uu marinayo warbaahinta.

Waxaan soo dhoweynayaa fursaddan aan kaala shaqaynayo adiga iyo UNSOM ee khuseeya dhacdooyinka gaarka ah ee ku xusan warqaddaada anigoo rajaynaya in la xaqiijiyo xuquuqul insaanka muwaadin kasta ee Somaliland. Kadib wada-hadallo iyo wada-shaqayn lala sameeyay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuuriga ah ee Somaliland, Mudane Aadan Xaaji Cali Axmed, waxaan jeclaan lahaa in aan kula wadaago xogtan soo socota oo aan diiradda ku saarayno wax ka qabashada walaaca aad qabto.

- Marka aan eegno dhacdooyinkii ka dhacay Berbera dabayaaqadii bishii May, waxaa farxad inoo ah in aan kugu wargelino in dhamaan wariyeyaashii la sheegay ay maxkamaddu si dhakhso ah usii deysay, kadib markii ay ogaatay in xarigooda aan loo soo marin sharciga.
- Dhacdadii 31ki May ka dhacday Laas Caanood, waxaan kugu wargelinaynaa in wariyihii telefishinka ee la sheegay si dhakhso ah loo sii daayay iyadoo aan waxba lagusoo oogin, kadib markii uu kasoo muuqday maxkamadda horteeda.
- Waxaan fursaddan uga faa'iideysanaynaa in aan kugu wargelino in aanay jirin wariyeyaal hadda ku xiran Somaliland gudeheeda.

Annagoo kula wadaagna walaaca ku aaddan xarigga aan laga fiirsan iyo xabsi gelinta ay ku dhaqaaqaan hay'adaha maxalliga ah, waxaan ku faraxsannahay oo aan ku faanaynaa in nidaamkeena sharci uu si joogto ah u muujiyay in garsoorka uu yahay hay'ad gooni ah oo madaxbanaan taas oo ilaalisa nidaamka sharciga iyo xuquuqul insaanka kale ee muwaadiniinteena. Tan iyo markii la magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadd

Dastuuriga ah bishii Juun 2015, ma jirin amar xarig oo lasoo saaray oo lagu xiray wariye. Mar kasta oo [qof] xabsi loo taxaabo, waxaa hawshaasi fulinayay booliska deegaanka iyadoo lagu salaynayo in qofka xabsiga loo taxaabayo uu fal dembiyeedka faraha kula jiray markaas, wariyeyaashiina waxaa lasoo daayay wax yar kadib markii la xiray. Booliska waxaa laga doonayaa inuu maxaabiista uu keeno maxkamadda horteeda 48 saacadood gudohood, xaalad kastana waxaa lasoo daaynayay isla markii ay kasoo muuqdaan maxkamadda horteeda.

Waxaan qiraynaa in baahi degdeg ah loo qabo dib u habaynta sharciga warbaahinta maadaama sharciga saxaafadda ee 2004 uu yahay mid aan dhamaystirnayn. Waxaa naga go'an in gefafka saxaafadda aan laga dhigin fal dembiyeed, laakiin waxaan weli u baahannahay in cabasho ku haboon iyo hab gar-naqsi loo helo xadgudubyada warbaahinta ee bedelka u noqon kara xukunada fal-dembiyeedyada. Sababtaas darteed, ayaan waxaan taageereynaa geedi-socodka wadatashi ee ay hormuudka ka tahay SOLJA (Ururka Suxufiyiinta Somaliland) si loo gaaro natiijo lagu qanco oo munaasib ah.

Waa in aad ogaataa in heshiiskii Dekedda Berbera uu taageero baaxad weyn ku yeeshay gudaha Somaliland, waxaana soo dhoweeyay dhamaan axsaabta siyaasadda. Heshiiska waxaa ansixiyay baarlamaanka wuxuuna helay 69 cod, halka lagu diiday 3 cod. Sidaas oo ay tahay, waxaan qiraynaa in tiro aad u yar aanay soo dhoweynin heshiiska, waxaana aqoonsannahay in ay xaq u leeyihiin inay soo bandhigaan diidmadooda, laakiin ay u maraan hab aan wax u dhimaynin bed-qabka guud iyo amniga qaranka.

Dhab ayaan u qaadanaynaa, si kastoo ay tahayba, qaabka aad ugu tilmaantay in xarigyadii ugu dambeeyay ay tusinayaan wax sii socda ama qorsheysan. Waxaan kuu xaqiijinaynaa in aanu jirin iskuday abaabulan ama lasoo maleegay oo lagu caburinayo xorriyadda saxaafadda ee Somaliland. Waxaan heysannaa jawi firfircoon oo warbaahineed oo ka jira Somaliland waxaana u qiimaynaa inuu yahay qaab lagula xisaabtamo Dowladda. Sida aduunka laga aqoonsanyahay, iyadoo ay waajib tahay in la dhowro xorriyadda hadalka sida ugu ballaaran ee suurto gal ah, ayaa hadana [xorriyaddaasi] aanay ahayn mid deysan waxaana lagu xaddidi karaa tallaabooyin sharci ah si loo ilaaliyo amniga qaranka iyo bed-qabka guud. Somaliland kuma degdegto xaddididda xorriyadda hadalka, haddii laga maarmi waayana waxaa loo maraa sharciga.

Maadaama ay naga dhacaan qaladaad, waxaan si joogto ah ugu dadaalnaa sidi aan ku horumarin lahayn halbeegyadeenna una xoojin lahayn hay'adeheenna. Sidoo kale, waxaan helnaa tageero caalami ah oo lagu horumariyo xiriirka ka dhexeeya warbaahinta gudaha iyo hay'adaha Dowladda. Waan idinla wadaagnaa walaaciina ku aaddan baahida loo qabo in muwaadiniinta iyo warbaahintuba ay si siman ugu naaloodaan xorriyadda aragtida iyo hadalka waxaana mar kale adkeynaynaa ballan-qaadkeenna ku aaddan fulinta nidaamkeena sharci iyo waajibaadka xuquuqul insaanka ee ku xusan Dastuurkeenna iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka.

Waan ka mahad celin lahayn haddii ballan-qaadyadeenna ku qoran warqaddaan ee ku saabsan xuquuqul insaanka, gaar ahaanna xorriyadda hadalka ee Somaliland la tixgeliyo kanasoo muuqdaan warbixinnada soo socda ama kuwa mustaqbalka ay soo saarayso Qaramada Midoobay.

Waxaan mar kale kaaga mahad celinaynaa sida tooska ah ee aad noogala shaqeysay arrimahaan, iyo dhiirri-gelinta aad nagu siinaysid in aan sii laba jibbaarno dadaalladeenna aan ku xaqiijinayno sidi dhacdooyinka noocaas oo kale ah ama xadgudubyadu aanay mar kale u dhicin. Waxaan rajaynaynaa in si furan oo wax dhisaysa aan u sii wadno wadashaqaynta noocaan ah.

Aad baan kuu salaamayaa,

Wasiirka Arrimaha Debeda
Mudane, Sacad Cali Shire